# AHMIYADDA BADAHEENNA

## BAAXADDA BADAHEENA

Bad waxaa lagu qeexaa: Biya Milix ah oo fadhiya dhul ballaaran. Hadaba si aan wax badan uga ogaanno baaxadda badaha waxaa marka hore mudan in wax laga yiraahdo dhulka ay dul saaran yihiin baduhu. Waxaa la og yahay in dhul weynaha aan ku kor nool nahay uu shabaho kubad, ka diisan labada dhinac ee waqooyi iyo koonfur. Farqiga u dhaxeeya labadeeda dhex roor (axes) wuxuu la eg yahay 44km, celceliska dhererka gacanku (Radius)= 6366km. Sidaas awgeed wareegga (Perimeter) dhulku wuxuu la ekaanayaa $2\pi R$: 40,000km. Bedka kubada ah wuxuu noqon: $4\pi R2$ = 4*3.1416*63662 =510milyan km2[1] oo 70.6% ay biyo (Bad yihiin), lana eg 360milyan km2, halka berrigu (Qaaraduhu) ka yahay: 29.4% oo la eg 150milyan km2. Badaha waxaa loo kala saaraa iyadoo lagu fadhiisiyay baaxaddaha: Bad (Sea) iyo Badweyn (Ocean), kuwa hore wey tiro badan yihiin, kuwa danbase waa 5(shan), waxay isu yihiin 3% iyo 97%. Bedka badaha waaweyn: waa kuwaan ayadoo lagu daray Badahooda yar yar[2].

1. Badweynta Deggan154 milyan km2.
2. Badweynta Atlantic 105 milyan km2.
3. Badweynta Hindiya 75 milyan km2.
4. Badweynta Barafka ah ee WaqooyI 16 milyan km2.

5. Badweynta Barafka ah ee Koonfur 10 milyan km2.

**Wadarta Bedka: 360M. KM2**

Tilaabta noogu xigta waa inaan xadidno baaxadda badaha dalkeena ee isugu jira Badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed inta aan ku leenahay labadaba. Aan ka bilowno xisaabta xadidda dhererka xeebteena kasoo bilaabato tuuladda lowya Cadde martana Raas Caseyr (Guarda fui) kuna dhamaata tuula yareeyda ee Daara Salaam ee dhacda 4km koonfurta Raas Kiyamboni. Dhererka xeebteena waa 3025km[3], ayadoo lagu xisaabiyay (ku dhawaad) ahaan labada xeebood ee gacanka Cadmeed iyo Badweynta Hindiya in ay kala yihiin 2:3, waa 1210km iyo 1815km sida ay isugu xigaan. Hadaba aan xisaabinno baaxadda badaheenna annagoo og in B/W Hindiya aan ku leenahay 350 N.M (Nautical Miles) oo la eg 648.2km. iyo inaan ku leenahay Gacanka Cadmeed Nus (50%) iyo inta ku beegan xeebteena aagga Raas Caseer. Hadaba bedka badaheena: 1,500,000M km2 oo u dhiganta: 2.5jeer dhulka berriga Jamhuuriyadda Soomaaliyeed yacnii 2.5jeer. Halkaan waxaad ka garan kartaa aqristoow baaxadda xad dhaafka ah ee badaha ilaahey inagu mannadeystay leeyihiin oo weliba qani ku ah kheyraadka nool iyo kuwa aan nooleyn. Haddii aan bar bar dhigno baaxadda badaheenna, badaha iyo badweynayaasha caalamka iyo tan Badweynta Hindiya iyo biya badeedka oo dowladuhu ay wada leeyihiin, xisaabtu waxey noqaneysaa sidan.

(Iyadoo la og yahay in qeyb weyn oo ka mid ah Badaha iyo Badweynayaasha caalamka la wada leeyahay).

- Badaha Soomaaliya/Bad & B/W Caalamka = 1.5/360 = 0.4%.
- Badaha Soomaaliya/Bad weynta Hindiya = 1.5/75 = 2%.
- Badda la wada leeyahay Dowladaha Caalamka = 318/193 = 1.65mal KM2.
- Badaha Soomaaliya 1.5+1.65=3.15mal KM2 oo u dhigma ku dhawaad 1% Badaha Caalamka[(4)].

Haddii badaha caalamka si toos ah loogu qeybiyo dowladaha dunida, mid kasta waxay heli leheed: 360/193=1.865 mal.km2. Haddaba Soomaaliya waxay si sharci ah u leedahay 1.5+1.65=3.150 m. km2 waa in ka badan laba jeer badaheenna[(5)], laakiin dalkeennu (dowlad & shacab) ma og yihiin waxa ay heystaan oo aan la wada heysan oo ah:

1. Inay garato Soomaalidu sida ay u heshay sed-bursi sal sharci leh.

2. Inay ALLE weynaaye ay ku shukriso waxa uu ku manadeystay.

3. Inay u howlgasho sida ay u:

a- Hanan leheyd Badaheeda

b- Soo hoos keeni laheyd siyaadadeeda (Qarannimadeyda).

c- Uga dhigi leheyd Badaheeda kuwa bed qaba deegaan ahaan.

d- Inay u guntato si ay isaga maali laheyd irmaanka Badaheenna oo aan gureyn, si ay u hubiso Amnigeeda Quudka (Food Security).

e- Inay ka qeybgasho ka faa'iideysiga Badda la wada leeyahay oo ay ku leedahay 1.65%.

**Ahmiyadda Badaheenu ay noo leeyihiin**

Qeybta hore: waxaan ku soo bayaaniney baaxadda weyn ee badaheena (Badweynta Hindiya iyo Gacanta Cadmeed), waxaan ku soo gabagabeynay in Baaxadda Badeheennu ay ka tahay badaha caalamka 1%, haddii badaha Dunida loo qeybin lahaa Dowladaha caalamka, waxaan heli laheyn 0,5%; haddii Dad ahaan loo qeybsan lahaana waxaan heli laheyn 0,2%. Hadda biyaha aan leenahay waxay ka badan yihiin 2 (laba) jeer, haddii Dowlado wax lagu qeybsan lahaa; 5 (shan) jeer, waxay ka badan yihiin hadda tirada Dadka wax lagu qeybsan lahaa. Haddaba waxaan heysannaa **Bursiino** weyn oo weliba sharci ah oo na loo wada ictiraafsan yahay: Waa Alxamdu Lillaah. Intaan waxay ahayd Nuxurkii Maqaalkeennii 1aad. Haddaba aan u gudubno Maqaalkeena maanta ee L.2. oo ku saabsan Ahmiyadda Baddu ay noo leedahay, iyo waxa ay inoogu fadhido. Waxaan ka soo qaadaneynaa shanta ugu muhiimsan:-

1. Deegaanka 2. Quudka 3. Ganacsiga

4. Dalxiiska iyo 5. Shaqa siinta Dhallinyarada

**I.** Dowrka Badaheennu ay ku leeyihiin nidaaminta Deegaanka (Bii'ada). Bedkaa weyn ee Biyaha Badda oo ku yaal Deegaan kulul oo ku dhaca (Dhul baraha), waxaa ka baxaya Uumi biyo fara badan hawada ku sii daaya, kaasoo khafiifiya kuleylka Qorraxda, Dabeyl qabowna keena (Habeenkii) oo aad loogu raaxeysto, gaar ahaan Deegaannada Badda ku dhow (ilaa 100km). Waxaa lagu soo dari karaa in uumigu noqdo roob ku da'a Badda, aaranna ka dhiga Badda, si noolaha ku jira ay ugu diirsadaan.

Haddii Dalka Soomaaliya uu ku oolli lahaa meel ku taalla dhulbaraha badna aysan ku wareegsaneyn kuleylkiisu wuxuu noqon lahaa mid aan la xamili karin.

**II.** Quud la hubo (food security): Qodobkaan waa kan ugu horreeya qodobbada ku saabsan AHMIYADDA BADDA, haddii la barbardhigo Ganacsiga, Dalxiiska, Shaqo siinta… iwm. Nooluhu uu dadku ka mid yahay waxay ku nool yihiin waa Quudka oo la'aantiis wax noolaan kara ama nolol macno leh yeelan kara ma jireen. Dadka ka heli kara Badda, kana keensan kara, Kheyraadka ku jira waa inta badan Jamhuuriyadda oo wada ah badlay, Dalkuna waa mid badeed oo ka faa'iideysiga Badda dhib kuma ah kumana cusba. Fiiri (Shanta Dowlad gobaleed ee Jamhuuriyadda ee lagu daray Somaliland iyo G.Banaadir, dhammaantood xeebo ayey

leeyihiin) oo qaarkood sida Soomaliland iyo Puntland waxay leeyihiin xeebo ah (ku dhawaad) 850km iyo 1000km oo isku darkoodu uu ka badan yahay BAR xeebaha Dalka. Haddaba ma waanan aheyn Badley. Badaheena waxaa ka buuxa Kalluun nuucyo kala duwan leh, soo qabsashiisuna aysan adkeyn, waayoo aad ayuu u badan yahay, waxaa uuna xaqabtiri karaa Bulshadeena guud ahaan, si toos ah ama si dadbanba: Ganacsi, Shaqo siin, Horumarinta dhaqaalaha iwm. Mandiqadda Badweynta Hindiya, gaar ahaan, galbeedkeedu waxaa lagu tiriyaa keydka Caalamka ee Kalluunka oo Soomaalidu ugu bad ballaaran tahay. Tan kale, Hilibka Kalluunku wuu ka caafimaad badan yahay kan xoolaha, waayoo dufanta ayaa aad ugu yar oo ma keeno dhiig kar, sokorow, culeysna kuma ahaa Baarka oo guud ahaan si fudud ayaa jirka u galaa oo dheefshiidkiisu waa sahal. Soomaaliya, sanooyinkaan dambe, waxay ka bixi la'dahay Abaaro iyo Daadad isku xigxiga oo Xoolihii iyo Dalaggii dhib weyn u geystay oo qoysas badan ama Qabiil Ceyr ka dhigay, halka xagga Badda Aafadaasu aysan ka jirin oo iyadu waa Aaran joogto ah. Kalluunku waa laba nooc guud ahaan: Nooc guri ah oon guurguurin, oo Dalku iska leeyahay 100%, qeybtaan waxay u badan tahay kalluun yar yar oo hilba mac, xeebtana ku dhow, si fududna lagu qabsan karo oo qalabkiisu sahal yahay; cidda jillaabaneysana aysan

u baahneyn tababar, ama uu ku filan yahay inay hal nabar la tuso. Noocaan waxaa ku jira qaar si daran looga doonayo dibadda oo qaali ah; kuwa ka sii mid ah, sida Argoostada iyo Shirimbiga way ka qaalisan yihiin Dahabka. Haddaba Dhallinyaroy maxaa idinka horjooga in aad iska gurataan. Nooca 2aad waa kuwa guurguura oo safar nagu soo mara oo aan leenahay kaliya inta ay marayaan Badaheenna, sida: Toonada, Yaxaaska iyo Sardiinka; kan dambe wuxuu ku badan yahay geeska Raas Caseyr, weliba dhinaca B/Hindiya oo halkaas waxaa ku oolli jirtay Warshad gasaceysa Sardiinka Yurubna waa loo dhoofin jiray. Kan Yaxaaska waa Hilib badan yahay, waayo waa weyn yahay, hase yeeshee waxay ka gurtaan dhegaha iyo tuurta oo aad qaali u ah sida Dheemanka, Hilibkiisana way iska tuuraan qabooojiye la’aan lagu suuq geeyo awgiis, iyadoo ay ka jirto baahi xun xeryaha barakacayaasha iyo kuwa kale oo iska liita; waa dhibaato xalkeedu fudud yahay. Haddii aan u nimaadno Toonada ayadu way fara badan tahay, waana waaweyn tahay, hilibkeeduna aad ayuu u mac yahay; Kallumeysata caadiga ah way soo qabsadaan Toonada, laakiin waa tira yar: 1,2,3, halka maraakiibta xadda kheyraadkeenna (Burcad Kalluun, waa magaca ay u bixisay Hey’adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed) oo aad u qalabeysan ayaa Tamadisa Toonada; sidaas awgeed

maaddaama Toonadu ay tahay mid guurguureysa oo aad qabsan karto oo kaliya marka ay ku jirto Baddaada, haddana aad Ajnabigu u dhaco, waad garan kartaa in go'aankii Dowladda ee fasax siinta Maraakiib baddeenna ka jillaabataToonada inuu ahaa mid xikmad ku fadhiyey. Calaa kulilin maqaal gaar ah ayaan ku faahfaahin doonnaa Kheyraadka nool ee Baddeheenna.

**III.** Qodobka 3aad ee Ahmiyadda (Waxtarka) Baddu ay noo leedahay waa Ganacsiga, waayo Baddu waa waddo furan oo isku xirta Dowladaha Dunida. Marka laga hadlayo ganacsiga Badda waxaa loola jeedaa Afarteeda Tiir, oo kala ah:

- Badda (waddo)
- Maraakiibta Badeecadaha sida
- Dekedaha wax laga raro, waxna laga soo dejiyo iyo
- Qaanuunka Badda (Dalka iyo Caalamka), oo aan maqaal gaar ah aan ku soo qaadan doonno.

Waxaa intaas lagu kordhin karaa in Shacabku yahay mid dabeecad ahaan iyo dhaqan ahaan ugu jajaban ganacsiga, Dalkuna uu leeyahay wax laga ganacsado. Lixdaan tiir way noo dhan yihiin haddii aan nahay Soomaali. Ahmiyada Baddu ay u leedahay ganacsiga Dalkaan waa mid iska cad, waayo Taariikh ahaan Somaalidu xiriir ganacsi oo la sheegi karo oo ku yimaada waddo aan Badda ahayn ma jirin, Taariikh ahaan, ilaa maalinta maanta ah Badeecadaha Dhulka nooga yimaado haddii laga reebo Jaadka ama

noo tagta marna ma gaarin 10%, inta badan ganacsigu waxuu ku yimaadaa/ tagaa Badda. Dowrka Badda ee ganacsiga waan garannay, laakiin waxaanan garan waxa uu noogu fadhiyo ganacsi. Aqristow is-eeg qof ahaan adigoo tirinaya labiskaga, min kabaha ilaa koofiga; ma ka heli kartaa hal shey oo Dalkaaga lagu sameeyey; koofiyadaha qaar ayaa Dalka lagu sameeyaa, laakiin Duntooda halkee laga keenay? Gurigaaga eeg waxa yaalla dhexdiisa oo nooc kasta leh, dibadda ayeyna ka yimaadeen, Raashiinkaaga badankiis, Daawada, Qalabka dhismada, Gaadiidka …..IWM, waa la soo waariday; laakiin Bad la’aan ma kuu imaan karaan, jawaabtu waa Maya. Dhinac kale waxa aad ka soo waariddo Dunida sadaqo kuma yimaadaan, ee waxaad ku bixisaa wax aad leedahay oo aad hore u tacbatay, welina kuu buuxa, waxaana ugu horreeya Xoolaha iyo waxa ka soo baxa, Dalagga Beeraha oo noocyo badan, Kalluunka Kheyraadka Jiqda Sida:- Luubaanta, Xabagta Hidi, Malmalka, Malabka.. IWM. Haddaba Ganacsiga Dibaddu waa tiirka nolosheenna, Bad la’aanteedna ma jiri karo ha ahaado Dhoofsasho ama Keensasho,

Waxaa ka mida tiirarka ganacsiga dibadda Dekedaha, waana inoo buuxaan, ha ahaadaano kuwo casri ah sida: Berbera, Boosaaso, Muqdisho iyo Kismaayo iyo kuwo Taariikhi ah oo shaqeyn kara sida: Zeylac, Xiis iyo Meydh, Hobyo, Mareeg, Marka, Baraawe oo Doomanka yar yar qaabila ama; Dekedo macmal ah oo lagu shaqeysto; intaa waxaa la sii jira in xeebaha Dalka oo dhan iyo

Jasiiraduhuba ay leeyihiin Dekedo. Nuxurka warka Dekedaha Dalka waa: Meel Kasta waa Dekedo, haba kala awood badnaadeenee. Haddaba waqtigaan baahi Dekedo ma qabno. Waxaa ii herey Qodobkaan Maraakiibta ganacsiga waa mid aan haba yaraatee mushkilad iyaan ka jirin. Dowladda Soomaaliya hore waxay u lahaan jirtay maraakiib ganacsi, waxaana jirta Wasaarad la yiraahdo Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha, mana foga inaan aragno maraakiib ganacsi oo Dalku leeyahay, laakiin baahi degdeg ah looma qabo.

## IV. Shaqa siinta Badda

shaqo la helo lana qabto waxaa loo yaqaan howl miradhal noqota oo lagu noolaado, waxaa la yiraahdaa shaqadu waa furaha Nolosha, oo nimaan shaqeysan shaah ma cabo, laakiin waxaa loo baahan yahay in marka hore la helo meel laga shaqeeyo oo miradhal leh. Haddaba Baddu waxay ugu horreysaa meelaha laga shaqeyn karo oo miradhal ah iyo sidaan:-

1. Qof qof kaligeed ah: Waxa ku filan inay sameysato ul dheer oo xarig ka raaraco oo foodda ku wata bir yar oo qaroofan, waana arrin uu qofku diyaarsan karo. Dabadeed uu iska fadhiisto Jabal ( meel sare ) oo ku taal badda dhinaceeda ama uu galo biyaha ilaa jilibka, qalabkiisana uu ku rito badda, waxaa dhab ah inuu mudda gaaban uu ku helaayo Danbiil Mallaay ah oo Qoys si fiican u deeqda Beri. Sidaas haddii

qof kasta uu sameeyo sidaas shaqo la'aan ma jireyso, laakiin Jaamicigu ama kan ka baxay D/S, D/Dh. uu ka xishoodo ama uu jeedaadiyo shaqo nikteen loo qaato shaqo la'aantu way jiri doontaa, laakiin Baddu waa ka bari.

2. 2-3 wada shaqeysa (shirkad shaqo): Waxa ku filan inay sameystaan Huuri seeb ah, waxa huban inay soo helayaan kalluun ka bata baahidooda, ayaga naftooduna ay u baahdaan shaqaale (gade, qale, kariye, kala qeybiye kalluun iwm). Kharajka huuriga ma badna, waana mid ay isaga bixin karaan muddo gaaban ugu badnaan Hal bil.
3. Haddii ay diyaarsadaan Dhowr shaqaale ( shirkad shaqo) Hal qaboojiye ama ka badan oo ay kula heshiiyaan kalluumeysatada inay u keydiyaan, ama ay iibsadaan Kalluunka kuna keydsadaan siina gadaan, waxaa ka imaan kara dakhli lagu noolaan karo.
4. Haddii dhowr ay isu tagaan, xoogaa faraqabsi ahna ay raadsadaan oy iibsadaan Doon Matoor leh ama dhowr , BADDANA ka howlgalaan waa howl keeni karta inuu ballaarto Mashruucu, shaqo badanna laga helo; Haddii aay iibsadaan HAL BAJAAJ oo Kalluunka geegeeya xaafadaha waa howl miradhal ah oo DAD cusubi shaqo ka heli karaan.
5. Haddii dhowr ay isu tagaan iibsadaanna HAL GAARI ama ka badan, oy ka gataan kalluun Xeebta Liido, ama iskaashatooyinka, geeyaanna Magaalooyinka iyo

Taalooyinka ku dhowdhow Saldhiggooda shaqo, waa howl faa'idadeedu ay bannaanka taal oo shaqooyin cusub ka dhalin karta meelaha ay geeyaan kalluunka.

**F.G.** Waxaan uga hadlayey Qodobbada,1,2,3,4 iyo 5,waa Dadka saboolka ah ama ku dhow oo aan helli karin maalgelin Buuran oo dantoodu ay tahay NOLOL kaliye oo aan ahayn RIBIX DOON. Kuwa heli kara maalgelin weyn ayaa runtii xoolo badan ka tacbi kara BADDA:- Tusaalle:

1. SHIRKAD leh Dooman noocyo kala duwan leh oo xaqabtiri karta Magaalada iyo Magaalooyinka goballada, amaba Dibadda u dhoofisada noocyada kalluunka qaaliga ah oon hor ugu soo sheegay inay la qiimo yihiin DAHABKA iyo DHEEMANKA, waxay bixin karta shaqa badan.
2. Shirkad sameysata Doomaan waaweyn (Maraakiib yar yar) oo shaqadeedu tahay inay Dadka iyo Badeecooyinka kala geysto goballada Dalka (waa gaadiid BADEED). Ha weydiinin inta shaqo oy abuuri karaan, ama iska abuurmi karta ayagoon ogeyn.
3. Shirkad DALXIIS oo u adeegta Dalxiisayaasha Dalka iyo kuwa Ajnabiga ee daneynaya Dabaasha BADDA iyo Qandiirka Xeebta; Dabeecada quruxda badan, dhismooyinka dhaadheer iyo meelaha taariikhiga ah,

shirkadaan waxay xeebaha iyo magaalooyinka ku diyaarineysaa Hotelo, Guryo, meelo lagu nasto iyo meelo lagu cunteeyo, laguna ciyaaro, sidoo kale Gaadiid, shaqaale carbisan iyo kuwo yaqaan AFAF kala duwan. Intaas aan soo tilmaamney haddii la sameeyo, shaqo la'aantu way dhamaan ama wey dhowaan. Dhammaad.
Maqaalkeenna 3aad, waa: Dowrka BADDA ee Dalxiiska Dalka.

**AHMIYADDA BADAHEENA EE DALXIISKA.**

Dalxiisku wuxuu ka mid yahay ilaha dhaqaalaha.

Dadka dalxiisayaasha ah waxaa soo jiita waxa ugu muhiimsan kuwaan:-

1. Bad leh xeeb siif ah oo diirran, siif waxaan ula jeedaa dhulka BIYAHA BADDU ay ka caariyaan oo la isaga socsocdo, lagu ciyaaro, laguna kululeysto.
2. Laashashka (khooriyada) waa carrabbo ka baxa badda oo aada xagga Barriga, si kale haddii loo qeexo waxaa la oran karaa waa webi badeed, qaarkood gaaraan 20 km iyo ka dheer oo kuwa ka mid ah ay Doomanku ku socon karaan; waxaana sida badan ku soo darsama webiyo yar yar (waadiyo); guud ahaan dhinacyadooda waxa ka baxa geedo aad u cagaaran sanadka intiisa badan; intaas waxaa lagu dari

karaa in ay ka abuurmaan dhinacyadooda Tuulooyin kalluumeysata ah, xoolana dhaqda; haddaba Deegaanka noocaan ah wuu qurux badan yahay.

3. Webiyada iyo Wadiyada ku soo dara Badda, gaar ahaan kuwa Doomanku ay ku socon karaan oo Deegaanka Siiya Biyo Cas oo ku fida Masaaxad weyn ee Badda iyo labadooda dhinac ee sida badan leh geedo waaweyn oo aad u cagaaran iyo tuulooyin ku firirsan dhinacyadooda oo soo jiita DALXIISAYAASHA.
4. Jasiiradaha, gaar ahaan kuwa la deggan yahay, lehna Dekedaha, welina, ay ku nool yihiin Xayawaanada quruxda badan ama Naadirka ah, sidoo kale dhir noocyo gaar ah kala leh.
5. Dekedaha, gaar ahaan, kuwa casriga ah iyo waxa ka soo dega iyo waxa ka dhoofa, qalabkooda iyo dhaqdhaqaaqooda.
6. Dhismaha dhaadheer ee Magaalooyinka Xeebaha, qaabka loo nidaamiyey dhismaha, wadooyinka, suuqyada …iwm.
7. Meelaha Taariikhiga ah, Masaajid, Mazaar, Taalooyin, Madxafyo..iwm.
8. Dhulka laga helo Xayawaanka Duur joogtada ah kuna dhaw xeebaha.
9. In ay diyaar yihiin ADEEGYADA Dalxiiska, sida : Hotello, Guryo, Gaadiid, shaqaale tababaran, turjumaano ..iwm.

10. Ugu dambeyntii in goobaha Dalxiisku ay Nabad yihiin, gaar ahaan, iyo Dalka la booqanayo guud ahaan.

Qodobbada aan soo tirinnay waa kuwa Dabiici ah ama muddo hore  jireen, haddii laga reebo Adeegga iyo Amniga oo ayagu ah furaha Dalxiiska.

Hadda, ka dib, markii aan soo xusnay waxa soo jiita Dalxiiska Dunida, waxaan u gudbeynaa inaan ka xulano Dalkeenna (xeebaheenna) Goobo Dalxiis oo laga helo waxyaabaha aan soo tirinnay badankood si aan u caddeyno in badeheennu (xeebaheennu) ay yihiin goobo dalxiis oo dabiici ah oo nooga baahan kaliya ABAABULID iyo fulin mashaariic Dalxiis. Aan tilmaamo goobaha dalxiiska kuwooda u leh Ahmiyadda gaarka ah howlaha dalxiiska, annagoo ku soconeyna Xeebaha Dalka; waqooyi ilaa koonfur.

## GACANKA CADMEED

### I. Mandiqada Zeylac:

Aan tirinno waxa aan soo xusnay oo laga heli karo HALKAAN.

1. Xeeb diirran oo leh Siif dheer oo bacaad ah, laga soo billaabo LAWYA CADDE galbeedka Zeylac ilaa BERBERA, xeebtaan waa mid Bacaad (Siif ah).

2. Xeebtan ku wareegsan ZEYLAC waxaa ku badan waadiyo Biyo keena oo ka soo rogmada Buuraha, qaarkoodna gaara BADDA oo ka diga Mandiqadda Biyo iyo Cagaar qurux keena.
3. Waxaa ku yaal BADDA Magaalada ZEYLAC, Jasiirrado waa : Sacduddiin (Waqooyi 11km) iyo Ceybaad (waqooyi Bari ee Sacduddiin 5km) Jasiiradahaan waxaa ku yaal dhir dhaadheer oo tiq ah, waxaana ku nool ugaarta: Sagaarta, Cowsha..iwm. Sidoo kale waxaa ku nool Shimbir badeed lagu qiyaasay 100.000 (Boqol kun) lamaane; labadaan Jasiiradood waa la xifdiyey (protected by) UNESCO, waayo waxay leeyihiin qiimo caalami ah.
4. Magaaladu waxay leedahay Deked Qadiimi ah oo la oran jiray AVALITS, shaqeyneysana ugu yaraan 3 (sedax) qarni C.H ( Ciise Hortiis), haddana way noo shaqeysaa, waxay xiriir la laheyd Giriiggii (BATAALIMADII), Roomaankii, Carabta iwm.
5. Waxa ku yaala meelo taariikhi ah: Masaajid, raadad dhismo oo qadiimi ah, oo uu ka mid yahay Masjid Al-Qiblateyn, waxaa kaloo la sheegayaa in

ay ku yaalliin Qaar ka mid ah Qabuurtii saxaabada ee u soo haajirtay Dhinaca Xabashida.

Waqtigaan la joogo waxaa ka socda horumarin Dhaqan-Dhaqaale, waxaana ka socota mashruuc kalluumeysi oo w.s.s (wax soo saar) fiican leh.

Arrimahaan aan soo xusnay waxay ka dhigeyaan Zeylac goob loo soo Dalxiis tago, haddii laga hergaliyo Adeegyada dalxiiska, AMMAANKANA la xoojiyo

### II. Mandiqada Berbara

Berbara waxay leedahay:

1- Xeeb leh Siif, oo waliba xoogaa diirran sida Batalaale.
2- Waxay leedahay dhismooyin cusub oo dhaadheer, waxaana ka socota xaraka nololeed oo aad u tilaabsaneysa
3- Waa Deked Qadiimi ah sida tan Zeylac oo la oran jiray MALOW, waqtigaanna waa Deked casri ah oo waraabisa woqooyiga Soomaaliya iyo galbeedkiisa (kilinka 5aad), waxaa ka dhoofa in xoolaha Dalka Soomaaliya oo leh Ari, Lo' iyo Geel, haddii aad arki laheyd wiishashka Maraakiibta oo xoolihii gaar ahaan geela, ku wada

meel u dhaxeysa dhulka iyo cirka, waad u daawasho tagi laheyd maalin kasta

4- Dhismo qadiimi ah oo ay dhiseen Masar, Turki iyo Ingiriis iyo Masaajidyo hore sida Masjidka Sh. Maama iyo kan Turkiga.
5- Biyo guure: waa ilo biyo xoogaa diiran ay ka burqanayaan oo dadku qabo in ciddii ku qubeysata cudur kasta ay ka bogsaneyso.
6. Waxaa ku dhow Barbara Mazaarka Sh.Yuusuf Alkowneyn (Aw Barkhadle) iyo kan Sh. ABDAAL oo dadka qaarkiis ay dhahaan waa Sh.Abgaal oo Beelo ku abtirsato.
7. Sidoo kale waxaa meelahas ku yaal TAALLO CAJIIB BADAN: oo loo yaqaan RAAS GEEL oo u dhexeysa Berbera iyo Hargeysa. Taalladu waa darbi dhagax adag ah oo ay ku qoran yihiin sawiro xoolo iyo calaamooyin lagu qiyaasay cimrigooda 9,000 (sagaal kun sano) C.H (Ciise hortiis) sidaasna Taalladaanu waxay ku noqoneysaa tan ugu qadiimsan taallooyinka taariikhiga ah ee dunida oo ay ka tageen dadkii hore.

### III. **Mandiqadda Xiis & Maydh**

1. Mandiqaddaan waxay leedahay xeeb dheer oo Siif ah kululna, oo Buuro sarreeya ku gadaaman yihiin, haddana leh geedo dhaadheer iyo kuwa kale oo sida badan tiq ah oy ku nool yihiin Dad, xoolo la dhaqdo iyo kuwa duurba, geedahaan waxaa ka mid ah Fooxa, Hidida iyo Malmalka.
2. Dhinaca xeebta waxaa ku badan waadiyaasha biyaha wada oo qaarkood xeebta tago, taasoo ka dhigeysa xeebta mid cagaar ah.
3. Tuulooyinka Xiis iyo Maydh waxay ahaan jireen Dekedo qadiimi ah, waxaa loo badiyaa in Maydh ay ahayd Dekeddii Maysiloon oo Masaaridii hore ay kala xiriirtay Puntland (Soomaaliya). Waxaa la xasuustaa in Boqor Khuufo, waa kii lagu aasay PIRAMIDAHA weyn ee Jiisa (Qaahira) Qarnigii 25aad C.H.(Ciise Hortiis), guriga Boqorkaan waxaa joogi jiray Nin gaaban (pigmy) oo laga keenay Puntland, lana barakeysan jiray. Maraakiibtii Boqoraddii Masar (Xatshebsuut Qarnigii 15aad C.H) waxay soo gaareen Dekedda Mysilon (Maydh) 1495CH. Waxayna ka rarteen Badeeco qiimo badan; HAL sano ka dib Boqashadii Maraakiibtii Masar, waxaa Boqasho ku tegay Masar Boqorkii Puntland : BARAXO iyo AFADIISII BIIBI, tan kale waxaa halkaas ku yaalla MAZAARKII Sh.Isxaaq Sh.Axmad oo geeriyooday 673H, kuna abtirsato BEESHA

ISAAQ. Runtii Mandiqaddaan Haddii la habeeyo waxay yeelan kartaa AHMIYAD DALXIIS.

**IV. Mandiqadda LAAS QORI.**

1. Halkaan waxay leedahay Xeeb-Bacad ah (Siif Fiican) oo kulul; waadiyo xeebta gaara waqtiga ROOBKA oo keena cagaar iyo qurux.
2. Magaalada L.Qore waa Dekedda iyo suuqa weyn ee Sanaag Bari, waxay leedahay Mashaariic (warshad) kalluun iyo suuq ballaaran oy ku badan yihiin Fooxa iyo Xabkaha iyo Deked dabiici ah, waxayna ku taallaa meel qurux badan dabeecad ahaan.
3. Waxaan aad uga fogeyn (60km) Mazaarka Sh.Daarood (Sh.Cab/maan Sh.Ismaacil Al-Jabarti oo geeriyooday 897H). kuna aasan Heelana (High land ) galbeedka BADHAN 25km. Sh.Daarood waxaa ku abtirsata Beesha Daarood. Calaa kullin Halkaan waxay noqon kartaa haddii la diyaariyo, meel leh Ahmiyad Dalxiis oo huban.

**V. Mandiqadda Ceelaayo.**

Waa Tuulo Bari ka jirta LAASQORI 68km, Boosaasona ka jirto galbeed 37km, Tuuladaan waxay leedahay:

1- Xeeb leh Siif Diirran

2- Buuro dhaadheer oo leh geedo waaweyn oo mar mar noqda Tiq
3- Tuulada waxay leedahay Deked dabiici ah (oo xagga Badda looga imaan karo)
4- Tuuladaan waxaa laga helaa waxaan meel kale laga heli karin, waa Qabuuro yaab leh oo dhagaxyo ay ku wareegsan yihiin oo qaarkood ay iskorsaaran yihiin dhagaxdu, waliba qaar ka mid ah waxay leeyihiin qaab pyramid (HARAM), runtii haddii la nidamiyo cid kasta ayaa u daawasho tagi laheyd

## VI. Mandiqada Caluula

Magaalada Caluula waxay ku taal fiinta Raas Caluula oo ah halka uga woqooyeya Dhulka Soomaaliya, waxay saran tahay xariiqinta dhigta (Latitude: 12,00N). dhinacyada tuulada waxaa ku taal 3(sedax) khoori (laash) oo kala ah:

1. Laash (khoori) Butiyaale (8km) galbeedka Caluula:- khoorigaan waxaa geli kara Doomanka, waxaana ku soo darsama waadi (wabi yar) oo loo yaqaano YARAANI.
2. Khoor fuluuk (11km) waxuuna dhacaa agagaarka tuulada Xaabo oo ku taal galbeedka Caluula, Laashkaan waxuu ku naban yahay xeebta ee ma aado Berriga, waana mid ballaaran.

3. Khoor Calweyn (7km) wuxuuna dhacaa Beriga Caluula. Mandiqadaan waxaa ku badan geedka Manguruufka (waa geed qiimo badan xagga Deegaanka oo ku baxa biyaha milixa, wuxuuna hoy u yahay shimbir badeedka) iyo geedo kale, waa meelo sida badan ah jiq cagaaran
4. Waxaa ku yaala meelahaas 2 (labo) Tuulo oo Duq ah, waana OLLOK 72km barriga Caluula iyo DAAMO 5 km bariga OLLOK. Qiimaha Mandiqadaan waa khoriyada cagaarka ah oo ay ka buuxaan Manguruufku iyo shimbir badeedku, sidoo kale tuulooyin badan oo qaar aad u fac weyn yihiin iyo xeebo leh siif bacaad ah oo kulul. Sida la qiyaasay geedka Manguruufku wuxuu ku yaal: 48000(Afartan iyo siddeed kun) 220km X220km = 7.5% bedka dhulka J.F.Soomaaliya; 40% geedkaan qiimaha badan wuxuu ku yaallaa xeebta Dalka ee Gacanka Cadmeed.

## Xeebaha Badweynta Hindiya iyo Goobaha Dalxiiska

Xeebaha Badweynta Hindiya sida kuwii Gacanka Cadmeed waa wada meelo ku wada habboon DALXIISKA, hase yeeshee waxaan ka soo qaadaneynaa meelo gaar ah xeebtaan Badweynta Hindiya sidii aan uga soo qaadannay meelo gaar ah xeebta gacanka Cadmeed.

1. **Jasiiradda Xaafuun**

   Jasiiradda Xaafuun waxay ka mid tahay (AHEYD) Gobalkii Bari, waxayna dhacdaa Xeebta Badweynta Hindiya, una jirta Raas Caseyr xagga Koonfuro 90 miil (167 km) waa haddii si toos ah loo maro xeebta Berriga, haddii kale oo laga soo wareego xeebta Jasiiradda aad ayey u dheeraaneysa.

   Jasiiraddu waxay u eg tahay Ruux Dad ah oo leh Qoor dheer, Madax weyn  iyo San aad u dheer oo aad moodid inuu Urinayo Tuulada Hurdiyo. Waxaa kale oo Jasiiradda siinaya Ahmiyad dheeraad ah khaliij loo yaqaan Khaliijka Hurdiyo oo xiraya Biyaha u dhaxeeya, Tuulada Hurdiyo iyo Sanka Jasiirada. Baaxadda Jasiiradda iyo Khaliijku way isku dhow yihiin Bed ahaan, waana qiyaas ahaan 400kmsq.

Xeebta Jasiiradaan iyo tan Hurdiyo waxay leedahay Qarar (jaballo) dhaadheer oo waadiyaal ka soo daataan oo keena jiq cagaar ah ee xeebta ku taal.

Jasiiraddaan, marka koobaad, waxaa ku soo jiidanayo luqonteeda dheer oo jeedda qiyaas ahaan 28km oo labadeeda dhinac ay tahay Bad, ballacuna uu yahay ilaa 3km.

Jasiiradda madaxeeda markaad tagto ilaa sankeeda waa xeeb Siif ah oo kulul. Xagga Dhulka Jasiiradda dhinaceeda Bari waa Bacaaddo safan iyo Buuro Jaballo ah oo ku teedsan xeebta Jasiiradda. Dhulka dhexe waa dhul geed gab iyo cows leh oo cagaar noqda marka uu roobku da’o. waxaa ku nool xoollo leh noocyada la dhaqdo. Meelaha qaarkood xeebaha waxaa ku yaalla geedaha Dhaqaalaha : Timirta, Cawbaarka, Qumbaha iyo kuwa daawada sida Sibirka IWM.

Jasiiradda waxaa ku oolli jiray warshad Cusbo (Milix) oo weli la fagto keydkii cusbada oo Talyaanigu soo saaray; laguna gato jawaankii (50kg) 2$ (labo doollar), sidoo kale waxaa socda imminka isku day wax soo saar (cusbo) oo Rajo weyn leh, waxaa weli taagan dhismihii warshadii Cusbada oo ah Raad Taariikhi ah.

Jasiiradda dhinaceeda Bari waxaa ku yaal Raas loo yaqaan Raas Xaafuun oo fannaar leh (light-howse) ($10^{0}$28N, $51^{0}$25’E) waana fiinta ugu bareysa Dalka Soomaaliya iyo Qaarrada Afrikaba. Runtii waa meel ku habboon in la soo booqdo.

Jasiiraddu waxay leedahay laba Deked oo ku kala yaal waqooyiga iyo koonfurta oo lagu kala shaqeeyo waqtiyada ay socdaan Mansoonka NE iyo kan SW

Jaziiradda waxay leedahay Taariikh dheer oo waxay shaqeyneysay Masiixiyadda ka hor; mar uu booqday Kabtankii qoray kitaabka la magac baxay safarkii Badda Eritereya iyo Tan Hindiga (Badda Cas iyo Badweynta Hindiya) oo ahayd Qarnigii kowaad ee Masiixiyadda wuxuu ka arkay Maraakiib badan oo taagneyd xeebta Xaafuun oo ka kala timid Dalal badan; waxayna Soomaaliya ka qaadanayeen:- Foox, Mallaay (la qallajiyey), Qolofta Qubada, waxayna ku beddelan jireen Alaabta la sanceeyo, sida: Alaabta Guriga, Cuntada, Hubka (Seefo), … IWM.

Jasiiradda Xaafuun waxay ka mid noqon kartaa meelaha la xafido oo ah Dhaxal Insaani ah.  Jasiiraddaan iyo Khoorigeeda "Huriyo Bay" waxay noqon karaan goobo Dalxiis oo meelo fog fog looga yimaado, haddii loo diyaariyo adeegyada Dalxiiska, lana sugo Ammaanka guud.

Ruuxii Soomaali ah oon soo booqan Xaafuun wax badan ayaa ka maqan

## 2. Aagga Hobyo

Hobyo waxay ku taal dhul hooseeya oo leh geed gaab iyo bacaad la socda xeebta, laakiin aan ku nabneyn. Xeebtuna jaballo ma leh oo waa iska Darbi bacaad ah oo biyaha badda celiya (ka sarreeya), dhinaca Badda xeebta  waa dhul carro oo siif ah oo qandiir ah sanada oo dhan, baddeenuna waa mid lagu dabaalan karo inta badan sanadda.

Hobyo waa magaalo dhismeysa waqtigaan, burburkii ka dib, oo leh dhismooyin dhaadheer iyo adeeg iska roon, haddana magaaladu waxay leedahay Hotello iyo Suuq ballaaran oo mustaqbal leh, xeebta waxaa ka taagan Fannaar (light house) oo ku hagaaya Maraakiibta Dekeddeeda qaddimiga ah, waqtigaanna waxaa ka socda mashruuc Deked Casri ah. Xeebta dhulka ee Hobyo waa dhul hoose oo cawsley ah iyo geed gab, sida aan u soo xusay, oo xoolo badan ay daaqayaan oo aragti qurxoon. Hobyo waa Dekedda ugu weyn Dowlad Goboleedka Gal-Mudug, waxayna waraabin doontaa, markii la dhameeyo dhismaha Dekedda casriga ah, qeyb ka mid puntland, Hirshabeelle, iyo Soomaali Galbeed. Hobyo waa magaalo Taariikhi ah oo waxay xaruun u ahayd Saldanadii Reer Keenidiid; welina waxaa ku yaal halkaas sarahoodii ay degganaayeen, maamulkooduna ka socday oo mudan in la soo booqdo,

Suldaankii ugu dambeeyey reer keenadiid wuxuu ahaa Cali Yuusuf oo Talyaanigu uu ku soo xiray Xamar asaga iyo Boqorkii Majeerteen ee Cismaan Maxamuud 1925-26, waxayna ku wada aasan yihiin Qabuurta Sh. Suufi oo saaran Madaxtooyada J.F.Soomaaliya. Talyaanigu wuxuu hore heshiisyo saaxiibtinnimo iyo difaac ula galay Odayaasha Qabaa'ilka Soomaaliyeed dabayaaqadii Qarnigii 19aad oo labadaan (Suldaan iyo Boqor) ay ka mid ahaayeen. Xeebta Hobyo, Waqtigaan, waxaa daadsan Haamaha Haraadiga Warshadaha iyo Wasakhda Cisbitaallada Reer Yurub, oo Baddu soo tuftay.

Haddaba Hobyo waxaa u dhan ama u dhow wixii ay daneynayeen Dalxiisayaashu.

## Goobta Dalxiis ee Cadale – Warsheekh

Xeebtaan oo dhirirkeedu yahay 110km oo u dhaxeeysa, Magaalada Cadale iyo Dekedda Ceel macaan 28km Woqooyiga Xamar waa mid aad u qurux badan, xagga Badda iyo Xagga Berrigaba. Xagga badda, Xeebtu waa mid leh Siif iska jiidan oo weliba waasac ah, bacaadna ah, oo badduna ay caadi tahay inta badan sanadka, hawadeeduna tahay mid diirran. Waa xeeb aan dad badneyn, haddii laga reebo rugo kalluumeysato oo ku firirsan xeebta. Xagga dhulka, xeebta waxaa ku safan geedo gaagaaban oo ruuxa dabaalanaya uu ka dhex arki karo dhulka fog xeebta. Dhulka xeebta laga billaabo Dekedda Ceelmacaan ilaa Cadale waa dhul siman oo

cowsley ah oo fidsan inta isho ay gaarto. Halkaan waxaa daaqaya Ari u badan IDO oo ka dhigaya Mandiqadda mid ay ku firirsan yihiin Xoolo kala medeb ah, dhaqdhaqaayana oo siinaya meeshaas Qurux gaar ah.

Intaas waxaa la jirta Ari nooc kale ah oon ka yareyn Ariga caadiga ah waa Deeree (Cowl xeebeed) oo cowlan kuna dhex Mushaaxeysa Riyaha iyo Idaha. Waxaa lagu arkaa ku aadanka Cadale Bacaaddo dhowr ah oo ku dhowaada Magaalada oo Mandiqada ku kordhiya isbeddel la daneyn karo xagga Quruxda dhulka. Goobtaan Dalxiis waxaa udub dhexaad u ah magaalada Warsheekh, Woqooyiga Muqdisho 65km.Warsheekh, sida Magaca ka muuqata waxay ahayd Deked dabiici ah oo si gaar ah X.D.S. uu ugala soo degi jiray Hubka iyo Qalabka culus ee ku socda Caasimadda iyo Xeryaha Ciidanka ee ku teegsan.

Tan kale, magaalada Warsheekh waa mid leh Taariikh dheer ee xagga fidinta Diinta Islaamka iyo xagga jihaadka lagula jiray isticmaarkii Talyaaniga. Xagga fidinta Diinta iyo BARASHADEEDA waxay saddexeysaa Xarar iyo Muqdisho. Waxaa laga xusi karaa Culumadii Magaca dheereyd SH.Abibakar Mixdaar oo ahaa Aabaha Culumada mash-huurna ahayd ee ka kacday Xamar sida SH. Muxudiin Macallin Makaraan, Caalamkii Banaadir, SH.Cab/maan Suufi oo wada noolaayeen Qarnigii 19aad Sh.Abiikar wuxuu ku geeriyooday Warsheekh 1292 Hijriyada

(1876M). Wuxuuna ku aasan yahay Masjidkii uu Cilmiga ka faafin jiray oo la siyaarto sanad kasta isuguna tagaan Kumanyaal Dad ah. Waxaa lagu labeyn karaa SH.Cab/maan Celi oo ahaa caalim aad u war dheer oo geeriyooday siddeetamadkii Q.2aad oo asaguna ku duugan Masjid weyn oo casri ah, loona siyaaro tago sanad kasta. Xagga la dagaallanka isticmaarkii Talyaaniga waxaa ka dhacay Warsheekh Dagaalkii iyo Dilkii ugu horreeyey ee Nin cadaan ah (Talyaani) lagu dilo 24/4/1890kii, waa ka hor inta uu Talyaanigu uusan qabsan Muqdisho. Markab Dagaal oo Talyaani ahaa oo siday governorkii loo soo magacaabay Koonfurta Soomaaliya Filonardi, ayaa damceen inay SAHAN ugu degtaan Magaalada Warshiikh, waxaana dadkii ka hor yimid ka mid ahaa Nin watay mindi, durbadiina kula booday 2X/le Zavoghi oo watay Unugga sahanka, kuna dhuftay, oo dhintay daqiiqado ka dib; meydkii waxay u qaateen markabka oo markaas Madaafic ku furay Magaalada dhib weyna u geystay, ilaa hadda xeebta Warsheekh waxaa ku taal TAALLO loogu magac daray 2X/le Zavagli oo Talyaanigu dhisay markii Dalka uu qabsaday 1927M.

Waxaa kale oo ku yaal xeebta Warsheekh Manaarad shub ah oo dheer oo hagta Maraakiibta mareysa Badda iyo tan soo geleysa Magaalada.

Dabeecada xeebta badda iyo tan berriga ee Mandiqadda Cadale ilaa Ceel-Macaan oo Warsheekh xuddun u tahay waa mid aan laga heli

karin meelo BADAN ee Dalka; kaliya waxay u baahan tahay in laga abaabulo ADEEGYADA DALXIISKA.

Tan kale waxay Mandiqaddaan ku dhow dahay Muqdisho oo uma baahna Hotelo waaweyn, oo hal maalin ka yar ayaa lagu soo daawan karaa laguna soo noqon karaa Muqdisho.

## Mandiqadda Muqdisho

Muqdisho waa Caasimadda Dalka Soomaaliya laga soo billaabo gobonnimadii iyo Israacii ee 1/7/1960kii, waxaa deggan 3(saddex) Malyan, Muqdisho waxay ahayd Magaalo weyn oo Dadka Soomaaliyeed ay u arkaayeen Hooyada Dalka. Muqdisho waxay jirtay ka hor soo bixitaankii Masiixiyadda. Roomaankii hore waxay u yaqiineen magaca  STRAPONE, waana Magaaladii ay u soo haajireen Muslimiin Carab ah intii saxaabadii ay noolaayeen; waxaa oolli jiray Matxafka Qaranka Dhagax-Qabri oo ay lahayd Faadima Cabdi Samad oo lagu aasay Xamar 5/5/101; waa 91 sano ka dib geeridii Nabi Muxamed (CS).

Xamar waa magaalo aad u Camiran oo wax kasta laga heli karo, leh dhismayaal dhaadheer oo casri ah iyo kuwa taariikhi ah oon la tiri karin, adeeg dalxiis oo kaamil ah, nabadgelyo la isku hubo, hawo fiican iyo xeeb siif ah oo diirran.      Waxa laga heli karo Xamar oo soo jiidan kara Dalxiiska way tiro dhaafeen. Cid aan aragna loogama sheekeyn karo. Magaalada Xamar waxaa la oran

karaa waa Matxaf Nool waayoo waxaa laga helaa Raadad badan ee Casriyadii dhexe iyo waayadii xigay. Dhinac kale Magaaladu waa dhireysan tahay oo jiq ayey u egtahay, markaad ka eegtid dariishada Dayuuradda, waxay leedahay waddooyin laami ah oo dhinac kasta ay ugu tixan yihiin Dhismo Dhaadheer, hotello, suuqyo IWM. Dhinac kale waxaa ku dhow Muqdisho beeraha Webiga Shabeelle (30km) oo iska cagaar ah sanadka oo dhan, waa Beero casri ah oo lagu tacbo dhirta lacagta sida: Mooska, Liinta, Cambaha Qudaarta…. IMW oo iska ah Mandiqad Dalxiis oo dabiici ah.  Muqdisho waxaa laga heli karaa nooc kasta ee adeeg oo ay ka mid tahay Airport, Deked, Bankiyo iyo Isgaarsiin caalami ah oo casri ah IWM. Muqdisho, Runtii cid aan arag loogama sheekeyn karo, waana xuddun mug leh ee Dalxiis.

Dhinaca kale waxaa ku aasan Madaxweynihii 2aad ee dalka: Cabdirashiid Cali Sharmaake; Taliyihiii 1aad; ee X.D.S Jen Daa’uud Cabdulle Xirsi; ku xigeenadii Jaalle Siyaad; waa Jaalle Maxamed Cali Samatar, Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax; waxaa ku dhaw Muqdisho qubuurtii Madaxweynihii 1aad Aadan Cabdulle Cismaan R/Wasaarihii 2aad Cabdirisaaq Xaaji Xusseen iyo Aw. Ismaaciil Jimcaale Cosoble iyo Masaajidyo taariikhi ah iyo taallooyin badan.

## Mandiqadda Baraawe

Magaalada Baraawe waxay dhacdaa xeebta Badweynta Hindiya 200km Koonfurta Muqdisho, waana Caasimadda Dowlad Gobaleedka Koonfur Galbeed. Baraawe waxay ku taallaa Mandiqad dhireysan oo cagaar iska ah sanadka intiisa badan, waxaa ku dhow webiga shabeelle oo u jiraa ilaa 15km oo beero fara badan oo dalagyo kala duwan lagu beero ay ku teedsan yihiin wabiga, sidoo kale Tuulooyin ah Beeraleey-Xoolaley. Magaalada Baraawe waa meesha ugu Caafimaad badan, xeebaha Dalka oo waxaa yar Huurkeeda (Humidity) oo waxaa ku nasan jiray Dadka qaba Cudurrada Feeraha, gaar ahaaan neefta.

Magaalada waxay leedahay xeeb dheer oo ka jirta Koofur iyo Woqooyi (Bari) oo Siif ah, xoogaa kulul, leh bad iska deggan, guud ahaan, sanada inta badan. Bawaare waa Magaalo leh Taariikh fog, waxayna leedahay dhisma Qadiimi ah oo muujinaya facweynida magaalada, sidoo kale magaaladu way dhismeysaa oo Daara dhaadheer ayaa ka kacaya, haddana waxay isu diyaarineysaa inay noqoto Caasimadda Dowlad Gobaleedka Koonfur galbeed oo waxaa ka socda Mashaariic dhismo: Deked iyo Airport, iyo xaruumihii maamulka D/Gobaleedka. Baraawo waxay leedahay dhul ballaaran oo xooluhu ay daaqaan, kuna nool yihiin, sidaas awgeed xoolaha iyo waxa ka soo baxa waa rakhiis. Waxayna leedahay suuq ballaaran ee xoolaad iyo mid badeecooyin kala

duduwan, waayo waxay magaaladu leedahay Deked. Baraawe waxaa u dhan wixii Dalaxiisayaashu ay daneyn karaan, bad leh xeeb siif ah oo xoogaa kulul, Dhulka oo leh dhir cagaaran, webi beero badan ay ku teedsan yihiin, xoolo badan, hawo fiican; magaalo qurxan oo Caafimaadka goobta leh wax la fiirsado iyo wax la iibsado. Runtii waa meel ku habboon Dalxiiska.

**Mandiqada Afka Webiga Jubba ilaa Kismaayo**

Wabiga Jubba wuxuu uga darsamaa Badweynta Hindiya 18km Koonfurta xudduuda labada gobal ee Jubbada dhexe iyo tan Jubbada hoose, sidoo kale waxaa 28km ka maraa koonfurta Afka Wabiga xarriiqinta DHULBARAHA ($0^0$,$0^0$). Biyaha webigu waxay caseeyeen masaaxad weyn ee biyaha BADDA.

Afka webiga waxaa ku yaal dhir kala nooc nooc ah oon tiq aheyn, meelaha qaarkood oo xeebta ku naban waxaa ku go'an BACAADO oo ka leexiyeen webiga halka uu ku toosnaa inuu ka galo xeebta badda. Dhinaca badda waxaa ka saaran Afka webiga labadiisa dhinac xeeb siif ah oo kulul, bacaad ah oo ku haboon dabaasha iyo ku diirsiga. Biyaha baddu way iska deggan yihiin inta badan sanada. Webiga waxaa ka saaran labada dhinac beero ka hor inta uusan gaarin Badda. Beerahaas oo abaar iyo aaran cagaar ah waxaa ka baxa dalagyada lacagta sida Mooska, Liinta, Canbaha, Qumbaha, iyo Khudradda. Waxaa laga xusi karaa xeebta webiga ee YOONTOY oo Kismaayo iyo meelo kale looga soo dalxiis tago.

Ka sokow quruxda Dabiicada waxaa meesha ku dhow Taalada Dhul-baraha, TAYDA (PRIGE) ka ARAARE IYO Mazaarka SABCA ASHRAAF oo aad loo siyaarto. Haddaba meeshaan webigu Badda ka galo waxay kulansatay Xeeb siif ah oo kulul, Bad Deggen, Dhul cagaar ah, Tuulooyin leh beero uu dhex maro webiga asaga oo aad moodid MAS CAS haddii aad ka soo eegtid dariishad dayuuradeed. Haddii xoogaa adeeg Dalxiis loo habeeyo waxay noqon kartaa meeshaas Goob soo jiidata Dalxiiska, gaar ahaan ajaaniibta. Waliba meesha waxaa ku dhowdahay magaalada Kismaayo oo saldhig dhaxdiis u noqon karta meeshaan oo laga soo aadi karo Kismaayo oo u baahan kaliya safar hal maalin ah, taasoo in door ah hoos u dhigi karta kharashaadka iyo Baaxadda adeegga. Kismaayo ayada nafteedu waa goob Dalxiis oo saldhig u noqon karta goobtaan Afka webiga iyo Mandiqada Jasiiradaha Jubba oon ka hadli doonno. Kismaayo waa magaalo madaxda K.MG ah ee Dowlad gobaleedka Jubba, waa magaalo aad u qurux badan, leh Airport, Deked iyo Dhismo dhaadheer, Hotello iyo Suuq ballaaran oo waxey magaaladu soojiidan kartaa  Dalxiiska gudaha iyo kan dibadda.

## **<u>Mandiqadda Jasiiradaha Jubba</u>**

Laga billaabo Magaalada Kismaayo ilaa xudduudda oo xeebta ka gasha tuulada Daarasalaam ($1^{0}40$`S, $41^{0}33$E), kana marta Koonfur jasiiradaha Lamashaanka oo tuulada ka saaran xagga badda laba

miil (4 km) K.Galbeed Raas Kiyaambooni, Xeebta baddu waxay leedahay dabeecad u gaar ah oo waa dhagaxyo waaweyn, jasiirado iyo laashash (Laasas), xagga xeebta dhulkuna waxaa ku teedsan buuro geedo leh iyo bacaaddo la socda xeebta, dherirka xeebtaani waa 180 KM. sidoo kale Xeebta Berriga, sida badan, waa jiq tiq ah.

Xeebtaan sida aan hore u soo tilmaannay waxaa ku badan jasiiradaha iyo dhagaxda badda ka soo baxsan (Shacaabi (Coral)), jasiiradahaani waa Toban oo loo yaqaan Jasiiradaha Jubba oo Lix la deggan yahay, Afarna aan la degganeyn, kuwa la deggan yahay, haddii laga billaabo dhinaca Kismaayo (Woqooyi) waa:-

1- Jasiiradda Koyaama waa tan ugu weyn jasiiradaha waana la deggan yahay.
2- Jasiiradda Inguumi dad yar ayaa deggan.
3- Jasiiradda Jawaay dad xoogaa ah ayaa deggan.
4- Jasiiradda Juula waa tan ugu dad badan oo inta badan dadka dega jasiiradahaan waxay ku nool yihiin Jasiiraddaan Juula, oo u wada ah xuddun.
5- Jasiiradda Darkasi, dad iska yar ayaa deggan.
6- Jasiiradda Jandara dad xoogaa ah ayaa deggan.

Jasiiradahaan 6(Lixda) ah oo la deggan yahay, waxay ku dhacaan dhammaantood Woqooyiga Laash Buur-gaawo iyo Koonfurta Kismaayo, dhulka ay ku fidsan yihiin dherir ahaa waa (74 km).

Jasiiradaha aan la degganeyn waa Afar oo kala ah:-

1. Kandha
2. Fuuma
3. Iliisi
4. Serpanti oo dekedda Kismaayo qaar ka goosatay.

Afartaan Jasiiradood waxay xigaan Kismaayo, kuwa kale oo la deggan yahay way ka Koonfureeyaan.

Aan hoos u galno jasiiradaha la deggan yahay iyo Laashashka mandiqaddu ay ku caan baxday, ayadoo aan ka soconno xagga Kismaayo sida aan hore ugu soo kor duulnay.

1) Jasiiradda Koyaama waa tan ugu dhul weyn jasiiradaha Jubba, waana jasiiradda labaad xagga dadka, ka dib J. Juulo. Koyaama waxay Koonfur Galbeed ka xigtaa Kismaayo 33KM. Jasiiraddaan waxaa ku taalla tuulo caan ku ah kalluunka oo sidata isla magaca jasiiradda kuna taal darafkeeda W.Galbeed.

   Koyaama waxay leedahay Deked oo dhacda dhinaca K.Galbeed ee jasiiradda; waxaana adeegsan kara doomanka iyo maraakiibta yar yar.

   Xeebta jasiiraddaan waa dhagaxley inteeda badan, bacaaddana way jiraan, laakiin waxaa jira meelo badan oo looga faa’ideysan karo dekedo ahaan.

Xeebteeda iyo dhulka berriga waxaa u dhexeeya dhul badeed bacaad ah oo leh xoogaa shacaabi ah; dhulka berrigu wuu sarreeyaa wuxuuna leeyahay dhir, meelana bacaaddo waaweyn ayaa ka jira.

2) Jasiiradda Inguumi (Ngumi): waxay dhacdaa Koonfurta J. Koyaama 11KM, iyo Woqooyiga J.Jaway 22KM. Jasiiraddaan waxaa deggan Dad yar, waayoo inteeda badan waa dhagaxyo xiriir ah, dadkuna waa kalluumeysato.
3) Jasiiradda Jawaay, waxay ka Koonfureysaa J.Inguumi 22 KM, waana la deggan yahay, dadkuna waa kalluumeysato iyo ganacsato, waayoo waxay leedahay Deked leh dhaqdhaqaaq ganacsi. Dabiicada jasiiraddu dhagaxa ka sokow, waxay meelo dhowr ah fadhiya bacaaddo. Xeebta dhulka fog waa mid sarreysa oo dhir leh.

## Laash Salaama

Laashkaan oo dherirkiisu gaarayo 20km wuxuu ku beegan yahay J. Jaway, weliba Dekeddeeda. Laashkaan, haddii la hagaajiyo waxaa mari kara doomanka iyo maraakiibta yar yar; waxaana ku yaalla dhinacyadiisa ku dhow xeebta tuulooyinka kala ah:- **Istanbuul** (daanta Woqooyi), **Bagdaad** (daanta Koonfuro) iyo **Yamaani** oo xoogaa u jirta xeebta kuna dhacda halka uu Laasku laba kala noqdo, meeshaa waxaa ku badan

dhirta. Yamani waxay ahaan jirtay Xuddunta Dalxiiska Jasiiradahaan.

Waxaa xusid mudan in Laashkaan ay ku soo darmaan wabiyo biya keena waqtiga roobka; Meeshaani waa meel aad ugu habboon Dalxiiska: Webiyo, Dhir, Xeeb bacaad ah, Jasiirooyin … Xoole Duur: Maroodi, Libaax, Shabeel, Ugaar IWM.

4) Jasiiradda Juula waxay ka Koonfureysaa J.Jawaay 22 KM, waa jasiiradda ugu dadka badan jasiiradaha Jubba, waxaana la dhihi karaa waa xudduntooda. Waxay leedahay tuulo sidata isla magaca jasiiradda oo ku tiirsan kalluumeysi, beero tacabid iyo xoolo dhaqasho isla jasiiradda dhexdeeda ah, sidoo kale waxay leedahay Deked oo leh dhaqdhaqaaq fiican.

   Jasiiraddaan waxaa ku badan bacaaddo ku fadhiya dhul door ah oo ku teedsan xeebta. Xeebta berriguna mid leh dhir tiq ah.

**Laash Caanoole**

Wuxuu ku dhacaa xeebta dhul weynaha oo ku began J.Juulo, Laashkaani wuxuu jeedaa 18 km, waxaana ku soo darsama webi faracyo badan. Dhulku wuu geedo badan yahay, waana tiq; Laashkaan wuxuu leeyahay ahmiyad Dalxiis, waxaana ku dhaca afkiisa dhinaca koonfur tuulada Kudhaa oy ka

baxdo waddo carro ah oo isku xirta ayada iyo Magaalada Badhaadhe.

5) Jasiiradda Darkasi  waxay dhacdaa 5KM Koonfurta J.Juula. Jasiiraddu ma weyna, wallow la deggan yahay. Waa mid ay ku badan yihiin jaballo, dhagaxyo iyo bacaddo, xeebta dhulkuna waa geedaley tiq ah.
6) Jasiiradda Jandara, waxay Koonfur ka jirtaa Jasiiradda Darkaasi 11KM, jasiiraddaan way ka ballaaran tahay J.Darkaasi, waana la deggan yahay, dabiicad anaanna waxay shabahdaa J. Darkaasi, xeebta dhulkuna waa geedaley.

**Laash Buurgaawo**:

wuxuu dhacaa 11km Koonfurta J.Jandara, Laaskaani waa midka ugu muhiimsan Laasaska mandiqaddaan, waana kan ugu ballaaran uguna dheer 27 km, sidaasna waxaa adeegsan kara maraakiibta dagaalka inteeda badan iyo kuwo ganacsiga guud ahaan, waxaana ku soo darsama laaskaan laba webi oo dhaadheer, mid wuxuu uga soo daraa tuulada Bushbush, magacaasna la siiyey webigaan oo aad u biyo badan inta badanna qoyan sanadka; kan kale wuxuu uga soo darmaa laaska meel ku dhow xeebta. Waxaa saaran Koonfurta Afka laashka tuulada ku magac ah ee Buurgaawo. Laashka Buurgaawo maraakiibta way soo geli kartaa, waxaana meesha ku yaal minaarad hagta maraakiibtu, laakiin laashku wuxuu u baahan yahay in la hubiyo xagga ku habboonaantiisa badmarineed

(Navigability), waayoo waxaa la soo sheegayaa in ciid iyo degbo ay ku jiraan meelo ka mid ah laaska. Dadka Jasiiradahaan deggan guud ahaan waa kalluumeysato, beerana way tacbadaan, sida geed qumbaha, bataatiga, galleyda… IWM, xoogaa ari ahna iyo lo' kasii yarna waa lagu dhaqdaa jasiiradahaan, weliba Jasiiradda Juulo oo dadka jasiiradaha intooda badan ay ku nool yihiin.

Mandiqaddaan waa mid kalluun badan, biyuhu waa kuwo mool gaaban oo iftiinka qorraxdu gaari karo, biyaha macaan oo ku soo darma kuwa milixa oo nooc kalluun ah ay ku noolaan karaan si fiican sida Shirimbiga oo aad qaali u ah, sidoo kale Jasiiraduhu waxay ka sameysan yihiin Shacaabi (Coral Reef), waxaa intaas la sii jira mandiqadda waa goob Dalxiis oo kulansatay dhir badan, xoola duur joog tira dhaaf ah, gaar ahaan Siigga, ugaarta kala duwan  iyo kuwo Dugaagga ah, xeeb leh bacaad iyo qorrax, tuulooyin iyo jasiirooyin la deggan yahay. Xaqiiqadii mandiqaddaan Jasiiradaha JIubba waa kuruska Dalxiiska Dalka.

**Gunaanud:**

Badaheennu waa kuwo leh ahmiyad Qaran, gobol iyo mid caalami. Waxaana lagama maarmaan ah inaan marka hore aan ku baraarugsanaano, marka xigtana aan degsanno siyaasad leh istiraatiijiyad meel maar ah oo lagu gaari karo danaheenna badeed oo soo tilmaannay isla markaanna looga badbaadi karo hanqaltaagga shisheeyaha.

# BII’ADA BADDA SOMAALIYEED

Deegaanku waa inta kugu wareegsan oo ka kooban noole iyo ma noole, waxaanna ka dhaxeeya xiriir is dhex gal, waxayna isku leeyihiin saameyn midba midka kale, haddii an si kale u dhigno nolosha nooluhu waxay ku tiirsan tahy kuwa an nooleyn sida; Hawada, Qoraxda, Dhulka iyo Biyaha. Deegaanka baddu waa midka ugu weyn uguna ballaaran aduunka deegaan ahaan, waxaana la ogyahay inuu ka yahay dhulka marka loo qeybsho saddex qaybood labo ka mid ah, kuna fadhiyaa dhul gaaraya 140 milyan square meyl ama 360  milyan square kiilomitir, ayadoo celcelis ahaan biyaha guntooda lagu qiyaaso kuwo gaara ilaa 3.8km ama 12500 feet. Deegaan ahaan Biyuhu waa kuwa ugu badan adduunka, halka biyaha badduna ka yihiin boqolkiiba sagaashan iyo todobo (97%), biyaha kale ee macaani waa boqolkiiba saddex (3%).

Biyaha baddu waa kuwo ay milixdu ku badan tahay, waxayna la eg yihiin boqolkiiba saddex iyo bar (3.5%) iney tahay cusbo ku millan, in kastoo ayna badaha adduunka oo dhani isku milix aheyn, haddana celcelis ahaan ayaa loo qaataa. Tusaaale ahaan, hal litir oo biyaha badda ah hadaad soo qaado ka dibna kuleyliso waxaa kaga soo baxaya 35gr oo cusbo ah, si kastaba ahaatee, Deegaanka Baddu waa hooyga noolaha ugu badani ku noolyihiin dhulka korkiisa, kana kooban nuucyada noolaha sida dhir iyo xayawaanba, waxaanna lagu qiyaasaa boqolkiiba 80% in ka badan nooluhu inay

ku noolyihiin deegaan badeedka, inta soo hartay ayaa ku nool dhulka Barriga, taasi oo ka dhigeysa deegaan badeedka mid muhiimad gaar u leh Bini'aadanka, xag dhaaqaale iyo cuntaba.

Deegaan badeedka Soomaliya xagga dhehrarka xeebta, waa tan ugu dheer Qaarada Africa, waxaana lagu qiyaasaa inuu gaarayo dhehrarkiisu ilaa 3,025 kilomitir, dhinaca ballaca wuxuu la egyahay 648.2km, xagga Badweynta Hindiya, xagga Gacanka cadmeedna waa 130km. Deegaan badeedka Soomaliyeedwaxaa ku nool dhamaan noocyada noolaha ku nool badaha kuleylaha dhaca ama kuleyl xigeenka, inkastoo noolaha qaar badan oo ka mid ahi sii dabar go'ayaan, sida diin badeedka, kaasoo Adduunka mamnuuc ka ah ugaarsigiisu, ayaa inaga aad loo ugaarsadaa oo celcelis ahaan maalintii ilaa 10 Qubo ah ayaa lagu qalaa Muqdisho oo kaliya oo dhadig u badan, inkasta oo Shariciga Kalluumeysiga Soomaliya u mamnuucayo in la soo dabo ama lacuna. Qod. 34aad ee sharciga Kalluumeysiga ee soona baxay 30 Nov.2014kii.

## Qeybaha Deegaan Badeedka

Deegaanka badda waxaa loo qeybshaa labo (2) qaybood oo kala ah; Biyaha kore iyo Kuwa hoose ee Sagxadda dhulka. Biyaha kore ( pelagic environment) waa lakabka sare ee biyaha badda, hoyna u ah noolaha ugu badan ee badda ku nool, gaar ahaan kuwa cuntadooda sameysta, waana deegaan ay gaari karto falaaraha iftiinka qoraxdu oo muhiiim u ah xagga cunta sameysiga, taasi oo

dhirtu cuntadeeda ku sameysto (photothyntheisis), ka dibna noolaha kale een cunto sameysan ay ku sii dulnool yihiin, waxaana loo yaqaanaa wax soo saara 1aad (primary producer) ee silsilada cuntada noolaha. Tamarata qoraxda ka timaadaa waxay si fiican u gaartaa lakabka ugu sareeya biyaha oo ah ilaa 200m oo hoos ah. Noolahan ku nool lakabka sare ee degaan badeedka, waa kuwo ay yartay socodkoodu, waana kuwo intooda badan sabbeeya (floating) Biyaha dhexdooda, sidaasna waxay inta badan uga badbaadaan noolaha kale ee quudanaya ee ku nool biyaha hoose ee badda.

Biyaha kore waxaa ku badan dhaqaaqa, hirka iyo wareega biyaha, si fududna waxaa saameyn ugu leh isbadalka cimilada, sidaa awgeed waa kuwo degdeg isku bedbedala, saameyn weynna ku leh noolaha deggan biyaha furan (Open Ocean). Deegaan badeedka hoose waa mid ilaaa sagxadda hoose ee badda, oo ay fariistan ciida iyo nafaqada kala duwan ee ka timaada Barriga ama noolaha lakab ka sare ee badda ku nool markey dhintaan, ka dibna baddu waxay sameysaa is rog xagga biyaha, waxaanna kor soo mara wiixii hoos jirey sida nafaqada oo marka danbe ay helan noolaha sare, waxaana loo yaqaanaa isrogroga biyaha badda (upwelling). Deegaanka hoose dhirtu waa ku sii yarataa, markasta oo iftiinka qoraxda laga sii fogaado, dhirta u baahan sagxadda dhulka iney qabsato ee isticmaala xididada, waxay ku nool yihiin biyaha xeebta xiga, sida cawska badda oo kale.

## Muhiimada Deegaan Badeedka

Nolosha noolaha adduunka waxay ku noolyihiin biyaha dhexdoodo boqolkiiba sideetan 80%, sidaa awgeed, deegaan badeedku waa ka ugu muhiimsan nolosha noolaha, sida ay sheegtay Hey'adda Qaramada midoobey qeybteeda Bii'ada; deegaanka badda waxaa ku nool  ilaa 178,000 nuuc oo ah noole kala duwan, kana kooban xayawaan iyo dhir. Deegaan badeedku wuxuu ina siiyaa cunto, tamar iyo biyo kuwaasi oo aay ku tiirsan yihiin nolosha malaayiin qof oo ku nool adduunka, sidoo kale deegaanku waa mariinka ugu muhiimsan ee ay iskaga kala gooshaan (gudbaan) Badeecadaha ganacsiga Caalamka, Boqolkiiba 90%. Dhirta deegaan badeedku waxay bixisaa Hawada Ogsijiinta (oxygen) oo noolaha kala duwan u baahan yihiin, sida Bini'aadanka oo neefsigoodu ku xiran yahay, Deegaan badeedku wuxu qayb wayn ka qaataa hagaajinta cimilada sii xumaanayaa ee adduunka, waayo kaarboonka ugu badan ayey dhirta baddu ka soo nuugta Hawada, sidoo kale waxay biyaha baddu nuugaan kuleylka ka yimaada qoraxda, waana kuwa ugu badan ee qaata tamarta kuleylka ee ugu badan oo dhulka ku dhacda.

**Astamaha Biyaha Badda xagga fisikada (Physical) iyo kimikada (Chemical)**

Astaamaha biyaha dhanaan xagga muuqaalka (physical) iyo curiyayaasha (elements), marka la eego dabeecada badda, way ku kala duwan yihiin astamahan, hadey tahay gunta hoose ee Badda, ama kuwa u soo dhaw dhulka barriga ee xeebaha. Haddaba biyaha dhanaan waa kuwo ka kooban boqolkiiba 3.5% maadooyin ku milan biyaha, sida Biro, Hawooyin, dhagax burburtay, Carro iyo waxyaalaha ka yimaada qaraxyada folkaaniga ah (Volcanic activity), sidoo kale waxyahaba ka hara noolaha dhintay ee loo yaqaano (Organic matter), sida Carbonka oo kale . Biyaha baddu waxy yihiin boqolkiiba 96.5%, marka laga reebo waxyaalaha ku millan sida curiyayaasha ay ka sameysantahay milixdu (cusbadu), ama nafaqada ku jirta biyaha badda.

Meelaha ay ku kulmaan biyaha macaan ee ka taga barriga iyo biyaha dhanaan ee badda, waxa lagu yiraahdo afka qalaad (Estuary or salt marshes). Halkani waa meel ka astaamo duwan deegaan badeedka intiisa kale oo waxaa ku kulmaya biyaha macaan iyo kuwa dhanaan ee Badda, waxana laga helaa dhulka xeebta ee berriga u dhaw, waxaana ku badan nafaqada, PH ka biyahan mid aad u sareeya ma’aha, sida biyaha badda kale,  sidaa awgeed, waxay hoy u tahay noole kala duwan oo aad u badan, maadaama meeshu nafaqo badan tahay, kuwaas oo iskugu jira dhir iyo

xayawaanba oo adkeysi u leh ku noolashaha meeshan ay ku wada kulmeen labada biyood kuwa Badda ee dhanaan iyo kuwa macaan side biyaha wabiga.

## Aysii'dhaynta biyaha badda (acidification of seawater)

Wakhtigii ay bilaabantay haruumarinta warshadaha aduunka, waxaa sii badaneysay Kaarboonka Hawada ku jira ee ay sii daynayaan warshadahu, waliba ayadoo sii kordheyso isticmaalka tamarta shidaalka lagubaayo, kaas oo ku daraaya Hawada inagu wareegsan ee loo yaqaano (Atmosphere) maadooyin qashina ah sida Karboon dhay'ogsaydh. Kaarboonku Marka u hawada ku bato wuxuu la fargalaa biya roobka ka dibna waxuu isku badalla Aysiidh, taasina waxay kor u qaadeysaa Asiidha ku jirta Biyaha badda ama waxaa hoos u dhacaya PHka badda, waxaana la xusaa inay aysiidha baddu ugu dhawaan boqolgiiba 30% kor u kacday, intii ay bilowdeen Kacdoonka warshadaha caalamka.

Biyaha baddu waxay hawadda ka soo nuugaan ama ka soo qabtaan carbon dioxide ($CO_2$) badan oo ku milma biyaha badda, waxaana qeyb ka mid ah isticmaala noola deegaank badda ku nool ee cuntada sameysta maalintii, inta soo harta kaarboonka waxay isku badaleysaa Asiidh ka dib marka ay Heydrogenta biyaha badda la fargasho, taasina waxay hoos u dhigeysaa PH biya badda, waxayna saameyn weyn ku yeelaneysaa nolosha noolaha badda, waayo

noolaha baddu adkeysi uma laha PHku haddii u hoos u dhaafo 7 ama biyaha ay aysiidhu ku badato.

## DABAYLAHA DEEGAAN BADEEDKA

Dabeeylaha deegaan badeedku waa kuwa dhaqaajiya biyaha badda, waxayna qaabeeyaan badda ayagoo u suureeya mawjado iyo hirar raac raac ah oo kala ah; kuwo culus iyo kuwa fudud. Dabayl badeedku waa kuwo looga faa'ideysan karo dhalinta koronta dabiici ah, si looga maarmo isticmaalidda shidaalka lagubayo ee sababa in kaarboon badani galo hawada, sidoo kale dabayl badeedku waxeey wax tar u leeyhiin deegaanka badda, kuwaasi oo badda u sahala in ay isku dheeli tirnaato, ayadoo samaynaysa in ay u sahasho isrogogga biyaha, si ay nafaqadu kor u soo marto, waayo nafaqadu inta badan waxay jirtaa hoosta badda, sida biraha oo kale, noolaha badankiisuna sida dhirta waxay ku noolyihiin biyaha qeybta sare si ay u helaan iftiinka qoraxda, sidoo kale waxay ka qayb qadataa gudbinta ama gaarsinta oxygenta iyo Kaarboonka dhamaan gudaha biyaha badda. Dabeyalaha maansuunka ee badaheena ka dhaca waxaa ugu muhiimsan kuwa ka yimaada jihada Koonfur Gelbeed una socda dhinaca waqooyi, dabeylahani waxay muhiim u yihiin noolaha biyaha badaha Somaliyeed, waayo waxay kor keenaan nafaqo badan oo hoosta badda fariisatay, waanna kuwo awood badan kuna socda celcelis ahaan 15m/s, waxaana ka dhasha roobabka da'a xiliga Gu'ga dhinaca barriga,

waana biyaha ugu badan ee dalkeenu helo, dabeylaha maansuunka ee kale waa kuwo ka yimaada  xagga Waqooyi Bari ee Badwenta Hindiay una socda dhinaca Kuunfureed.

## IFTIINKA QORAXDA EE DEGAAN BADEEDKA

Iftiinka qoraxdu waa mid muhiim u ah biyaha Badda, gaar ahaan qeybta sare (open oceans), waayo tamarta qoraxda ka timaada waxay ka caawisaa geedaha badda iney cuntadooda sameystaan. Hadaba falaaraha iftiinka qoraxdu aad bay ugu kala duwan yihiin meelaha ay gaarayaan, waayo waxay ku xiran tahay midabka falaaraha qoraxda, tusaale ahaan casaanku (guduudku) wuxuu gaaraa ugu badnaan ilaa 20 mitir hoos biyaha badda, kalluunka casi markuu dabaalanaayo biayaha sare waa mid midabkiisa casi muuqdo, laakiin haddii u biyaha hoose tago, wuxuu u egyahay mid madow xayawaanadii quudan jirayna ma arki karaan wixii ka hoosaya 20m oo way ka badbaadaan ugaarsiga. Iftiinka qoraxda midabada meel fog gaari kara deegaanka badda waxaa ugu fiican midabka Buluuga, Cagaarka iyo Huruuda oo waxay gaaraan ilaa 800m, laakin iftiinka tamarta leh ee dhirtu cuntada ku sameysto wuxuu ku eg yahay ama gaara ilaa 210 mitir ugu fogaan. Hadaba waxaa jira qaybo uu kala qaybsamo heerka tamarta qoraxda ay gaari karto iyo wax tarkeeda, waxaana loo qeybshaa labo qeybood oo kala ah;

1) Photic waa iftiin gaaraya illa 200 mitir ee gunta badda, kaasi oo dhir badadeedka ka saacida in ay sameeysato cuntadeeda waana iftiin tamar leh.
2) Dispohitic waa qaybta labaad ee iftiinka cadceeda , qaybtaan waa mid gaarayaa laga bilaabo 200 ilaa 800m oo gudaha badda ah, waxayna kaliya ka caawisaa noolaha badda sida xayawaanka in ay wax arkaan kuna socdaan balse waa mid aanan waxba u tarayn dhir badeedka maadama aysan tamar siin kareyn si ay cunteeda u sameysato.

**DHIRTA KA BAXDA DEEGAAN BADEEDKA**

Dhir badeedku waa kuwo ka baxa deegaanka badda meel ay gaari karto iftiinka cadceeda, si ay ugu sahasho cunto sameysiga, dhir badeedka waxaa loo qaybin karaa laba qaybood oo kala ah Algaha (Algae) iyo dhir ku baxdo biyaha cusbada leh sida Cawska badda iyo maangroofka. Algahu waa noole la mida sida geedaha kale, laakiin an lahayn xidid, jirid iyo caleemo, wuxuuna ka mid yahay geedaha cuntadooda sameysta ee leh midabka cagaaran ee geeduhu u isticmaalaan inay tamarta iftiinka ku soo dabaan si ay cunto u sameystaan. Geedkani wuxuu iskugu jiraa kuwo aad u yaryar oo ishu arag (il ma qabati ah) iyo kuwo waaweyn, waxayna qeyb muhiima ka qaataan ecosystemka, gaar ahaan waxay cunto iyo hawada ogsajiinta siiyaan noolaha ku nool biyaha dhexdooda. Algaha waaweyni waa kuwo u eg dhirta kuna nool xeebta dhaw

ama meelaha an guntoodu dheereyn biyaha badda, waxayna qabsadaan ama ku dhagaan dhagaxda iyo wixii adag ee biyaha xeebta, waxayna leeyihiin wax u eg xidid oo ay u isticmaalaan inuu dhulka ku xajiyo geedka.

Dhir badeedka yaryar (Marine Phytoplankton) waa Dhir  aad u yaryar oo intooda badan ilma aragti ah (ishu arkeyn),  laguna arki karo waynayso (microscope),  kuna  dhex noolaan kara biyo cusbada leh (dhanaan) iyo kuwo kalaba (salty & fresh water), waxaana loo yaqaanaa (Phytoplankton) ama dhirta waynaysada lagu arko (microscopic plant), waxayna u badan tahay hal unugle, Waxayna ku noolyihiin lakabka sare ee biyaha badda, si ay u helaan iftiinka qoraxda oo muhiim ugu ah dhirtan habka cunto sameysiga, sida dhirta cagaaran ee dhulka oo kale,  dhirta cuntada sameystana adduunka korkiisa  tan badda iyo barigaba nus (half) bay ka tahay dhirtan phytoplanktonku.

Dhirtani waxay leedahay midab sameeyaha (Chlorophyll), kaasoo dhirta siiya midabka cagaaran, isaguna wuxuu u dabaa tamarta qoraxda una suurta galiya inay cunto sameysan karto,  sidaan ognahay dhirtuna waxay u baahantahy markay sameysaneyso cunto in ay hesho; Biyo, Tamarta qoraxda, Nafaqo iyo Hawada kaarbooonka ($CO_2$), waxayna  asaas  u tahay  <u>habka silsilada cuntada noolaha</u>. Tusaale ahaan waxaaa cuna dhirtan kalluunka yar yar iyo nuucyo ka midaa Nibiriga (whales), ka dibna iyaga waxaa

sii cuna kalluunka waa weyn, dadkuna waxay sii cunaan kalluunka waaweyn waa silsilad isku  xidhan oo ka soo bilaabanta dhirtan yaryar illaa Kalluunka waaweyn.

Caws badeedku waa dhir ka baxda biyaha badda, una eg tan berriga, waxayna leedahay xidido, jirid iyo caleemo, waana dhirta kaliya ee biyaha badda hoostooda ka baxda ee ka tirsan dhirta ubaxa leh. Xididada caws badeedku waxay qabsadaan carrada fariisata biyaha hoose ee loo yaqaano afka qalaad (sediments) ama sagxadda badda, waxayna ka baxdaa biyaha xeebta, meealaha ay iskaga darsamaan ama ku kulamaan biyaha macaan iyo kuwa badda ee dhanaan, waliba waa biyaha ayna guntoodu dheereyn 50m ilaa 60m ayey si fiican uga baxaan si u helaan iftiin ku filan oo ay cuntada ku sameystaan, ka dibna ay siideyso Hawada Ogsajiinta (oxygen). Caws badeedku wuxuu ka kooban yahay ilaa lixdan (60) nooc oo kala duwan, waxaa la sheegaa cawska baddu inuu hoos u dhac ku yimid laga soo bilaabo qarnigii hore dhamaadkiisa, waxaanna lagu qiyaasay 30% inuu hoos u dhacay, baaritaan la sameeyeyna waxaa lagu sheegay inuu sanadkasta 111 square mitir Cawsku ka dhamaado, una dhiganta in ay sacad walba labo garoon ku badeed (balooni) lunto.

# Akadeemiyadda Culuumta Badda &
## Qawaaniinteeda ee Khaliif Macow Xasan

Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed waxaa loo abuuray inay fuliso dhowr waajib, waxaana ugu mudan 3(saddex) oo kala ah:-

1. Talo ka siinta Dowladda arrimaha badaheena si ay uu qaadan karto go'aan huban:-
2. Inay sare u qaaddo aqoonta dadka Soomaaliyeed u leeyihiin badahooda.
3. Inay wacyigelin joogta waddo si shacabku uu uga warhaayo waxa badahiisa ka jira iyo sida uu uga faa'ideysan karaan una ilaashan lahaayeen.

Markii Hey'addu ay urruurisay aqoonyahan badeed oo takhasusyo gaar ah u leh aqoonta kala duwan ee badda, waxaan billownay howshii naloo igmaday (fiiri warbixinta waxqabadka Hey'adda ee 2015-18 ee ku qoran isla L.5aad-7aad ee Majallada Juula-Jawaay), hase yeeshee runtii waxaa inoo soo baxay in Hey'adda Nafteedu ay u baahan tahay TALO Cilmiyeed oo aqoonteedu Cilmibaarayaasha naftooda ay u baahan tahay kordhin aqooneed, sare u qaadid Cilmibaariseed iyo la talin.

Haddaba waxaa inoo soo baxday, haddii annagii cilmigu uu nagu yar yahay, yaa u tola aqoonta badda ballaaran ee Soomaaliya,

ayadoo la tixgelinaayo in intii wax taqiin ay gabow tahay oo loo baahan yahay in la helo dhallinyaro leh aqoon badeed oo dabooli karta baahida badaheenna iyo inta ku nool isla markaasna aan kala go'leheen oo mar kasta buuxisa jagadii kii dhintay, duqoobay ama dhoofay.

Sidaas awgeed ayey ku timid fikradda abuurista

**AKADEEMIYADDA CULUUMTA BADDA & QAWAANIINTEEDA.**

Tan waa abuurista hadafka Akadeemiyadda oo ah ka haqabtiridda dalka aqoonta badeed.

Howlaha ay si toos ah u fulineyso Akadeemiyaddu waxay ku cad yihiin Qaabdhismeedkeeda hoos ku sawiran, waana:-

1) Kulliyad lagu barto oo baahisa culuumta badda iyo deegaankeeda oo heer Jaamacadeed ah.
2) Kulliyad lagu barto oo baahisa Qawaaniinta badda, kuwa dalka, kuwa goboleedka iyo kuwa caalamiga oo heer Jaamacadeed ah.
3) Kulliyad lagu barto Culuumta Badmaridda iyo Qalabka Makaanikada oo ah heer Jaamacadeed.
4) Dugsi fuliya tacliinta D/Sare ka sarreysa kana hooseysa BA (BS); waa Diplomee, tababarro gaagaaban; 6bil, kuwa beryo ah oo ku wada saabsan culuumta badda, deegaan badeedka iyo Qawaaniinta kala duwan ee badda.

Akadeemiyadda dowladda ayaa leh, sidaas awgeed wax kharash ah lama qaadi doonin.

Waxaa u baahan in laba kalimad laga yiraahdo ruuxa loogu magac daray AKADEEMIYADDA oo ah G/S Badmaax Khaliif Macow Xasan, waxaa dhalay qoys kalluumeysato ah oo degan Muqdisho, taariikhdiisa oo aad u gaaban waa tan: TAARIIKH NOLOLEEDKII G/S BADMAAX KHALIF MACOW XASAN.

Khaliif Macow Xasan wuxuu ku dhashay Muqdisho, Deg Shangaani, 1925kii. Wuxuu ka baxay Dugsigii Badda kana noqday Macallin, 50 maadkii Qarnigii tagay. Wuxuu waxbarasho u aaday dalka Talyaaniga 1959kii, wuxuuna qaatay shahaadada BA ee culuumta badda, wuxuuna noqday X/LE, wuxuuna ku soo laabtay dalka 1961dii, wuxuu madax u noqday kooxdii C.Badda (Plotone Marinario Somalo) oo xilkoodu ahaa ilaalinta Dekedaha Dalka. Dec 1964tii kooxdii Baddu waxay ku biirtay X.D.S DH, Khaliif iyo kooxdiisi waxay kula wareegeen Dekedda Berbera labadii Markab ee ugu so horeysay Ciidanka Badda 10/2/1965kii.

DH. Khaliif Macow wuxuu waxbarasho u tagay 1965tii Akadeemiyadda C.Badda ee Leningrad (EX URSS) wuxuuna ka qaatay shahaadada MA ee Culuumta Ciidamada Badda, 1969 wuxuu kuso noqday dalka isla waqtigaas, waxaana loo

magacaabay Abbaanduulaha C.Badda, jagadaas uu hayay ilaa 1976kii asagoo gaaray G/Sare, dababdeedna wuxuu ka fadhiistay shaqada Ciidanka, wuxuuna Geeriyooday 1988dii.

G/Sare Khaliif Macow wuxuu ahaa nin dabecad qaboow, wuxuuna dowr weyn ka soo qaatay arrimaha Badda Rayid iyo Ciidanba, xag tacliin iyo xag maamulba.

ALLAHA U NAXARIISTO KHALIIF MACOW XASAN, sidaas ayay ku abuurantay **Akadeemiyadda Khaliif Macow Xasan,** waxayna billowday waxbarid xoojin D/S ah oo socotay 5bilood, waxaana si RASMI ah loo furay doonaa **1da Maarso 2016ka.** Waxayna ku dhaqaadey laga billaabo Sabti 5/3/2016, waxbariddii loogu tala galay.

Bisha December ee sanadkaan 2019, waxaa laga qallinjebinayaa Kulliyadaha Culuumta Badda iyo Qawaaniinta Badda, Insha allaah.

# NABADGALYADA BADAHEENNA

Nabadgalyada: Magac cilmiyeed ahaan, waxay culimadu ku qeexaan siyaabo kala duwan laakiin aad isugu dhow, anigu waxaan ka doortay kan ugu gaaban, ugunna koobidda badan waana kan: Nabadgelyadu waa welwal la’aan, Qofka, Qoyska ama Qaranku inuu ku jirin welwal sida: Cabsi, Colaad, Baahi, Caafimaad darro, Mustaqbal la’aantu waa nabad la’aan, sidaas awgeed, waxa ka jiro badaheenna welwel ayay nagu hayaan, welina annan loo hayn welwel tir.

Baddeenna waxaan ula jeednaa Biyaha kulaalaya xeebaheena oo dhumucdoodu gaarayso xagga Badwaynta Hindiya 350N.M (648.2km); Gacanka Cadmeedna gaaraysa barkiis (50% = 130km). baaxaddeeduna (bedkeedu) waxay gaaraysaa 3(saddex) jeer bedka dhulka J.F.S. Haddaba waa maxay welwalka ama khataraha ka jira badaheenna ?

Qataraha ka jira badaheenna oo suurtagal ka dhigi waayay in ay noqodaan:

- ✓ Kuwa aan leenahay
- ✓ Hoos yimaada qaranimaddenna
- ✓ Noqdana biya leh deegaan nadiif ah iyo irmaan aan gureeyn abaar iyo aaran toona.

Haddaba khataraha ku wajahan saddexda qodob oo noqon kara istiraatiijiyaddeena badeed oo aan hiigsanayno, waxay u kala horreeyaan sida ay u kla halis badan yihiin, waana kuwan:-

1. **Khatar L.1 xadidda iyo xaalufinta badaheenna:** muddo dheer, gaar ahaan kadib burburkii Dowladdii dhexe ee dalka waxa si xowli ah u socotay arrinta ah xadidda kalluunka iyo xaalufinta badda, waayo maraakiibta kalluumeysiga waxay isticmaashaa qalab wax u dhimaya deegaanka dhulka hoose ee badda iyo noolaha ku tarma halkaas, taasoo keenaysa in ay qaadato ka soo kabsashadeedu muddo dheer, ugu yaraan rubuc qarni (25 sano) sida daraasaddu ay sheegtay (Securing Somali Fishers 2015). Qiimaha kalluunka la dhaco sanadkii waxuu gaarayaa $300,000,000 (saddex boqol oo milyan oo dollar), intaan laba jibbaarkeed waxaa lagu qiyaasay khasaaraha xaalufinta, (Securing Somali Fishers 2015), sidaan haddii ay arrintaani ku sii socotana biyaheennu waxay noqon doonaan kuwa guran (la xaalufiyey) ah oo khayraad aan lahayn. Waqtigaan la joogo dhowr nooc oo kalluun ah si daran ayay hoos ugu dhaceen, kuwa kalena waaba la waayay, runtii xadidda iyo xaalufinta waa khatar L.1 ee ka jirta badaheenna, una baahan in la qaado tillaabo lagu yaraynayo khatartaan, haddii latirtiri waayo.
2. **Khatar 2aad waa wasakhaynta badda:** arrintaan waa mid jirtay laga soo billaabo 1991kii, inta aan ka warqabno,

warkeeduna aad ayuu u socday sagaashamaadkii, laakiin aad ugama warhayno in ay wali socoto iyo xajmiga ay la egtahay, tani runtii waa khatar aad u halis ah oo saamaynaysa deegaanka iyo nolaha badda iyo kuwa xeebaha oo uu dadku ku jiro, muddo dheer waxaa xeebaha badaheenna ku soo dhacayay, gaar ahaan ka dib sunaamigii December 2004tii haama badan ayaa xeebta ku soo caariyey, haamankaana wax ku jiro lama yaqaan, dhibka ay gaarsiyeenna deegaan badeedka iyo kalluunka wali war cad kama hayno, in kasta oo Hey'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimahan deegaanka ee (UNEP) ay sheegatay in cuduro cusub lagu arkay dadka xeebaha deggan.

Haddii hoos loogu daadego khatarahaan waxaa aad halis u ah kuwan:-

- Khatar L.1, xaddida iyo xaalufinta kalluunka.
- Khatar L.2 wasakhaynta biyaha badda.

3. **Khatarta 3aad waa annagoo aad ugu baraarugsanayn,** qorshaha looga hortago oo waxtar ahna u hayan khatarta L.1 iyo L.2 oon soo xusnay, xaaladdan waa mid anaan loo hayn jawaab cid qanci karta; in dhib kugu dhaco amaba ku hay cudur waa wax caadi ah, laakiin in aadan xal waxtar ah aadan udoondoonin cudurkaaga, taas ayaa ah wax lala yaabo.

4. **Khatarta 4aad oo ah mid dhab ah waa maraakiibta dagaalka ee ajaanibta,** oo mushaaxeysa Badweynta Hindiya, agagaarka xeebaha Soomaaliya ayagoo sheeganaya in ay u joogaan la dagaalanka Burcad-badeedka, Dowlado ka mid ah kuwa leh maraakiibta dagaalka ayaa ah kuwa xada kalluunkeena magacyadoodana waxay ku cad yihiin Darasadii (Securing Somali Fishers 2015), taas oo caddaynaysa in ay yihiin kuwa ilaaliya, difaacana maraakiibtooda xadaysa kalluunkeenna, waana khatar wayn.
5. **Khatarta 5aad oo ah mid dhab ah waa shatiyada beenta** ah oy baxshaan dad aanan xil hayn cidna aan masuul u hayn. Bixinta shatiyada lagu kalluumeysto waxaa bixin kara Dowladda dhexe iyo maamul goboleedyada ayadoo la raacaya sharciga kalluumaysiga ee L.29 ee 30/11/2014, laakiin lama aqbali karo in lagu bixiyo sifo ka duwan sida sharcigu sheegayo, waxa la ogaaday maraakiib badan oo ku kalluumaysta shatiyo been ah ama muddoodoodii ay dhacday, runtii tani wa khatar dhab ah sugaysana in laga hortago.
6. **Khatarta 6aad ee la xusi karo waa qaar ka mid ah dadkeenna iyo kuwo soo raaca** oo ku qaxa badaheenna si sharci darro ah, in badaheenna dad aan dhib loo gaysanayn ku safraan dhib wayn uma arko, laakiin dhibaatadu waa tan ku dhacaysa dalka oo dadkiisu ka qaxaayo iyo dadkaas oo

naftooda khatar gelinaya, sidaas awgeed ma noqon karto khatar badeed ee waa dhib guud.

7. **Khatarta 7aad waa waxii la oran jiray BURCAD-BADEEDDA** oo aan hadda jirin, mana jirto sabab ay ku soo noqoto, inkastoo weli ay Reer galbeedku hadal hayaan, waayo maamullo sharci fulin kara ayaa dhashay oo meelay wax ku so xirtaan iyo meel (xafiisyo) ay ku gorgortamaan ma heli karaan. Markeedii horana Bucad-badeeddu halis aad u wayn Soomaaliya kuma hayn, haddii laga reebo wadashada magaca Soomaalida, haddaba khatarta 4aad hadda ma jirto.
8. **Khatarta 8aad waa badaheenna** oo la dhihi karo waxay waddo u noqdeen maan-dooriyaasha, hubka sharci darada ah, ..iwm, qodobkaan naguma ahan khatar wayn, waayo daroogada iyo hubka aan sharciga ahayn waxay qayb ka yihiin ganacsiga caalamiga ah, waxaanna ula mid nahay dhibaatooyinkooda Dowladaha caalamka hadaba khatar la sheegi karo ma aha.

   Haddii hoos loogu daadego khatarahaan waxaa aad halis u ah kuwan:-

   - ❖ Khatarta L.1, xaddida iyo xaalufinta kalluunka.
   - ❖ Khatarta L.2, wasakhaynta biyaha badda.
   - ❖ Khatarta L.3, qorsha la’aanta ku aadan ka hortagidda dhibaatooyinka (khataraha ) ka jira badaheenna.

Haddii la dajiyo qorshe looga hortagi karo khatarahaan waloow haba ahaado mid hoos u dhigaya 40-50% oo kaliya waxaa haraya 2(labada) ee kala ah:-

1) Xaddida iyo xaalufinta badda.
2) Sunta iyo haraaga warshadaha ee lagu duugay badaheenna.

**Tallaabooyinka wax ka qabashada halisyadan waxay noqonayaan sidan:-**

i. Khatarta 1aad waa tan ah xadidda iyo xaalufinta khayraadka badda waxaa hoos loogu dhigi karaa:-

   1. In ay Dowladda Federaalku ay ka codsato Q.M in Caalamku gacan ka siiyo Soomaaliya badbaadinta khayraadkeeda Baddeed, waana in Soomaaliya ay ku daadaasho sida Q.M u soo saari lahayd qaraar tilmaamaya in maraakiibta wadda xadidda iyo xaalufinta khayraadka badda Soomaaliya loo aqoonsado Burcad Kalluumeysi, loona xilsaaro maraakiibta dagaalka ee Amniga u joogta biyaha Soomaaliya ee ladagaala B/Badeedka in ay fuliyaan qaraarkan soona qabtaan maraakiibta kalluumeysiga oon haysan shati sax ah, si loogu maxkamadeeyo maxaakiinta J.F.S.

2. In la howlgaliyo Ciidanka Badda Soomaaliyeed: Dowladda F.S. waxaa lagama maar maan ah in ay isku tashato oy nafteeda cuskato. waxaa jira mashaariic fara badan oy wadaan hay'ado badan oo doonaya in ay xeebaha J.F.S ay dhigaan Raadarro kashifa Burcad-Badeedka, waxay horay ugu taageen Jabbuuti, Yeman, Kenya iyo Tanzania, haddana waxay wadaan in ay ka taagaan xeebaha J.F.S. Raadaar waxba noo soo kordhin mayo ee waa madadaalo, waayo:

   a) Dhibaato Burcad-Badeed ma jirto hadda, markii ay jirtayna halis weyn kuma ahayn Soomaaliya.
   b) Ma ogola in ay kashifaan oy diwaan galiyaan (sajilaan) maraakiibta kalluunka naga xadda, waayo kuwa Raadarada wado ayaa kamid ah.
   t) Waxay raadaradaan u shaqeeyaan Dowladaha leh maraakiibta dagaal ee ku jirta biyaha J.F.S. kuna jooga qaraarada Q.M. qaybna ka ah xaddida iyo xaalufinta khayraadka badaheenna sidaan horay usoo xusnay, haddaba mar

haday xaaladdu sidaas tahay dhab ahaan, sow taladu ma'aha inaan isku tashanno, waana arrin qasab ka dhigaysa in la howlgaliyo C.Badda. D.F.S, kan Soomaaliland, kan Puntland iyo kuwa laga abaabulo maamul goboleedyada kale. Sida la ogyahay dhumucda baddeena waxay gaaraysaa (Badwaynta Hindiya) 648KM laakin 50% kalluunku waxuu ku koban yahay biyaha Qaranka, (12.N.M=22KM) iyo biyaha xiga (12N.M=22KM) wadar; 24N.M=44KM, haddaba haddii aan wax ka qabano intaan 44KM B/Hindiya. Waxaan badbaadinay 50% khayraadka baddeena. Xagga Gacanka cadmeed waxaan ku leenahay 70N.M (130 KM), hase yeeshee kalluunka intiisa badan 50% waa iska sidii hore aan u soo xusnay: 44km. haddaba intaan (44km) siday aan u hanan karnaa? Oon u badbaadinaa 50% ee khayraadkeena badda, waliba anagoo kutalagalayna awooddeenna maanta oo cid kale wax kasugayn uguna

taashaneyn, waana howlgalinta C.Badda Soomaaliyeed oo dhan sida aan u soo sheega.

**C.Badda Soomaaliyeed wuxuu ka koobanyahay:**

Ciidamada Badda ee D.F.S, kan Puntland, kana Soomaaliland dhamaan si fudud ayay u dabooli karaan, awoodda hadda jirta waxay u suurtagalaysa in ay wax qabtaan haddii la siiyo ciidamadaas baddeed xoogaa gacan ah. Ciidamada badda ee maamul goboleedyada oo mid kasta diyaariyo min 100(boqol) badmaax (kalluumaysato shaqadooda haysata); waa la tababarayaa waxaana loo sheegayaa in ay ugaarsadaan maraakiibta kalluunka xadaysa kana fogaadaan maraakiibta kale nooc kasta ha ahaadaan ee markii la soo qabto markab tuug ah, waxaa la keenayaa xeebta, maxkamad ayaa la saarayaa, kharashka lagu xukumana waxaa la siinaya 50% ciidanka soo qabtay, si kor loogu qaado howlgalkooda, 50% deegaanka ayaa

lagu horumarinayaa, Reer galbeedku kama welwali karaan ciidamadaan waayo ma ahan Burcad badeed, mana u aqoonsan karaan, waayo raggaan waa la tababaray halhalna waa loo yaqaan, xeebo ay wax keeni karaana ma jiraan mana fulin karaan wax aan ka ahayn waxii loo igmaday.

**F.G:** Qorshahaan haddii la fuliyo waxuu naga xallin karaa qayb wayn oo ah halista xaddida iyo xaalufinta khayraadka badda, waa sida an rumaysanahaye.

**ii.** Halista wasakhda lagu duugo baddeena: xalka halistaan waa inuu qayb ka noqdo qorshaha badbaadinta badaheenna, waxana ka mida kuwan:

**1)** D.F.S waa in ay la xiriirto Hay'adda UNEP ee Q.M u qaabilsan deegaanka, UNEP horay ayay daraasaad uga samaysay arrintaan, kaliya waxaa hadda aan ka rabno UNEP waa in ay talo ka bixiyaan qaabkii loo aasi lahaa haamankaan badda ka soo dhacay si shibaatadooda looga samato baxo.

2) Waa in baaris lagu sameeyo biyaha baddeenna, ayadoo la dooranayo dhowr meelood oo kala duwan xagga ka fogaanta xeebta. Howshaani aad uma adka, waxaana fullin karta Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed(HCBS) oo lagu taakuleeyo dooman iyo laabab, waana arrin horay dhowr jeer ay u samaysay HCBS.

3) Baaristaan kadib waxii soo baxa, ayagana xal munaasib ah ayaa loo heli doonaa, ayadoo laga faa'ideysanayo tijaabooyinkii hore ee H.C.B.S, lana kaashanaya UNEP.

4) Waxaa ayadunna aad muhiim u ah in la xakameeyo wasakhda ka timaada berriga sida; Qashinka xeebaha lagu shubo iyo bullaacadaha magaalooyinka ee badda ku socda.

5) In dadwaynaha gaar ahaan xeebalayda, laga wacyi galiyo in ay ka fogaadaan haamaha suntan iyo wasakhda haraadiga warshadaha ee ku soo caariya xeebaha, waayo waxay keeni karaan cudur halis ah.

Ugu danbayntii haddii qorshahaan la howlgaliyo waxxaan hubaa in guul laga gaari karo, hoos udhigidda halista xadidda iyo xaalufinta iyo tan sumaynta Badda.

Nuxurka maqaalku waa in aan isku tashanno, annagoo adeegsanana imkaaniyaadkeenna cilmi iyo dhaqaale.

## Xaaladaha uu ku sugan yahay Kalluunka Badaheenna

Badaha dalkeena waxaana ku nool noocyo kale duwan oo kalluun ah, ha ahaaadaano kuwa guri ah (aan guurguurin) iyo kuwo gurguura oo xilliyo yimaado kuna jira baddeena muddo ka dibna gudba. Labadaan nooc oo mid kasta usii kala baxo qoysas badan, waxay isugu jiraan xagga qiimaha (Gudaha iyo Dibadda) heerar kala duwan. Arrinta u baahan in wax la iska weydiiyo waxay tahay muxuu ku sugan yahay kalluunka badaheenna?

Wuxuu ku sugan yahay kalluunkeenu xaalado kale duwan oo dhibaatooyin ah loona baahan yahay in loo gurmado qaar ka mid ah oo dabar go' ku sii socdo. Sannooyinkaan dambe Hey'adaha Cilmibaarayaasha Kheyraadka Badda waxay qoraayeen in 44% kalluunka Soomaaliya uu ka hoos maray heerka joogtaynta wax soo saarka Unsustainability situation, lagama maarmaanna ay tahay in loo gurmado si aan loo xaalufin nuucyo qaali ah kana mid ah kalluunka.

## Nuucyada ildaran (Unsustainability situation)

Noocyada kalluunka oo qaaliga ah, hadana ku sii socdo dabar go' waxaa ugu horreeya 8aad nooc oo kala ah:-

1. **Yaxaaska (Shark)**
2. **Wayaambuuro (Sword Fish)**
3. **Yuumbi (Striped Marlin)**

5. **Fangalaati (Goat fish)**
6. **Sumayn (Grouper)**
7. **Gaduudow (Grunts)**


4. **Cangub (Snaper)** 8. **Gaxash (Emperor)**

Iyo Qubada oo sharcigeynu mamnuucayo in la ugaarsado, aan hal hal u soo qaadano anagoo aad u koobeyno:-

**Yaxaaska (Shark)**

Libaax badeedka ama yaxaaska waa noole laga helo baddeena, waxa uuna ka kooban yahay bahooyin badan (Species), qaar ka mid ah noocaan wuxuu gaaraa 12mitir, yaxaaska waa kalluunka guurguura, moolalka uu ku safrana way kala duwan yihiin, wuxuuna ka mid yahay kalluunka aan dhafaha lahayn oo wuxuu leeyahay Carjaw.

Yaxaaska waa kalluun halis ah oo dadka waxyeeleeya, aad ayaa loo jilaabtaa, hilibkiisuna waa la cunaa, dhegahiisana dibadda ayaa loo dhoofiyaa, wax soo saarkiisuna waxa uu ku wareegaa 40% kalluunka la jilaabto.



Sidaas awgeed dabar go’a ku socdo  waa mid halis gaar ah u leh dhaqaalaha Soomaaliya, taasoo keeneysa in xal waxtar ah loo helo.


**Wayaamburi (Sword Fish)**

Noolahaan waxa uu ka mid yahay kalluunka guurguura isla markaana ku nool biyaha sare, dhererkiisa waxa uu gaaraa 4m, waxaa laga helaa inta badan dhulka kuleylaha (tropic zone) iyo dhulka qabow (temperate) ee badaha Atlantic, Pacific, iyo Indian Oceans. Waxaana la helaa kalluunkaan xiliyada bad furanka, balse waa uu sii dabar go’ayaa.

**Ahmiyada dhaqaalaha**

Waa kalluun aad looga ganacsado gudaha iyo dibadda, waa kalluun aan lahayn lafo badan, lehna hillib macaan.  Dhaqaale badan ayuu soo gelin jirey wadanka. Maadaama uu yaraaday waxaa is dhimay dheeftiis (wax soo saarkiisa).

sidaas awgeed wuxuu inooga baahan yahay gurmad.




## Yuumbi (Striped Marlin)

Noocan waxaa uu ka mid yahay kuwa guurguura kuna nool biyaha sare ee dhulka kuleelaha (tropical zone) kuleyl xigenada (subtropical) ee badaha Pacific iyo Hindiya. Celcelis dhererkiisu wuxuu gaaraa ilaa 4.2m culeys ahaan 190kg. wuxuuna ugaarsadaa xilliga maalinta , wuxuu noolaan karaa ilaa 20sano,wuxuuna doorbida heer kul gaaraya 20-25degree celcius. Waxa uuna quutaa kalluunka kale.

## Ahmiyada Dhaqaalaha

Noocaan wuxuu ka mid yahay Kalluunka ay soo jilaabtaan Dadkeenu, wuxuuna leeyahay Hilib macaan, waxaana aad looga jecel yahay gudaha, dibadana aad ayaa loo dhoofiyaa. Haddaba mar waa baahi tire (food security) marna waa lacag soo saare (Hard currency).



Sidaas awgeed sii dabar go'idiisu dalkaan waxay u tahay khasaaro weyn ee dhaqaale. Haddaba wuxuu u baahan yahay badbaadi

## Cangub (Snapper)

Noocaan waxa uu ka mid yahay malaay Khareedka (Guri), wuxuuna ku nool yahay gunta hoose ee biyaha badda, qaab dhismeedka jirkiisuna waa mid fidsan, dhererkiisuna wuxuu gaaraa 60-90cm. In kastoo uu ku noolyahay Cowska haddana wuxuu sii ugaarsadaa kalluunka yar yar iyo ayax badeedka.

## Ahmiyadda dhaqaale

Noocaan waxa uu ka mid yahay kuwa laga heli jiray dhaqaalaha ugu badnaa xagga suuq qeynta, iyadoo hadda ay ka mid yihiin kalluunka sii dabar go'ayo una baahan in la ilaaliyo.



## Fangalaati (Goat fish)

Noocaan waa ka mid ah kalluunka cowska cuno kuna nool gunta hoose ee biyaha, waxaana laga helaa ilaa 500m gunta hoose ee badda (deep water). Badina wuxuu ku nool yahay goobaha shacaabiga, sidoo kle wuxuu quutaa kalluunka. Dhererkiisu wuxuu gaaraa ilaa 60cm.

## Ahmiyadiisa dhaqaale

Noocaan sidoo kale waa kan ugu badnaa ee la soo jilaabto, wuxuuna ka mid yahay noocyada ugu macaan ee kalluunka looguna jecel yahay. Dhaqaale badan laga heli jiray, wuxuuna ka mid yahay kalluunka sii dabar go'ayo xilligii la heli jirayna lama helo, waana mid u baahan wax ka qabasho degdeg ah.



Sidaas awgeed wuxuu u baahan yahay in laga hor tago inuu dabar go'o.

**Sumayn (Grouper)**

Noolahaan waxa ay isugu jiraan bahooyin badan (Species), waxay leeyihiin jir adag uma sameysna jirkoodu inay gaaraan masaafo aad u fog, waxay quutaan kalluunka yaryar iyo ayax badeedka, dhererkiisa wuxuu gaaraa Mitir, culeyskiisuna wuxuu gaaraa100kg.

**Ahmiyadda Dhaqaale**

Noocaan waa kan ugu badnaan jiray kalluunka laga soo jilaabto xeebaha Soomaaliya, waana noocyada loogu jecel yahay dalka ayuu ka mid yahay, hase yeeshee hadda aad ayuu u yar yahay oo waxaaba la oran karaa waaba dhif iyo nadir.



Runtii waa arrin u baahan in gurmad degdeg ah loo galo.

**Gaduudow/Gaxash (Emperor)**

Noocaan wuxuu ka mid yahay kalluunka cowska cuna kuna nool gunta hoose ee badda 500m. waxaana badanaa laga helaa biyaha dhulka kulaalaha (tropical zone) ee badda Pacific iyo Indian. Sidoo

kale wuxuu ugaarsadaa noolaha kale ee yar yar sida kalluunka iyo xashaashada.

**Ahmiyadda Dhaqaale**

Noocaan waxaa loo isticmaalaa daawo ahaa, cuna ahaan iyo weliba qurux. Waxaa uu yahay mid qiima sarreeyo oo lacag adag ah, weliba waa mid loo qaado dibbada, dhaqaalena ka soo xaroodo. Sidaas awgeed waxaa muhiim ah in laga hortago sii dabar go'idiisa.



**….. ( Grunts)**

Noocaan waxaa uu ka mid yahay noolaha laga helo gunta hoose ee badda, dherer ahaan waxa uu gaaraa 30cm (12in), wuxuna leeyahay midab aad u qurxoon.

Ahmiyada ahaan

Noocaan waxaa loo isticmaalaa badanaa in loo adeegsadaa quruxda sida: Meelaha la isugu yimaado, hotelada IWM. Waana kalluun

aad qiima u leh dhanka dhaqaalaha badanaa lama helo waana dhif helidiisa. Waxaa muhiim ah in la badbaadintiisa loo howl galo.



**QUBO (Diin-Badeed)**

Qubadu waxey ka mid tahay Noolaha xamaaratada loo yaqaano, waxayna ku nooshahayinta badan biyaha badda, ee dhulka kulaylaha ah (Tropical zone) ama dhulka diirran (subtropical), masaafo dheer ayey goysaa oo meelo fog bay gaartaa. Sida aan hore u soo xusnay Qubadu biyaha badda ayey ku nooshahay, haddana barriga waxay timaadaa marka ay dhigeyso ama dhaleyso Ukumaha oo ay ku aasto xeebta. Qubadu waxa ay leedahay noocyo kala duwan oo intooda badan ay sii dabar go'ayaan.

Baddaheena waa laga helaa intooda badan noocyada qubada, hase yeeshee gowrac joogta ah ayaa ku socda, gaar ahaan Caasimada Muqdisho oo maalin walba celcelis ahaan lagu qalo 10 (toban) madax oo quba ah, una badan dheddig.

Sidaas awgeed qubadu waxay ka mid tahay noolaha sii dabar go'ayo. Waxaa lagama maarmaan ah in la badbaadiyo noolahaan. Sababtoo ah waxaa jira sharci caalami ah oo mamnucaya,

sidoo kale sharciga kalluumeysiga Soomaalia ayaa qabo in aan la ugaarsan Karin qabada ah. Q.34aad





## Sababta keenaya Dabar go'a Kalluunka

Xaalufinta maraakiibta ajnabiga ee kalluunka dhacda (Burcad kalluun), arrintaan oo si wanaagsan oo cilmiyeysan ay u baareen Hey'addaha Cilmibaarayaasha soona saareen natiijada aan u cuskannay qoraalkaan ***(Secure Fisheries 2015***). Xaalufinta keeneysa dabar go'aan, waa arrinta ugu khatarsan (L.1) ee amniga badaheenna. Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed mar hore ayay talo ka bixisay kuna soo celcelisay, haddana ay ku qortay maqaalka nabedgelyada badaheenna ee cadadkaan 10aad ee Juula-Jawaay. talooyinka ka hortaga dhibaatada, waana howl aan cusleyn haddii lagu dhaqaaqo waxtarkeeduna huban yahay. Intaas ka dib waxaa Hey'adu talo ku soo jeedineysaa aadna u adkeyneysaa in kormeerayaal la saaro maraakiibta la siinaayo shatiyada ka kalluumeysiga badaheenna sida uu na faraayo sharciga kalluumeysiga ee Dalka.

## Daraasad kusaabsan Xeerarka Badda, Heer Caalami, Heer Gobal, iyo kuwa dalka JFS ay yeelatey.

Aduunka aan ku noolnahay waxaa xili hore oo laga joogo hal qarni lasoo bilaabay iskudabaridka arimaha Badaha kadib markii loo arkey baahi dhankaas kajirta ,xiligaas oo Badaha aduunka ay kusoo badatey shilalka ay galaan maraakiibta xamuulka dad weynaha iyo kuwa sida badeecadaha isaga goosha badaha Caalamka oo idil, waxaa la hirgaliyey sharuuc iyo xeerar lagu maamulo arrimaha bada si loo helo bad nadiif ah oo ka caagan dhibaatooyinka ka imankara gaadiidka adeegsanayahay badaha dhexdooda, waxaan ku bilaabaynaa xeerarka caalamiga ah ama heshiisyada caalamiga ee arimaha Badaha oo ay hirgalisay hay'adda Caalamiga ee arimaha Badaha Aduunka oo loo soo gaabsho magaceeda( IMO) International Maritime Organization.

### i-Heshiisyada Badaha ee heer Caalami (International Maritime Conventions).

Heshiisyada badaha ee heer caalami waa heshiisyada loo ansixiyey qaab caalami ah oo ay hirgalisay hay'adda caalamiga ah ee Badaha aduunka (IMO), heshiisyadaas waxaa saxiixay Dowladaha xubnaha ka ah IMO oo dhan tiradooda 173 dowladood, xarunta ay kushaqeyso waxay kutaalaa hay'adda dalka UK magaalada London, hay'adda qaab dhismeedkeeda wuxuu ka kooban yahay sadex qaybood Gole Guud, Gole dhexe, Guddi hoosaady, golaha guud wuxuu shiraa labaddii sanaba mar waxaana kasoo qaybgala dhammaan dowladaha xubnaha ka ah hay'adda, waxayna qabtaan iney doortaan xubnaha golaha dhexe, dajinta miisaaniyadda, ansixinta qorshe hawleedka hay'adda, hadaba hay'adda caalamiga ah ee badaha si kooban sidaas ayey ku dhisan tahay hadana waxaan soo qaadanaynaa heshiisyada ama xeerarka ay hirgalisay tan iyo

markii la aas aasay taariikhdu markay ahayd 1948 magaceedo markaas wuxuu ahaa lagu aasaasey International Maritime Consultative (IMCO) balse magaca hadda ee (IMO) waxaa loo bixiyey 1982, kulankii ugu horeeyey oo ay yeelato Hay'adda waxaa laqabtey kadib aas aaskeedii 1949, isugeyn heshiisyada ay sameysay IMO waa 59 heshiis iyo baratakool 49 kamid ah heshiisyadaas waa dhaqan galeen, 7 kamid ah heshiisyadaas wali uma dhameystirmin qaabkii dhaqan galka,3 da heshiis ee soo hartey sidoo kale wali mabilaaban nidaamkii dhaqan galka oo dowladaha xubnaha ma aysan saxiixin.

**Heshiisyada Caalamiga ah ee IMO waxaa loo kulmiyaa qayb qayb oo ah sida soo socotta:-**

1- Heshiisyada IMO kuwa ugu waaweyn uguna muhimsan .
2- Heshiisyada xidhidhka la leh badbaadada Badda iyo amnigeeda.
3- Heshiisyada xidhiidhka la leh ka hortagga wasakheynta Badda.
4- Heshiisyada ku salaysan masuuliyadda iyo magdhowga .
5- Heshiis kale .

**1- Heshiisyada IMO kuwa ugu waaweyn uguna muhimsan:-**

- **United Nations Convention on the Law of Sea (UNCLOS 1).**

Heshiiska caalamiga ah ee badaha wuxuu soo maray sedex jaranjar oo look ala bixiyey UNCLOS1,UNCLOS2,UNCLOS3 sedexdaas taariikh ayuu sal dhigtey heshiiskan ilaa laga gungaarey heshiis rasmi ahana lagu gaarey UNCLOS3 heshiiskan caalamiga ah waxaa garwadeen ka ah hey'adda qaramada midoobe dhanka maamulka iyo iskudaba ridkiisa. Hadaan ka bilowno qeybtiisii

kowaad ee loo yaqaan UNCLOS1 wuxuu qabsoomey shirkiisii ugu horeeyey 1956 magaalada Genava waxaana kasoo qaybalay 68 dal oo kaliya

**UNCLOS1** waxaa kasoo baxay afar qodob oo lasoo saarey sanadka markuu ahaa 1958 afartaas qodob waxay kala ahaayeen sidan:

1- Convention of the High Sea; Heshiis ku saabsan badda sare oo dhaqan galay 30 September 1962, waxaana lagu heshiiyey in si xor ah loo mari karo badda sare,in si xor ah hawadeeda loo mari karo, in six or ah looga kaluumeysankaro iyo dhigista tuubooyinka iyo xariga korontada ,inernetka ,telfoonada,imw.
2- Convention on the Continental Shelf heshiis kusaabsan qeybta qolfoof qaaradeedka badda oo dhaqan galay 10 jun 1964.
   Dowladda xeebta leh waxa ku leedahay qeybtan iney maamusho badda korkeeda iyo kheyraadkeeda. lkn kuma lahan awood maamulka hawada sare iyo biyaha marka la gooshayo, dalalka oo dhan waa u furan tahay.
3- Convention on the Territorial Sea and Contiguous Zone; Heshiis ku
4- saabsan badda dalka iyo badda xigta oo dhaqan galay 10 September 1964,
   Dowladda waxay xaq u leedahay qeybtan biyaha dalka maamulka si buuxda ayey xaq u leedahay, qeybta xigtana sidoo kale balse waxaan laga go'aan gaarin cabirka dowlad kasta ay yeelanayso biyaha awood ahaan.

5- Convention on Fishing and Conservation of Living Resource of the High Seas heshiis kusaabsan kheyraadka kaluunka iyo

noolaha kujira badda sare oo dhaqan galay 20 march 1966, waxaa lagu heshiiyey dowlad xeebeedka ayaa  xaq u leh ka faa'ideysiga kheyraadka nool ee kujira qeybtan

**UNCLOS 2 1960.**

Shirkan loogu magac darey UNCLOS2 wuxuu qabsoomey 1960kii, waxaana la isugu yimi magaalada Geneva ,qorshaha shirkan wuxuu ahaa in lagu dhameystiro wixii ka dhinnaa qeybtii hore ee UNCLOS1 oo aan dhameystirmin heshiisna aan laga gaarin **Territorial Zone Sea** ,**fisheries limits ,** labadaas qodob ayaa laogu tala galay in lagu xaliyo, wuxuna socdey shirkii looga arinsanyey lix asbuuc oo isku xiga, wax go'aan ahna lagama soo saarin oo waa lagu kala kacay, natiija la'aan ayey kusoo dhamaadey.

**UNCLOSIII  1973-1982.**

Kulanka sedexaad ee heshiiska caalamiga ah ee arimaha badaha wuxuu socdey 9sano iyo wax lajira kulankii UNCLOSII kadib, waxaana kasoo qaybgashey 160 dal, heshiiskan waa heshiiska ugu muhimsan uguna balaaran intii la soo wadey hawlahan, waxaana lagusoo bandhigey xeer ka kooban 320 qodob iyo 9 lifaaq oo lagu maareynayo arimaha badaha, waxaana lasaxiixay 10 December 1982.  Heshiiskan wuxuu dhaqan galay 1994 tii , heshiiskan waxaa qodobo muhim ah laga gaarey arimhii mudo lagu murmayey oo heshiis dhab ah laga gaarin, waxaa kamid ah qodobada heshiiskan lagu xusey ee laga guul gaarey:

1- Xadeenta biyaha dal kasta uu yeelan karo, waxaana loo xadeeyey sidan;
    - Territorial Sea 12nm oo ah biyaha dalka (Biyaha Dalka).

- Contiguous Zone 12nm oo ah biyaha xiga (Biyaha Xiga).
- Economic Zone 200nm oo ah biyaha aaga ganacsiga furan (EEZ).

- Continental Shelf Zone 150nm oo ah biyah qolfoof qaaradeedka ,sidaas ayaa loo qeebiyey xadka biyaha sida ku cad xeerka caalamiga ah ee UNCLOS3 qodobadiisa kala ah Qod 3,4,33,55,87.

2- Ilaalinta Deegaan badeedka ;Xeerkan wuxuu ahmiyad muhim ah siiyey ilaalinta xeebta ,biyaha badda in laga ilaaliyo wax walba oo dhibaato u keeni kara ama wasakheyn kara, waxaana loo sameeyey xeerar kale oo arimahaas si qoto dheer uga faaloonaya.
3- Kafaa'ideysiga kheyraadka nool iyo midka aan nooleyn.
4- Cilmi baadhista qeybaha culuumta badda ee kala duwan.
5- Xalinta khilaafaadka dowladaha ka dhaca.

Xeerkan waa kan marjaca u ah aduunka oo dhan arimaha badaha waxaana loo xigtaa arimaha badaha ku saabsan, xeerarka la sameynayo, urur goboleedyada arimaha badaha.

Xeerkan dowladda J.D.S waxay ka mid ahayd dowladihii soo ansixiyey balse xiligii dhaqan galka dowladdeena way burburtey, sidaa awgeed waxaa naga maqan waxbadan oo talaabooyin muhim ah oo aan la sameyn sida gudbinta khariiradda xuduud badeedka badda Soomaaliya dowladda F.S waxaa u suurta gashey 2014 kii in ay dirto nuqul xuduud badeedka badda oo qoraal (Cordinates) ah oo aan lahayn sawir.

- Heshiiska Caalamiga ah ee badbaadada naflayda iyo nabad-qabka badda dhexdeeda oo loo yaqaan **SOLAS The International Convention for the Safety of Life at Sea.**

  Heshiis **SOLAS** waxaa la soo bilaabay sanadka markuu ahaa 1914 waana heshiiskii ugu horeeyey oo caalami ah kuna saabsan bad oo la hirgaliyo iyadoo laga jawaabayo dhibaatadii weyneyd ee ku dhacdey markabka **RMS TITANIC SANk 15/04/ 1912** oo ay ku dhinteen **1517qof** markabkaas oo kasoo baxay dalka **UK** wuxuuna ku socdey dalka **USA** ,kulankii labaad ee heshiiskan wuxuu dhacay **1929**,kulankii sadexaad wuxuu dhacay **1948**,kulankii afraad **1960** , heshiiska **SOLAS** wuxuu dhaqan galay oo uu rasmi noqdey waliba ansixiyeen dowladahan **1974,** waxaana loo yaqaanaa **SOLAS 74** 158 wax ka badal ayaa lagu sameeyey intuu jirey .

  Heshiiska SOLAS waa xeerka ugu balaaran dhanka baaxadda iyo muhimadda, wuxuuna soo jiitamayey laga soo bilaabo 1914**,** waa heshiiskii ugu horeeyey ee badeed oo la hirgaliyo, muhimaddiisuna waa ilaalinta dadyowga ku safraya badda korkeeda oo laga ilaalinayo khatar kasta oo ku iman karta noloshooda iyo badbaadintoda haddii dhibaato qabsato in loo gurmado, xeerkan wuxuu ka koo banyahay **14** cutub oo koobaysa dhammaan baahiyaha badda dhexdeeda aan looga maarmeyn.

**Cutubka 1aad- Qodobo Guud (General provision).**

Cutubka 1aad ee heshiiska **SOLAS** waa qodobo guud oo faafaahintooda laga arki karo Cutubyada kale ee soo socda.

**Cutubka 2aad – Dhismaha markabka iyo ka hortaga gubashada (Construction and Electrical installations and Fire protection).**

cutubka 2aad wuxuu sheegayaa dhismaha markab ama doon iyo shuruudaha laga rabo iyo waliba agabka lagama maarmaanka u ah nabad-galyada naflayda saran, ka hotaga dab ka dhasha markabka dhexdiisa iyo ogaanshaha goobta gubanaysa si looga hortago inuu ku sii faafo dabka markabka oo idil, qaab dhismeedka qulqulka korontada lagu dhisayo markabka waa iney ahaataa mid aan dhib keenayn oo laga hortagi karo hadii uu dhasho dab.

**Cutubka 3aad- Badbaadada nolosha (Life Saving –appliances and arrangements).**

Waxaa waajib ku ah markabka inuu u diyaarsan yahay badbaadinta noolaha saaran una dhameystiran yahay qalabka badbaadada, sida jaakadda dabaasha waa (**Life Jackets)** iyo doonyaha yaryarka ah ee loo yaqaan **Life Boats,** waa iney ku diyaarsan yihiin maraakiibta dushooda ama jambiga markabka si haddii uu shil dhaco ugu badbaadi karaan dhammaan rakaabka saran markabka ama doonta.

**Cutubka 4aad- Isgaarsiinta Markabka ama Doonta (Radio-Communications).**

Waxaa muhim ah in uu markabka saaran yahay ama uu ku dhisan yahay qalabka loo yaqaan **GMDSS (**Global Maritime Distress Safety System), qalabkan oo ah qalab badbaado iyo nabad-galyo

Manaarado tilmaamaya meesha uu taagan yahya markabka oo loo yaqaan (**EPIRBs)** Emergency position indicating Radio Beacons, iyo qalbka baarista oo badbaada ah iyo qalb telefoon oo ka jawaabaya dirista fariimaha oo loo yaqaan (**SARTs).**

**Cutubka 5aad- Nabad qabka Safarka (Safety of Navigation).**

Nabad qabka ku safridda badda waxay dalbanaysaa agab diyaarsan oo aad looga taxadarey si looga hortago khatar ku imankarta gaadiidka ku socdaalaya badda korkeeda ama hoosteeda waxaana loo baahnyahay in lahelo qalab sheegaya heerka cimilada iyo sida ay tahay waa in uu saran yahay markabka (**Metreological Service for Ships**) waxaa kaloo muhim ah qalabka jiheeyaha oo casri ah si looga hortago jahwareerka iyo lumitaanka maraakiibta **Routing of Ships** iyo qalabka baaritaanka iyo badbaadada oo lagu ogaanayo markabka meesha uu joogo marka ay cilad ku timaado .

**Cutubka 6aad- Qaadidda Badeecooyinka (Carriage of Cargoes).**

Waxaa muhim ah in qaadidda badeecooyinka ay leedahay hab iyo qaab loo qaado waliba badeecooyinka u baahan in la ilaaliyo siiba kuwa

kiimakada ah ama hubka Nuclearka, badeecaddaas gaarka ah waxaa loo sameynayaa calaamad gooni ah ama waxa loo yaqaan Code.

**Cutubka 7aad-Raridda Badeecooyinka khatarta ah (Carriage of Dangerous Goods).**

Cutubkan wuxuu khaas u yahay sida loo maareeyo badeecadaha khatarta ah qaybtiisa hore wuxuu sheegayaa qaabka loo cabeeyo ama loo raro, badeecadaha khatarta ah oo in la ilaasho u baahan waxaa ka mid ah kuwa adag ee qalalan oo aadka u badan, qaab dhismeed gooni ah ayaa looga baahanyahay maraakiibta qaada xamuulka kunteenarada kiimakooyinka qaada oo waliba dareeraha ah iyadoo la raacayo xeerka **IBC Code(** International of Bulk Chemicals ), waxaa lagu qorayaa badeecadda korkeeda xarfaha la soo gaabiyey oo la isku yaqaan si loo ilaaliyo ama looga taxadaro ama looga hortago haddii wax ka yimaadaan.

Maraakiibta qaadda Gaaska dareeraha ah iyo dhismahooda agab ahaan waa iney waafaqsan yihiin xeerka IGC Code (international Gas code) oo loola jeedo nidaamka xakameynta ama ka hortaga gubashada wax kastoo dhib u keeni kara maraakiibta xamuulka Gaaska dareeraha ah waxaana la meel mariyey qaybtan 1986.

Waxaa kaloo Cutubkan muhim ah oo uu ka hadlayaa, xakameynta maraakiibta xamuulka daaqada lagasameeyo hubka nuclearka ee xiran ama maraakiibta xamuulka haraadiga hubka nukleerka ah.

**Cutubka 8aad –Maraakiibta Nukleerka (Nuclear Ships).**

Maraakiibta xamuulka daaqada ah waxaa looga talagalayaa in hubka nukleerka iyadoo la iska ilaalinayo falaaraha shucaaca ay bixinyaan oo waliba u baahan ilaalin gooni ah iyo ka hortag masiibooyinka ka dhalnkara, haddii dhibaato kati maadana looga baahan yahay magdhow cidii masuuliyadda lahayd arinkaas.

**Cutubka 9aad-hawl-galinta Maraakiibta si ammaan ah (Management for the safe the operation of ships).**

Maraakiibta caalamiga ah waxay u hawlgalayaan qaab casri ah oo raacsan xeerarka loo asteeyey sida xeerka loo yaqaan **ISM (Code** of International Safety Management), waxaana laga rabaa mulkiilaha markabka ama doonta inuu mas'uuliyadda qaado ah inuu gaarsiiyo agabkaas laguna xiro.

**Cutubka 10aad- Xakameynta surcada maraakiibta (Safety Measures of HighSpeed Craft).**

Maraakiibta rakaabka dadweynaha iyo badeecooyinka waxay u baahanyihiin nidaam iyo xeer lagu xakameeyo xawaaraha socodkooda iyadoo laga cabir qaadanayo xamuulka ay sidaan, waxaana loo sameeyey code (HSC high speed craft), iyadoo laga hortagayo shil ka dhaca badda dhexdeeda oo waxyeeleeya naflayda iyo deegaanka badda intaba.

## Cutubka 11aad- Adkeynta Nabad-galyada Badda (Specially Measures to Enhance Maritime safety).

Waxaa muhim ah in maraakiibta iyo doonyaha laga kontoroolo marka dekedaha ay soo gaaraan, sida in laga hubiyo dhanka qalabka iyo agabka inuu dhameystiran yahay, haddii aysan u dhameystirneyn qalabkaas wuxuu halis galin karaa markabkaas amni ahaan isu socodka badda iyo shil inuu sababo.

## Cutubka 12aad- Arimo dheeraad ah oo lagu hagaajinayo nabad-galyada badda.

Waxaa la dhaqan galiyey hishiis nabadgalyada maraakiibta oo caalami ah sanadka markuu ahaa 2002, heshiiskan wuxuu dhaqan galay 2004, waxaana lagu magacaabaa international ship and port Facilities security Cade (ISPS Cade).

## Cutubka 13aad- Xaqiijinta dhabta ah.

Xaqiijin loo sameynayo si quman oo ku haboon xeerarka dalka uu leeyahay iyo xeerarka caalamiga ee gaadiidka maraya ama gooshaya badda iyo dekedaha dalka uu leeyahay ayaa muhim ah, waxaa kaloo baaaritaan dhab ah lagu sameynayaaa waxa uu sido badeecad iyo rakaab kay doontaba ha ahaato iyo hubinta dhanka caafimaadka iyo bad qabka markabka iyo shaqaalaha saaran.

**Cutubka 14aad- nabad-galyada maraakiibta maraysa badda Barafka ah.**

Qaybta ugu dambeysa ee xeerkan waxay ahmiyad siisay sidii loo xakameyn lahaa dhibaato kuti maadda gaadiidka maraya badda fadhida, baddaas oo ka duwan badaha kale ee caadiga ah waxayna u baahantahay in loo diyaariyo maraakiib iyo doonyo khaas ah oo wajihi kara barafka iyo xaaladaha deegaan kaas ka jira. Haddii ay timaado shil ama wax kale waa in loo diyaariyo xaalado degdeg ah

Waxaa la hirgaliyey xeer ama code lagu maamulo arimahaas gaarka ah oo la diyaariyey 2014 waxaana la dhaqan galiyey 2017, waxaana loo yaqaana (Code of Polar Water).

- **Xeerka ka hortaga wasakhda ka timaadda maraakiibta ee kudhacda biyaha badda (Marpol 73/78).**

Xeerka ilaalinta wasakhda maraakiibta ka timaadda ee badda kudhacda wuxuu kamid yahay xeerarka ugu waaweyn aduunka ee badaha wuxuuna ka mid yahay kuwa ugu muhimsan uguna magaca weyn sida kii aan horey uga sheekeenay ee SOLAS74.

Xeerkan waxaa uu soo bilowdey qaybitiisii koowaad 1973 iyo protocol 1978, wuxuuna caan ku yahay magac ahaan **Marpol 73/78**

Wuxuuna ka kooban yahay lix qeybood ama lix nuqul iyo 20 qodob. Guud ahaan xeerkan waxaana ku faahfaahin doonaa halkan:-

**Nuqulka koowaad -Xeerka ka Hortaga Wasakhda Batroolka**

Qaybtan waxay xooga saareysaa xakameynta wasakhda ka iman karta batroolka badda maraya oo ay sidaan maraakiibta shidaalka ama ceelasha ku yaal badda ee qulqul ahaan tuubooyinka u mara, kuwaas oo ka iman karta dhibaato deegaan, sidaas awgeed waxaa laga maarmaan ah in la helo xeerar xakameyn kusameeya iyo la xisaabtan. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay 2oct 1983.

**Nuqulka labaad- ka hortaga wasakhda kiimakada dareeraha ah oo aadka u badan.**

Ka hortaga iyo ilaalinta wasakhda ka timaadda kiimakada dareeraha ah ee ay sidaan maraakiibta xamuulka ah iyo sida looga ilaalin lahaa deegaan badeedka iney ku daataan, si looga taxadaro kiimakadaas waxaa lagu muujinayaa alaabta korkeeda calaamadda loo sameeyey ee ah (IMDG Code) oo loola jeedo International Maritime Dangerous Good Code. Waxaa calaamaddan lagu muujinayaa kiimakada khatarta ah si looga foojignaado nuqulkan, wuxuuna dhaqan galay 1983.

**Nuqul sadexaad –ka hortaga wasakhda ka imanaysa markabka ama doonta dhexdeeda.**

Waxaa xakameyn loo sameeyey oo aad muhim u ah xeerkan ka hotaga wasakhda badda ee **Marpol** in la xakameeyo wasakhda maraakiibta dhexdeeda ka timaadda sida biyaha wasakheysan ee matoorka ,kuwa isticmaalka galay ee lagu isticmaalay doonta dhexdeeda ama markabka ,musqulaha ,nadaafadda markabka kuwa loo isticmaalay biyahaas oo dhan

waxay u baahan yihiin sidii loo kontorooli lahaa meesha ay isaga badalaayan gaadiidka badda oo laga ilaaliyo iney isaga shubaan meel aan ku habooneyn in lagu shubo oo ay keenaan dhibaato deegaan iyo waxa laga yeelayo ciddi ku xadgudubta oo kushubta biyahaas wasakheysan. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay 2003.

**Nuqulka afraad-Ka hortaga qashinka kayimadda markabka ama doonta**.

Dhibaatada uu leeyahay qashinka lagu shubo badda dhexdeeda waliba meelaha xeebaha ama dhulku ka dhow yahay, sida walxaha ka sameynsan caagga ama loo yaqaan plastics iyo dhibaatada deegaanka ama noolaha ay u geysan karaan in laga ilaaliyo inaan lagu daadin meelaha dhowdhow oo aad looga fogeeyo xeebta ,in dababadagal lagu sameeyo gaadiidikii ku xad-gudba arinkaas xeerkan wuxuu dhaqan galay 1988.

**Nuqulka shanaad-ka hortaga wasakheynta hawada sare.**

Nuqulkan wuxuu ka hadlayaa xakameynta wasakheynta hawada ama uumi baxa oo ka yimaadda maraakiibta iyo doonyaha taas oo suurtagal ay thaya iney wasakheeyaan hawada badda, waxayna sababi karta dhibaato deegaan oo waxyeelo u geysan karta noolaha ku nool badda, sida awgeed waxa muhim ah in la kontoroolo maadada saliidda ama shidaalka markabka lana isticmaalo habka loo dajiyey ee

caalamiga ah, si ay u nabad qab fiican u yeelato badda hawadeeda. Nuqulkan wuxuu dhaqan galay oo la saxiixay 2005.

Xeerarka **SOLAS74 & MARPOL** 78 waxay ka mid yihiin xeerarka ama heshiisyada Caalmaiga ah ee ugu muhimsan Qawaaniinta badda ee ka hirgalay aduunka , xeerarkan labada ah waxay ilaaliyaan bad-qabka badda deegaankeeda iyo nabad-galyada noolaha iyo manoolaha badda kudhex jira, xeerarkan waxaa ansixiyey oo dhaqan galyey in kabadan 170 dal oo dunida daafaheeda ku nool,balse waxaan ilaa hadda laga dhaqan galin dalkeena Somalia, waxaana lagu waayey xuquuq iyo waaji baad ku qeexan xeerarkan oo aad muhim inoogu ahaa in laga hirgaliyo dalka Somalia ,waliba waxaan ku jirna dalalka ay muhimka u yihiin heshiisyadan aan kor ku soo xusney sababtoo ah waxaan degannhay marin biyood caalamka ay isga gooshaan oo uu maro shidaalka 40% lagasoo saaro wadamada khaliijka iyo maraakiibta xamuulka ee caalamiga ah 20%, sidaa awgeed waxaan u baahanahay inaan galino dalka fiijignaan iyo aragti dheer oo lagu xakameynayo dhibaatooyinka ka iman kara marinkaaas waxaana aad muhim u ah inaan kamid noqono xeerarkan aan soo xusney ee kala ah bad-qabka maraakiibta iyo noolaha kusafraya badda dhexdeeda (SOLAS74) ,iyo ka hortaga wasakheynta deegaanka badda ee (MARPOL78), Hey’adda Cilmi-baadhista Badaha Somaaliyeed waxay talooyin badan ku bixisey dhowr jeer oo ay Dowaldda u gudbisey in ladhaqan galiyo heshiisyada caalamiga ah ee aan kor kusoo xusney si aan u helno faa’idooyinka nooga

maqan iyo kamid noqoshada xeerarkan , waxaana rajeynaynaa in xukuumadda fedraalka Soomaaliya ay ansixiso heshiisyadaas caalamiga ah si aan uga mid-noqono saxiixayaasha, waxaa kaloo jira heshiisyo caalami ah oo tira badan waxaa kamid ah heshiisyadaas aadka muhimka u ah :-

- Convention on the Prevention of Marine Pollution by Dumping of Wastes and Other Matter 1972(Heshiiska ka hortaga wasakheynta badda ee kushubidda qashinka haraadiga iyo wasakhda katimaadda berriga, waxaana loo yaqaan LONDON Convention 72.
- Convention on the International Regulations for Preventing Collisions at Sea (COLREG), 1972 (Heshiiska ka hortaga iskudhaca gaadiidka badda iyo xeerarkisa, wuxuuna ka mid yahay heshiisyada ugu muhimsan oo lagu maareeyo isku dhaca iyo ka hortagiisa.

- International Convention on Standards of Training, Certification and Watchkeeping for Fishing Vessel Personnel (STCW-F), 1995 heshiiskan waa mid caalami ah oo kamid ah heshiisyada ugu muhimsan kuwa caalamiga ah .

**Heshiiska Nidaamka Dowladaha Dekadaha leh uga Hortagayaan Kalluumeysiga Sharci-darada ah oo aan nidaam soo marin iyo sidii loo dabar-goyn lahaa (Agreement on port of the Illegal Unreported and Unreguleted Fishing IUU).**

Heshiiskan waa heshiis caalami ah oo ay gar-wadeen katahay Hey'adda Caalamiga ah ee cuntada iyo beeraha **(FAO),** si loo

hirgaliyo nidaam lagaga hortagayo kalluumeysiga sharci-darada ah waxaa ay hey'addan sameysay qorshe arimahaas kusaabsan sanadka markuu ahaa 2005, waxaana qorshahaas loo badalay heshiis sanadka markuu ahaa 2009 shir-weynihii 36aad ee hey'adda ay ku qabatey magaalada Roma ee dalka Talyaaniga oo xarun u ah hey'adda.

Heshiiskan waxaa la saxiixay 22 November 2009 shirweynihii 36aad ee hey'adda cuntada  ee caalamiga ah **(FAO),** shirkaas waxaa kasoo qayb-galay 91 dal oo qeyb ka ahaa wada xaajoodka nuqulka xeerka oo ay wada ogolaadeen,   waxaa saxiixay heshiiskan 23 dal mudada saxiixa dowladaha waxay furneyd 2009-2010 kii, heshiiskan wuxuu dhaqan galay 5 Jun 2016 waxaana soo ogolaatey 25 dal waxaana xubin ka ah 34 wadan sdiaas ayuuna ku yahay heshiis meel mar ah oo ay Soomaaliya kaimd tahay inkastoo aan wali lamarin golayaasha dowladda fedraalka Soomaaliya, heshiiskan ahmiyaddiisa iyo ujeedooyinka loo sameeyey waxaa weeye sidan:

1- Ka hortaga kalluumeysiga sharci darada ah (IUU) aan soo marin habka ogolaanshaha iyo isdiiwaangalinta.
2- Sidii loogu diyaar garoobi lahaa kalluunka sharci-darada loo guranayo iyo aaladihii la isticmali lahaa loona dabar-goyn karo.
3- Xog-isdhaafsiga dowladaha xeebaha leh iyo wada shaqeyntooda ka hortaggga budhcadda kalluunka.
4- Xoojinta dekedaha ay kalluumeystada ku soo xiranyaan ayadoo lagu sameynayo baadhis waxa uu sido markabka xogtiisa oo dhameystiran, iyadoo lawaafajinayo sharcigan.
5- Doonta inteysan kusoo xiran dekedda waa iney soo wargalisaa hey'adaha kushaqada leh si loo ogaado inay

tahay doon si sharci-darro ah uga jilaabanaysey iyo iney tahay mid sharciga waafaqsan.

6- Haddii ay dowladda dakedda leh ay ogaato in doonta rabta iney kusoo xirato dekadda ay tahay mid si sharci daro uga jilaabanaysey kalluun waxaa waajib ku ah dowladda dakedda ineysan ogolaan sii galiddda markabkaas ama doontaas, waxayna ku wargalinaysaa dowladaha kale iyo ururada kashqeeya hawlahan ayadoo laraacayo Qod 9aad, Faqrada 2,3,4 ee heshiiska ka hortagga kalluunka sharci-darada ah (IUU).

**Xeerarka Badaha ee Heer Gobol (Regional Agreements).**

Waxaa jira xeerar ama heshiisyo heer gobol ah oo loola jeedo xeerar ay sameysteen ama ay ku heshiiyeen dalal kooban oo ah isku mandiqad ama isku aag, waxayna hoos tagaan ama ka tusaalle qaadanayaan heshiisyada ama xeerarka caalamiga ah si loo hirgaliyo ama loo aqoonsado xeerarka heer gobol waxaana isugu tagga dalal tiro ah oo isku zone ah,Somaaliya waxay kamid tahay heshiisyo dhowr ah oo ay xubin katahay oo ah heer gobol waxaana ka mid ah heshiisyadaas kuwan soo socda:-

1- **The Regional Organization for the Conservation of the Environment in the Red Sea and Gulf of Aden (Jeddah Convention 1982).**

Wadamada urur goboleedkan ka mid ah waxaa kamid ah; Masar, Sudan, Somalia, Jordan, Saudi Arabia, Djibouti, Yeman. Xarunta ururkan dowliga ah waxa weeye magaalada Jeddah ee carriga sacuudiga, Waxaana la aasaasey ururkan 1982, wuxuuna dhaqan galay 1995 bishii 9aad, ujeedada loo aasaasey ama loo unkamey ururkan

waxaa ugu weyn in la helo badda cas oo nadiif ah oo ka caagan wasakh oo idil madaama Badda cas ay maraan xamuulka shidaalka ay soo saaraan dowladaha carabta qeyb fara badan oo lagu qiyaasey 40% , sida awgeed waxaa loo baahan yahay ilaalin dheeraad ah ,ilaalinta amniga iyo bad qabka badda cas ,ilaalinta shacaabiga ama cral reefka iyo ilaalinta deegaan xeebeedka wadamada dhaca Badda Cas.

2- **Djibouti Code Conduct 2009.**

(Heshiiska ladagaalanka Budhcad-Badeedka kuwajahan Maraakiibta marta Galbeedka badweynta Hindiya iyo gacanka Cadmeed).

Waxaa heshiiskan la saxiixay 29 January 2009, waxaa heshiiskan saxiixiisa qayb ka ahaa dowladahan;

Somalia,Djibouti,Sudan,Yeman,Kenya,Tansania ,Madagascar

Ethiopai,Maldevis,Seychelles,Comoros,Egypt,Eritrea,Jordan,Mauritius,Mozambique,Oman,Saudi Arabia,South Africa,Emirates .

Heshiiskan waxaa loogu talagalay iney qayb ka ahaadaan 21 dal balse waxaa saxiixay 20 dal,dalka aan saxiixin waa jasiiradda yare e France Reneune, heshiiskan ama xeerakan waxaa qaban qaabadiisa iyo habka loo fulinayo leh Hey'adda Caalamiga ah ee Badaha (IMO) waliba qaybteeda nabad-galyada badda .

**Sababaha loo abuurey mashruucan ladagaalanka budhcad Badeedka.**

Mashruucan ladagaalanka Budhcad-badeedka ee Djibouti Code Conduct  sababaha loo sameeyey waxaa weeye markay soo badatey weerarka lagu qaado maraakiibta ganacsiga iyo maraakiibta gargaarka UN-ka ee mara goobtan ,weeraradii markay siyaadiyeen ayaa laga maarmi waayey in la abuuro mashruucan aan kor kusoo sheegney oo ay ku mideysan yihiin dowladahan daris wadaaga ah ,waxaa la abuuray xarumo lagu kala qaato wararka , waxaa kaloo la abuurey xarumo tababar oo ah heer gobol iyo heer wadan oo kor loogu qaadayo aqoonta dadka ku hawlan arimaha ha ahaato xag difaac oo ciidan ama xag tiknoolajiyadda , xarumaha tababarka waxaa kamid ah xarunta loo bixiyey **DRTC Djibouti** oo ah xarun tababar oo ah sidii loo yareyn lahaa weerarada budhcad badeedka ,waxaa ka loo la aasaasey xarumo lagu kala qaadanayo macluumaadka **(information sharing network),** waxaa la abuurey sanadka markuu ahaa 2011 sedex xarumood oo lagu kala warqaadanayo dhanka macluumaadka oo ay dhammaan wadamada ku bahoobey heshiiskan loogu kala qeybiyey sida ay isu xigaan deegaan ahaan waxaana loo kala qaybiyey sida tan; **Darasalam, Mombasa, San'a** xarumahan ayaa waxay ka hawl galayaan ka hortaga weerarada budhcad badeedka iyo isweydaarsiga macluumaadka nabad galayada badda; xarunta San'a  waxaa loogu talagalay iney ka hawlgasho jihada waqooyi,xarunta Mombasa waa dalalka dhaca dhexda ama centralka ,xaunta

Darasalam waxay ku qaybsantahay dhanka koonfurta. warbixinadan waxaa lala wadaagaa urur weynaha NATO oo ciidamadooda ay ka hawlagaalaan gobolka si la isula kaashado ka hortga weeraradaas dhici kara ama dhacay, ayadoo xiliga xarumahan la hirgalinayey ay dhiceen weerardii ugu tirade badnaa 139 weerar, lacagta mashruucan kubaxdey oo ay kudeeqeen wadamada deeq bixiyaasha waxay gaareysaa 1.5bilion oo loogu talagalay in looga hortago khatarta budhcad-badeedka duulaanka ku ah badweynta hindiya iyo gacanka cadmeed.

3- **Nairobi Convention 1985.**

Heshiiska ilaalinta deegaan badeedka iyo horumarinta xeebaha dalalka dhaca galbeedka badweynta hindiya ,heshiiskan waxaa la unkey taariikhdu markay ahayd 21 jun 1985, waxaana lagu aasaasey kulan kadhacay magaalada Nairobi ,waxaana heshiiskan la dhaqan galiyey 30 may 1996 ,waxaa lagu aasaasey 10 dal oo dhaca jihada galbeedka ee B/weynta hindiya oo kala ah; **Somalia, Kenya, Tansania, Comoros, Seychelles, Madagascar, Fracnce, South Africa, Mosambiqe, Mauritius** .

Heshiiskan waxaa xubno ka ah ururo aan dowli ahayn kuwa gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arimahan ilaalinta deegaan badeedka iyo horumarinta xeebaha galbeedka B/weynte hindia, sidoo kale waxaa gacan weyn ka gaysta kormeerka iyo fulinta hawlihiisa Hey'adda caalamiga ah ee

ilaalinta deegaanka ee magaceda loo yaqaan **UNEP.**
waxaa ka loo jira heshiis goboleedyo muhim ah oo aan xubin ka nahay oo uu ka mid yahay;

**Indian Ocean Tuna Commision.**

Urur goboleedkan ama gudi goboleedkan waxaa kumadeysan wadamada xeebleeyda bad-weynta hindiya waxaana sameysey hey'adda cuntada aduunka ee FAO ,waxaana xubno ka ah urur goboleedyo ku hawlan arimaha kaluumeysiga iyo shirkado ka shaqeeya ,waxaa lagu aasaasey ururkan iyadoo laga dab qaadanayo shaqeyn lahaa heshiiskii lagu dhisay Western Indian Ocean Tuna Organization Convention 19 jun 1991 lakala saxiixdey iyo ayadoo la cuskanayo xeerka caalamiga ah ee arimaha badaha qodobadiisa 56, 64 oo sheegaya iney lagama maarmaan tahay in la unko urur goboleedyo iskaashi oo ku saleysan arimaha badaha iyo sidii looga wada ,hadaba ujeedadda loo unkay ururkan ama gudigan waxaa ka mid ah sidii xidhiidh ay u yeelan lahaayeen dalalka ka tirsan waliba xiriir xoogan,isdhaafsiga xogta, tababarada iyo cilmi-baadhista,mideynta suuqa kaluunka, ilaalinta badda, ka hortaga kalluumeysiga sharci darada ah, ka hortaga xaaladah khatarta ku ah kaluunka tunaha, Soomaaliya waxay ku biirtey ururkan sanadka markuu ahaa 2014 oo waxaa saxiixay wasiirkii kalluumeysiga ee xiligaas xilka hayey.

**Xeerarka Badaha ee dalkeena yeeshey mudadii uu jirey.**

Dalka jamhuuriyadda Somalia waxaa soo marey xeerar kala duwan oo ku saabsan arimaha badaha mudadii xornimadiisa ay jirtey iyo ka horba, waxaana dalka Somalia soo marey afar xeer oo kala duwan oo midba midka kale nasakhey, waxayna kala ahaayeen sidan:-

1- **Somali Maritime Code L.1, 1 Febaruary 1959.**

Xeerkan waa kii ugu horeeyey oo ay yeelato dowladda Somalia oo khuseeya arimaha badda ,xeerkan wuxuu hirgalay xilli Soomaaliya aysan qaadan xoriyad oo ay kujirtey dowlad daakhili ah oo ay kor ka maamusho UN-ka , sida awgeed heshiiskan awoodiisa iyo madax-banaanidiisa waa yar tahay waxana uu ku qoron yahay luuqad qalaad, waxaa keenay xiligaas waxaa dalka luuqadaha wax lagu qoro ahaa English iyo Talyaani ,sharcigana ama xeerkan wuxuu dhigayaa awoodda ay Somaliya kuleedahay Badda ama ay xaqqa u leedahay inuu yahay **6nm** oo u dhiganta 11km , waana badda dalka uu leeyahay ,madama xiligaas aysan jirin heshiis caalami ah oo lagu heshiiyey awoodda dalkasta uu leeyahay iyo qeybta uu xaq u leeyahay ee Badda , xiligaas hey'adda maamusha badda waxay ahayd Wasaaradda Ganacsiga ,kadib markii la qaatey xornimadii waxaa mar kale waxkabadal lagu sameeyey xeerkan xiligaas oo ahayd 1966 oo biyaha qaranka lagaarsiiyey 12nm ilaa lagasoo

gaaro, dowladdii kacaanka oo soo saartey sharci ku qoron afka Somali oo awood buuxda kuleh arimaha badaha biyaha qarankana waxaa lagaarsiiyey 200nm.

**2- Sharciga Badaha Soomaaliyeed L.7 0 Septembar 1972.**

Sharcigan waxaa lasoo saarey xiligii Dowladdii kacaanka ay jirtey taariikhda la dhaqan galiyey waxay ahayd 10 semtember 1972, sharcigan wuxuu awood buuxda siinayaa dowaladda somaaliya oo xiligaas wax ka badashey xadkii biyaha qaranka ee horey u jirey kana dhigtey 200ml (370km).

Dowladda Soomaliya ay xaq u leedahay cid aan loo ogolaan inaysan kafaa'ideysan karin, waxay meesha ka saartey aagga gaarka wixii loo yiqiiney ee ganacsiga oo aduunka u aqoonsanaa, dowladda DJS waxay ku adkeysatey in uusan jirin aag furan oo la iska maamusho ilaa lagasoo gaarey heshiiskii caalamiga ahaa 1982 lagalay oo awoodda biyaha aduunka la kala qeybiyey oo dowladda **JDS** ay soo saxiixdey.

3- **Sharciga Badaha Soomaaliyeed L.5 26,01,1989**.

Sharcigan waa kan hadda kashaqeeya JFS oo ansaxa ka ah, wuxuuna waafaqsan yahay xeerka caalamiga ah ee UNCLOS.

Xeerkan L.5 wuxuu ku qoran yahay luuqaddeena Soomaaliga oo aad loo turxaan bixiyey ,xeerkan dowladdu markay faafinta rasmiga ah la galiyey labo sano kadib dowladdii way burburtey gabi

ahaan waxaa meesha kabaxay wixii xeerar iyo shuruuc dowladeed oo ay lahayd dowladda Soomaaliya ,kadib aas aaskii Hey’adda Cilmi-baadhista badaha Soomaaliya 2014kii, Hey’addu waxay guda gashey sidii ay u soo ururin lahad xeerarkii soo jireenka ahaa xiligii burburka uu dhacay ka hor ,waxaa mahad haka gaadho keydiyey buugga Sharciga badaha Soomaaliyeed **L.5 1989 ADM Gaas Prof Farax Axmed Cumar (F.Qare)** oo ahaa xiligii xeerkan la qorayey lataliye sare Wasaaradda Dekedaha & Kaluumeysiga Badda, waxaana usuura gashey inuu dhowr iyo labaatankaas sano uu hayo buuggaas oo noqdey marjac iyo meel laga tix-raaco hawlaha maamulka badaha iyo kheyraadkooda, Hey’addu waxay kadib isku hawshey sidii ay u cusbooneysiin lahayd xeerkan oo noqdey mid dayac ka muuqdo maadaama in kudhow 30sano uu meel iska yaalay markii horana lagu qorey makiinadda loo yaqaan teebka ,dadaal dheer waaxda Qaanuunka Badaha Hey’adda waxaa u suura gashey iney dib u qorto xeerkan qaab casri ah oo kumbiyuutar lagu qorey waliba waxaa lagu kordhiyey meelaha muhimka ah ee waafaqsan xeerka caalamiga ah ee **UNCLOS,** waxayna socotey muddo 10bilood ah hawshaas gabagabadii waxaa soo baxay bug casri ah oo lagaarsiiyey xarumaha dowladda oo idil, wuxuuna noqdey xeer difaac u noqda arimaha badaheenna iyo xuquuqda aan ku leenahay.

**Xeerkan L.5 Muxuu kaga Duwanyahay Xeerarkii horey u jirey.**

1- Waa xeer dowladda **JS** ay sameysay oo baahi jirtey loo unkey halka kuwii ka horeeyey qeybtood ay dowladnimada horteed la unkey.
2- Waa xeer ku qoran afka **Soomaaliga**, wakhti iyo dadaal dheerba la galiyey, halka kuwii ka horeeyey qaybtood ay ahaayeen luuqad ajaanib kuwa ku qoran.
3- Xeerkan waa mid waafaqsan xeerka caalamiga ah ee badaha lana waafajiyey meelaha uu saameynta kaga leeyahy sida; awoodda dalka uu ku leeyahay biyaha badda oo loo kala qeybiyey biyaha gudaha, biyaha dalka**12**, biyaha xigg**12**, biyaha gaarka ee ganacsiga **200 EEZ**, qolfoof Qaaradeedka**150nm**.

   F.G: Eeg Sharciga badaha **L.5** 1989, Qod 5,6,7,8 iyo **UNCLOS** Qod 10,14.

   Waxaa kaloo jira xeerar dalka uu leeyahay oo muhim ah sida **Xeerka Kaluumeysiga Soomaaliyeed Lr.23, 30/11/1985** lasoo saarey wax ka badalna lagu sameeyey **25/10/2014** kii, xeerkan oo aad muhim u ah dhanka kheyraadka nool ee baddeenna ku jira iyo sidii loo dhowri lahaa ,wuxuu kaloo hagayaa siyaasaddda wasaaradda kalluumeysiga iyo kheyraadka badda dhanka ilaalinta deegaan badeedka ,ilaalinta dhirta badda,ilaalinta noolaha sii dabar go'aya ee heshiisyada caalamiga ah laga gaarey dhowristiisa,

sameynta xeer-nidaamiyayaal ay soo saarto wasaaradda oo lagu hirgalinayo xeerarkan la gama maar maanka ay tahay in lasoo saaro, bixinta shatiyada maraakiibta qalaad iyo kuwa wadaniga ah ,cilmi-baaris iyo faafinta macluumaadka xaaladda kheyraadka sanadlaha ah.

Hadaba taariikhdu markay ahayd **11/02/2018** waxaa xamar war-murtiyeed ka soo saarey dowladda JFS iyo maamul goboleedyada dalka ka jira waxayna soo saareen nuqul kusaabsan habka bixinta shatiyada oo uu xeerka kaluumeysiga Soomaaliyeed awoodda oo buuxda uu siinayo dowladda dhexe wasaaradda kushaqada leh sida uu sheegayo **Qod 14** ee xeerka kaluumeysiga ,waxay war-murtiyeedkooda kusheegeen iney wax ka badal ku sameeyeen qodobkaas oo ay awooddii shati bixinta ay u kala qaadeen biyaha dalka iyo biyaha xigga oo ah **24nm waxaana maamulaya bixinta shatiyada maamul goboleedyad** wixii kashisheeya waxaa awoodda bixinta shatiga iska leh dowladda dhexe ,waxay kaloo ku heshiiyeen in la sameeyo hay'ad kaluumeysi oo maamusha habka kaluumeysiga dalka ,waxaa kaloo lagu heshiiyey habka maareynta dakhliga shatiyada kaluumeysiga , Heshiiskan cusub ay dowladda iyo dowladaha xubnaha ka ah ay soo saareen wuxuu u baahan yahay xeerka kalluumeysiga ee 30/11/11/2014.

**Xigasho :**

- **UNCLOS1982.**
- **IMO.**
- **SOLAS74.**
- **MARPOL78.**
- **Nairobi Convention 1985.**
- **Djibouti Code 2009.**
- **Jedda Convention 1982.**
- **Sharciga Badaha Soomaliyeed Lr.5 1989.**
- **Xeerka kaluumeysiga Lr.23 1985.**
- **IUU2009.**

# Dacwadda  Badda Soomaaliya & Kenya

Kiiska dacwadda badda  Somalia iyo Kenya wuxuu soo qaatay wakhti dheer iyo hab-raacyo marba meel joogey, halkan ayaan ku falanqeyn doonnaa taariikhdii kala duwaneyd ay soo qaadatey dacwada  iyo meelihii ay dul istaagtey maalinba maalinta kadambeysa, akhristow dowladda Soomaaliya ayaa dacwadd ka furtay Maxkamadda Cadaaladda Aduunka ee magaceeda la yiraahdo ICJ fadhigeedana uu yahaya magaalada Hague  ee dalka Holand.

**Taariikhda ay Soomaaliya Diiwaangalisey Dacwadda Badda.**

Soomaaliya waxay dacwaddan ka diiwaan-galisey maxkamadda aduunka qeybteeda diiwaangalinta dacwadaha taariikhu markay ahayd 28 August 2014 oo markaas ay noqotey dacwad rasmi ah laguna soo daabacay bogga rasmiga ah ee maxkamadda, Dowladda Soomaaliya waxay u wakiilatey xiligaas inuu gudbiyo dacwada iyo la socodkeeda Wasiirka arimaha dibadda iyo maalagashiga wasiir Dr.**Cabdiraxman Ducaale Bayle,** halka ku xigeen looga dhigey inuu u noqdo wakiilka Soomaaliya u fadhiya qaramada midoobey Safiir **Dr .Cilmi Axmed Ducaale**, waxaa ay DFS ku kordhiysay wakiilada Soomaaliya matalaya 16 Septemper 2014 safiir **Dr.Ahmed Ali Said (fiqi)** safiirka Soomaaliya midowga Yurub u fadhiya maadama looga maarmi waayey hawshan halka ay kadhacyso, xubanahan wakiilada u ahaa DFS ayaa isbadalay kadib markii xukuumaddii reysul wasaare Abdiweli sheikh messha ka baxdey waxayna xukuumaddii ka dambeysey ay wakiilatey xubno kale oo ka tirsan xukuumadda, garwadeenna ka noqdey kiiska oo wakiiladdii ku soo kordhey wasiirka cusub ee arimaha dibadda DFS Dr. Abdisalam Hadliye halka ay ku xigeenka wakiilka ay noqotey qareen Drs Muna M.Sharmaan.

## Nuxurka Dacwadda Dowaldda Soomaaliya.

Dowladda fedraalka Soomaaliya dacwadda ay gudbisey waxay ku salays-neyd xad-gudub ay dowladda Kenya ku soo sameysay xuduudda badda ee Soomaaliya ayadoo damac kaga jiro iney hesho kheyraadka ku jira badda Soomaaliya sidaa awgeed dowladda Soomaaliya iyadoo cuskaneysa sharciga caalamiga ah ee UNCLOS3 iyo Sharciga Badaha Soomaaliya L.5 1989 & sooyaalka taariikheed ee goobtan iney Soomaaliya leedahay waxayna gudbisey kiiskan dacwada ah iyadoo ay ku lifaaqan tahay wax kastoo cadeynaya lahaanshaha goobtaas ha naqoto sharuucda caalamiga ah sida ay tilmaamayaan ee heshiiska lagu yahay, DFS ayaa mar walba u tafa-xeedatey sidii kiiskaas loo xoojin lahaa looguna guuleysan lahaa labaddii xukuumadood ee isga dambeeyey dalka intii kiiskan uu socdey labaduba waxay dadaal dheer u muujiyeen arinkan dacwadda badda, akhristow maxaa xigey gudbinta dacwadda DFS ay gudbisey kadib halkan ayaan kusoo qaadan doonaa wixii xigey.

## Hab-raacii Maxkamadda kadib Diiwaangalintii Dacwadda DFS.

Madaxweynaha Maxkamadda aduunka isagoo xeerinaya xeerka maxkamadda u yaal qodobkiisa 48 iyo qodobkiisa 44 inuu dhaqan galay dacwadda maalintii diiwaanku uu dhacay lana wargaliyey dowladda ay dacwaddu lidka ku tahay ee Kenya wixii intaa ka dambeeyana la gali doono hab-raacii maxakamduu ay ku socon lahayd, dowladda Kenya ayaa iyadana Maxkamadda kusoo wargalisey iney soo magacowdey wakiilo u matala kiiskan waxayna soo gudbisey 30September 2014 ergadeeda, Madaxweynaha maxkamadda aduunka ayaa qoraal ku wargaliyey labada dowladood wakiiladooda iney yimaadaan 15oct2014 maxkamadda si la isula qaato jadwalka dhageysiga kiiska loona

xadido wakhtiga ay kusoo diyaar garoobi karaan dhinacyada kala ah Soomaaliya iyo Kenya sida uu qabo xeerka ay ku dhisantahay maxkamadda aduunka Qod 31, hadba gooreynta soo gudbinta qoraalada dacwadda ee labada dhinac isku difaacayaan DFS waxay soo gudbisey 9bilood oo laga soo bilaabayo xiliga la diiwaangaliyey dacwadda oo ahayd 28Agust 2014 ayna kusoo gudbinayso dacwaddeeda oo qoraal ah, halka dowladda Kenya ay qabsatey 12bilood iney kusoo gudbin doonto isdifaaceeda dacwadda ama ka jawaabidda dacwadda, falanqeyn kadib maxkamadda ayaa loo daayey iney isu soo dhaweyso labada dhinac wakhtiyada ay kala qabsadeen mid walba waxayna maxkamaddu go'aamisey in DFS soo gudbiso qoraalkeeda dacwadda ka dhanka ah Dowladda Kenya 13 July 2015 halka dowladda Kenya loo xadeeyey 27 May 2016, sidaas ayaana loogu gudbey habraacii koowaad ee labada dhinaca .

***Gudbintii DFS Kiis Qoraalkeeda.***

Sidii horey loogu balansanaa oo ay jadwalka dacwada u soo dajisey Maxkamadda aduunka waxay DFS gudbisey kiis qoraalkeedii ay ku tilmaamayso lahaanshaha rasmiga ah ee goobtan kuna xadideyso xuduud badeedkeeda rasmiga ah iyo meesha uu gaarsiisan yahay, qoraalkan ayaa ah mid aad u weyn una baaxad weyn ayna diyaariyeen khuburo dhan kasta oo cilmi leh xag sharci, xag sooyaal taariikh, xag juquraafi ama soodimaha iyo xag ciidanba, khubaradan waxaa ka mid ah qareeno ajaanib ah oo ay DFS ay qabsatey ahna kuwa aad u sareeyo cilmigooda dhanka sharciga horeyna ugu soo guuleystey kiisas badan oo dhanka badda ah, nuquladan loo gudbiyey dacwada ayaa la gudbiyey xiligii loo xadidey DFS 13 July 2015 waxayna ka koobnaayeen afar majaladood oo halkii majaladba ay xooga saareyso hal dood ama hal ciwaan guud ahaan marka la isku daro afarta majalo waxay ka

koobanaayeen 1620 waraaq ama page, waxaad dareemi kartaa sida la isugu taxalujiyey hawshaas oo aan waxba looga tagin dhankastoo dacwaddu ay khuseyso, waana qoraalka dacwadeena uu hadda ku saleysan yahay guushana inoo keeni kara ahna mid lagu kalsoon yahay qoraalkaas, qoraalka ay DFS gudbisey waxaa dheeri ku ah oo cadeyntiisii wata xad-gudubka ay Kenya ka wato badda Soomaaliya oo ah qodista ama barista shidaalka (oil&gas) lagana dalbado maxkamadda aduunka iney hakiso dhammaan hawlihii ka socdey meesha ka hor intaan dacwada la gudin taasna waa lagu guuleystey, waxaa kaloo nuqulkan lagu xusey iney waxba kama jiraan tahay heshiiska ay dowladda Kenya ku doodeyso in lala galay ee ahaa is-afagarad ayna la gashey xukuumaddii KMG ahayd, heshiiskaas oo aan lasoo marin hab-raacyada heshiisyada banaanka ah lamariyo sidaasna uu ku burey.

**Jawaabtii ay Soo gudbisey Dalka Kenya.**

Dalka Kenya ayaa soo gudbiyey jawaab ay kaga jawaabeyso dacwadda ay ka gudbisey DFS 7 Oct 2015.

Dowladda Kenya ayaan haysan wax weyn oo ay ku doodo aan ka ahayn heshiis is-afgarad ah ayaa nala galay oo dowladdii KMG ahayd ayaa nala gashey, waxay kaloo golaha la timi qoraalo E-mails khaas loo leeyahay oo ay leeyihiin waxaa nala wadaagay xiriirkaas wasiiro iyo masuuliyiin kale oo ka tirsan TFG xiligaas jirtey iyagoo ku doodaya iney ku qanacsanaayeen hawsha is-afgaradka socotey xiligaas, Emails kii ayey kiiskooda kasoo buuxiyeen ay wadaageen dhanka DKM ee Soomaaliya iyo warbixino ku saabsan in Kenya ay marwalba garab taagneyd 30kii sano ee Soomaaliya burburka ahayd, qaxooti bandanna ay hayso muddadaas shirar bandanna ay u qabatey garabyada dagaalsan ee Soomaaliya, waa sax in dowladda Kenya dad fara badan oo Soomaali ah caawisey balse kama dhigna iney qaadato dhulkeena

ama baddeena iyadoo taas badal kadhiganaysa wax la aqabali karana ma ahan, dunida oo dhan waa mid ka jirta xagga gurmadka markii masiibooyin ka  dhacaan waana wax heshiis lagu yahay qoxootinimada oo lawada saxiixay, Soomaaliyaba waa soo dhaweyn lahayad cidkastoo qoxooti ah haddii ay dhibaato jirto, isku soo duub dowladda Kenya ayaan haysan wax macquul ah oo ay dacwadda la tagto aan ka ahayn labada dal ayey u taal arinkan horeyna waan ugu heshiinay inaan xalisano muran keena, halka DFS ay leedahay haloo daayo maxkamadda kiiskan.

## Dhageysigii koowaad ee Maxkamadda (ICJ).

Maxkamadda aduunka ee Huge ayaa sameysey dhageysii koowaad ee labada dal isugu yimaadaaan hoolka ICJ taariikhdu markay ahayd 19 Sept ilaa 23 Sept, halkaas oo qolo walba ay soo bandhigtey dooddii ay soo gudbiyeen iyo su’aalihii ay hordhigayeen qolada kale waxaana kasoo qayb galey diplomaasiyiin labada dhinac kasocota iyo qareeno, iyo bulshada rayidka dad ka socda  qareenada DFS matalyey ayaa dhageysigii kowaad aad usugu taxalujiyey iney soo bandhigaan qoraalkii lasoo sameeyey iyo sharaxaad dheeri ah, halka Kenya ay ku gaabsatey Maxkamaddu xaq uma lahan iney kiiskan qaado sabbabtoo ah DFS waxaan galney heshiis is-afgarad ah ama (MOU) anageyna noo taalaa sidaan u xalisan lahayn waa hawl u taal labada dal, ergada Soomaaliya ayaa arinkaas kabiya diidey cadeeyeyna iney ICJ ay kiiskan qaado xaqna u leedahay ayna ku kalsoontahay go’aanka Maxkamadda Caalamiga ah ee Huge.

Dhageysigii dacwadda kadib ee garsoorayaasha ICJ markay soo gaba-gabowdey kadib labada dhinac waxaa la weydiiyey su’aalo isku mid ah iney qoraal ahaan uga soo jawaabaan, labada dowladood ayaa kasoo jawaabay mid walba su’aalihii laweydiiyey, Soomaaliya waxay mar walba ku dadaalaysey sidii kiiska loogu

dhameyn lahaa wakhtiga loo xadidey oo uu san dib dhac ku iman halkan Kenya ay rabto inuu dheeraado kiiska mudo dheerna uu socdo.

Dowladda Soomaaliya ayaa guulo la taaban karo kasoo hoyisey kiisku intuu socdey maxkamadda oo ogolaatey iney kiiska qaado iyada halka Kenya ay rabto in banaanka lagu dhameeyo taas oo guul daro ku noqotey dowladda Kenya rabteyna iney hor istaagto ICJ iyo iney kiiskan gasho.

**Soomaaliya Maxay filaysaa**

Dowladda Soomaaliya ayaa waxay aad u rajeyneysaa iney ku guuleysato kiiskan dacwadda badda ee soo socdey mudo 5sano ah, dowladda ayaa haysata waxyaabo badan oo xaqiiqda ku salaysan waana sidan soo socota:

1- Heshiiskii labadii guumeysi ee labada dal kala guumeystey waxay ku heshiiyeen 1924 inuu xadkooda u dhaxeeya, heshiiskaas wax ka dambeeyey oo la galay labada dhinac majiro waana kan dunida oo idil aqoonsan tahay manta, labada dalna kaas uunbey kala wareegeen guumeystaha qoraalkii heshiiskaas labada guumeysi waxaa lagu lifaaqay kiiska dacwadda Soomaaliya.
2- Xad badeedka ay Kenya sheeganayso goobta toos ugu aadan haddii la aado dhanka xeebta waa dhul Soomaaliyeed taasna waxay cadeyn u tahaay iney Kenya rabto dhul boob sharciga aduunkana uu qabo in xariiq toosan loo qaado dhanka bariga marka la cabirayo xuduud badeed.
3- Kenya oo aan horey u gudbisan biyahan iney iyada leedahay kaliya uu damaca soo galay kadib markii la ogaadey kheyraadka meesha kujira, kadibna ay UN ka ka codsatey

iney wax ka badal ku sameynayso xuduud badeedkeeda taas oo xujo cad ku ah.

4- Kenya oo bilowdey caburin siyaasadeed iyo kicinta madalo kale oo bah-wadaag ay ku yihiin dowladda Soomaaliya iyadoo ka cararaysaa guul darada kaga iman karta dhanka maxkamadda taasna waa guul u soo hoyatey dalka Soomaaliya.

5- Kenya oo bilowdey inay badasho qareenadeeda xili ay dacwaddu mareyso meel aan laga noqon Karin iyadoo ula jeedadeeda ay tahay carqaladeenta go'aanka maxkamadda iyo dib u dhigga wareegii ugu dambeeyey ee maxkamdda, DFS arinkaas way cadeysey inaan hal maalin dib loo dhigeyn aysan raali ka ahayn dib u dhig una diyaar garowdey imaanshaha maxkamadda.

Gaba-gabadii kiiska dacwadda wuxuu marayaa meeshii go'aan ridista maxkamadda qolo kastana waxii faafaahin ah way gudbisey waxaan sugnaaba waa natiijo aad u wanaagsan kana farxisa dhammaan shacbiga Soomaaliyeed oo ilaah ku manaystey dhulkaas baaxadda weyn, waxaa halkan bogaadin mudan labada Madaxweyne ee isga dambeeyey xilka Madaxweyne **Hassan Sheikh Maxamuud** oo dadaal dheer ku galay sidii dacwadda loo geyn lahaa maxkamadda iyo Madaxweyne **Mohamed Abdulaahi Farmaajo** oo isagan u istaagey dhameystirka kiiska dacwadda iyo guul ka gaariddiisa, waxaa kaloo mahad celin mudan wakiilada Soomaaliya u matalaya dacwaddan oo dadaal dheer kasameeyey hawshan iyo qareenaddii dacwadda laf dhabarta u ahaa, waxaan sugnaaba waa Dowladda Soomaaliya oo guul ka gaarta dacwaddan.

**Xigasho:**

-https://www.icj-cij.org/en/case/161

-**WRITTEN STATEMENT OF SOMALIA CONCERNING THE PRELIMINARY OBJECTIONS OF KENYA.**

**-MEMORIAL OF SOMALIA (CASE CONCERNING MARITIME DELIMITATION IN THE INDIAN OCEAN).**

**-PRELIMINARY OBJECTIONS OF THE REPUBLIC OF KENYA**.

# XAALADDA BADMARIDDA EE BADAHEENA

Soomaaliya waxay ku taallaa mandiqadda Geeska Afrika waxay xuduud badeed la leedahay dowladaha: D'Jabuti,Yemen & Kenya.

Bedka dhulkeedana waa 637,657 sq. Km. Waxay leedahay xeeb aad u dheer oo gaareysa 3,333km. Biyaha dalkuna waa 350 M.B, Baaxdeedana tahay 3 jeer dhulkeena.

Haddaba, baddaas baaxadda intaas la eg leh boqolkiiba boqol kama hayno warar sugan marka laga reebo meelaha aan ka sammeynay survey-ga (Baarista) sanadahii 2017 – 2019ka, ee xeebaha u dhaxeeya Jazeera ilaa Ceel Macaan 40 KM, oon ka qornay kana soo qaadnay sawirro waxyaabahii aanu ku soo aragnay muddadii aanu ku gudajirnay survey-ga, Dhibaatooyinka jira oo dhacay muddadii burburkii dowladda dhexe ee soomaaliyeed iyo dagaaladii ahliga ahaa ee isbiirsaday ma yara.

Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed uma helin awood dhaqaale oo ay ku soo baarto dhibaatooyinka badmaridda ee ka jira badaha Soomaaliyeed. Laakin waxay diiwaan gelisay meelo badan oo ay maraakiib ku caarisay & Haaman ay ku jireen haraadiga Sunta ee warshadaha Niyuukleerka iyo isbitaallada oo ay dowladaha ku hormaray warshadaha ku aaseen badaha Soomaaliyeed, Xilligii Burburka ee dowlad la'aanta.

Soomaaliya waxay leedahay dekedo fara badan oo isugu jira caalami iyo kuwa macmal ah oo ay ku soo xertaan Maraakiibta & Doomaha ka  keena ganacsiga qaaradaha kala duwan ee dunida ayna wax kala soo degaan ganacsatada gudaha iyo kuwa dibadda. Tan ugu weyn waa dekedda Muqdishu waane ay u dhan yihiin adeegyadeeda caadiga ah oo kala duwan, sidoo kale waxaa heer sare ah Dekedaha Barbara,Boosaaso iyo Kismaayo.

Sida la wada ogsoon yahay dalka Soomaaliya wuxuu lahaa Muqdishu Light house oo ay soomaalida u taqaanay “Masawac”, kuna yiilay agagaaraha Madaxtooyada Soomaaliya gaar ahaan dhakada sare ee taagga Raadiyo Muqdishu, kaasoo lahaa nal wareegayo oo Maraakiibta ku hagayey Dekedda Xamar. Dekedaha kale, sida Berbera, Boosaaso iyo Kismaayo,waxay wada leeyihiin fannaaro iyo Adeegyo wanaagsan.

Haddaba, maraakiibta dooneysay inay soo galaan dekedaheena waxay bering (jiho) ka qaadan jirtay isla light house-yada wallow ay wataan charts tusinaayo halka ama marinka ay u soo marayaan kolka ay doonayaan inay ku soo xirtaan dekedaheena, inkastoo inta aanay soo gelin dekeddaha marka hore lagala hadli jiray barta hoggaaminta dekedda (port Control) si loogu sheego haddii ay toos u soo xiranayaan oo ay u bannaan tahay boos, (Berth) ay ku soo xirtaan ama waxaa la fari jiray inay dhigtaan baroosin (anchorage) biyaha ka baxsan gudaha dekedda, si haddii uu bannaanaado boos,

(Berth) ay ugu soo xirtaan looguna diro “Pilot” ku soo xiro booska uga bannaanaaday marsada gudaha dekedda..

**F.G**. laba siyaaboodba waa loo soo xiri jiray maraakiibta:

Biyaha Badda ee u dhaxeeya Jasiira iyo Ceel Macaan waxaan ka helnay 14 (afar & Toban) BURBUR Maraakiib oo ku jira biyaha Badda, taasoo khatar weyn ku ah badmaridda (Navigability); waxaa inoo muuqata, in xaaladda Badmaridda ee Xeebaha Dalka ay u baahan tahay Hubin, taasoo Dalbeysa awood Cilmiyeed, Mid dhaqaale iyo Mid farsamo oo ku immaan karta Mashruuc ballaaran oo Dowladdu la kaashato Dowladaha Caalamka.

Dhinaca kale, haamanka (Conteenarrada) wasaqda sunta ah ay ku jirto oo ayaguna ka soo dhacaya Badda, haddana daadsan xeebaheena, oo Hey’adda Cilmi barista badahu ay ka diwaangelisay 24 Haamood, ayagu waxay Dhib ku yihiin Badmaridda Biyaha Xeebaha ku dhow oy adeegsadaan doomanka kala duwan.

Waxaa intaas la sii jira in Manaaradaha Xeebta (Becons & light houses) oo wax weyn ka tara Hagidda Maraakiibta mareysa badaheena oo tiro ahaan ahaayeen 34 (Soddon & afar) ku teedsan xeebaha Dalka, maanta ma shaqeeyaan oo waxay u baahan yihiin Dib u habeyn Buuxda oo isugu jirta Dhismo, qalabeyn iyo sugidda tilmaamaha caalamiga ee Badmaridda.

# Taariikhda Casriga ee Soomaaliya

## Soogeliddii Isticmaarka iyo kala qaybsigii Dalka Soomaaliyeed.

### Soogeliddii Isticmaarka

Sannadkii 1789kii, guuto ciidanka badda Ingiriiska ee ka kooban saddex Xaryan dagaal lana oran jiray Leopard, Deadulus iyo Orasta oo uu hoggaaminayay Taliye la oran jiray Blanket, ayaa Dowladda Ingiriisku u soo dirtay Badda Cas iyo xeebta Afrikada Bari inay sahmiso. Guutadaas Xaryannada goortay dhaax soo marayso, ayay duufaan ku kacday una riixday dhanka Waqooyi tan iyo xeebaha Soomaliyeed. Inkastoo ay si xoog leh isugu deyday inay duufaantaas ka gudubto hadanna waxay dhaafi kari waayday inay barroosinka dhigato, 15kii, Disembar, iskudarka webiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya, halkaasoo ay ku hakatay dhawr toddobaad. Intay halkaa joogtay, ayuu taliyaha guutada sahan ugu diray xeebta koox badmaaxiin ah oo wadata afar doomood inay biyo u soo dhaamiso. Kooxdaasi goortay xeebta caga dhigatay waxaa durbadiiba soo weerarray dadkii aaggaa degganaa oo dilay dhamme kooxda u madax ahaa iyo lix badmaax qabsadayna labo ka mid ah oo goor dambe lagu siidaayay lacag badan oo madaxfurasho ah, intii kaloo baxsatayna dirqi ayay ku gaareen xaryannada. Guutadaas goortay ku soo laabatay Jasiirada

Sanjibaar, ayay dabadeed dib ugu soo ambabaxday makha, iyadoo soo martay badda Benaadir iyo Waqooyi Bari ee Soomaaliya waxaana uga muuqday, xaryannada dushooda, magaalooyinka Benaadir iyo Waqooyi Bari, kumana ay dhiirran kolkale inay soo galaan marsooyinka Soomaaliyeed, taasoo ugu wacnayd cabsi ay kaqabeen Soomaalida awgeed, hasayeeshee, taasi ma hakin gumeysteyaasha sahannaday ka wadeen Soomaaliya.

Sannaddadii 1826 iyo 1842kii, waxaa magaalooyinka Muqdisho iyo Baraawe sahan ku tegay Dhamme W.F. Awen oo dhalashadiisu ahayd Ingiriis oo watay markab yar, wuxuuna isku deyay inuu halkaa ka sameeyo maxmiyad Ingiriis ah, haseyeeshee, way u suuragali wayday, diidmo xoog leh oo ay Soomaalidu kala hortimid darteed, iyadoo dhaqan ahaan aan u oggolayn in dhulkeeda hooyo talis shisheeye oo gumeysi ah soo galo. Sarkaalkii Ingiriiska ahaa waxuu xusay inay Soomaalidu dareen ka qabtay shisheeyaha aadna isaga ilaalin jirtay waxuuna yiri: "Saraakiishayada, goortay dhulka cagaha dhigeen, meel ayaa lagu xiray, haseyeeshee, siday doonaan ayay ugu dhaqdhaqaaqayeen goobtay ku xirnaayeen. Aragtida iyo muuqaalka magaalada waxay ka arkayeen meeshay ku xirnaayeen oo ahayd dhuka meel ka sarreeysay dushana ka faydneed. Xabsigu waxuu ahaa mid adag, haseyeeshee, waxay Soomaalidu nagula dhaqantay, asluub wanaagsan, si ay dhaqankooda wanaagsan noogu muujiyaanna, goortaannu soo ambabaxaynay waxay, qaar ka mid ah, xeebta nagu

sagootiyeen waxay deeq noogu keeneen xoolahay dhaqdaan". Waxaa kaloo magaalada Baraawe sahan ku yimid sarkaal Ingiriis ah oo la oran jiray William Christopher madaxna ka ahaa shirkad saldhigeedu ahaa Hindiya xafiisna ku lahayd Sanjibaar, isagoo la socday koox sahmiyeyaal ah oo watay markab la oran jiray Tigris. Waxuu dhawr jeer sahmiyay, bilihii Abril iyo maajo 1843dii, hareeraha wabiga Shabeele. Wararkuu Chrisropher ka uruuriyay dalka Soomaaliyeed waxaa goordambe lagu qoray, sannadkii 1884tii, wargeyska "Royal Geographical Society of London", warbixintaasi waxa soo koobaysay xog-ogaalkii ugu horreeyay ee dalka Soomaaliyeed laga uruuriyay ee ujeedooyinka gumeysi lahaa. Waxaa xigay sahan kaloo uu hoggaaminaayay dhamme C.I. Gruttenden, sannadkii 1846dii, oo laba jeer si qarsoodi ah u sahamiyay xeebta Soomaaliyeed kadibna Dowladdiisa u gudbiyay warbixin gumaysiga qaymo weyn u lahayd. Sannaddadii 1845-1848dii, sahamiye Faransiis ah oo la oran jiray Charles Guilian oo ahaa Kabtan ka tirsan guutada Duccouedie, ayaa sahmiyay meelo badan oo Koonfurta Soomaaliya iyo saldanadii Geladi kadina soo saaray warbixintii gumeysiga ugu qaayaha badnayd oo ka koobanayd saddex buug iyo lifaaqyo tilmaamayeen dhaqanka, taariikhda iyo astaamaha dhulka Soomaaliyeed.

Bishii Maajo 1890kii, sahamiye Robecchi Bricchetti ayaa kasoo degay dekedda Hobyo waxuuna sahan ku maray xeebta taniyo Caluula, asagoo sahmiyey togga Nugaal iyo gobolka waqooyi Bari.

Bilo yar kadib, waxuu billaabay sahan adag oo uu isaga gudbay Koonfurta Soomaaliya iyo Waqooyiga, waxuuna maray waddo dhererkeedu yahay laba kun oo km. waxuu sameeyay qoraalo fara badan oo ku saabsan Khariidadda, Taariikhda, Astaamaha dhulka, Isirka dadka, Dhaqanka, Afka, Dhirta, Xoolaha, Cimiladda iyo Diinta waxuuna ka qoray buug la yiraahdo "Soomaaliya iyo Banaadir" oo ah 726 bog. Haseyeeshee qoraalladiisu waxay jaha wareeriyeen aragtida caalamkii gumeysiga halkuu wax u iftiimin lahaa, iyogoo aan aragti kaqabin halkay Khariidadda Adduunka Soomaaliya kaga taal. intuu Robecchi Briccheti ku hawlanaa sahankiisa xeebta Hobyo iyo Caluula, Enrico Baudi di Vesme waxuu soo gaaray Berbera, Burco taniyo Koonfurta Soomaaliya. Sannad kadib, 1891dii, isagoo uu la socdo Inj. Giuseppe Candeo, waxuu soo maray Galbeedka Soomaaliya waxuuna ku sifeeyay jannadii Soomaaliya, waxuuna sahankiisa soo gaaray Iimey, dhanka sare ee Wabiga Shabeele. Inkastoo uu huwanaa magaca Shirkadda Joqraafi ah haddana, danta Baudi di Vesme, waxay ahayd mid siyaasi keli ah . Waxuu ahaa sarkaal ciidamada ka tirsan waxaana la socday Injineer khariidadaha sameeya iyo 30 ilaaloo Soomaali hubaysan ah. Waxuuna xilkiisu ahaa inuu sahamiyo waddooyinka isku xira Gobolada Xabashidu gumeysato iyo Soomaaliya ee Filonardi oggoleysiiyay inay hoos yimaadaan gumeysiga Boqortooyada Talyaaniga. Baudu di Veme waxuu Soomaalida Galbeed u ballan qaaday in Talyaanigu ka difaaci

doono weerar kasta oo kaga yimaada dhanka qaaba'ilkii ladaganaa, waxaana u suuro gashay inuu oggoleysiiyo odoyaashii Soomaaliyeed ee aaggaa degganaa inay magangelyo Talyaaniga weydiistaan.

**Qaybsigii Dhulka Soomaaliyeed.**

Gumayste yaashii reer yurub, waxaa ay tartan u soo galeen iney qaybsadaan waddamada Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika, ayagoo raadinaya dhul ay degaan oo ay ka helaan khayraadka ay Warshadaha dalalkoodu u baahanyihiin. Dhulka Soomaaliyeed waxaa qaybsaday Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashida, ayagoo arkayey muhimada ay leeyahiin Badda Cas iyo Badweynta Hindiya oo labaduba ku yaal geeska Afrika.

Sannadkii 1842, waxaa yimid magaalada Berbera nin kasocday maamulkii Ingiriiska ee Cadan. Ninkaas oo la oran jiray Johnston, waxaa ku xigey oo yimid dalka Soomaaliya Sannadkii 1854tii, Richard Burton oo asna socdaal ku soo maray Saylac, Harar iyo Berbera. Richard Burton iyo dadkii la socday, waxaa lagu weeraray magaalada Berbera asagoo ku fakaday fara cidi leh. Richard Burton, wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyey oo reer Yurub ah oo socdaal dheer ku mara dhulka Soomaalidu degto ee Geeska Afrika.

Sannadkii 1839kii, Ingiriisku wuxuu qabsaday magaalada Cadan, oo ahayd meel muhimad weyn u leh maamulkii Ingiriiska ee

Hindiya. Sannadkii 1885tii, Ingiriiska oo doonayey inuu u helo ciidamadiisa jooga Cadan Xoolo ay qashaan, ayaa wuxuu heshiisyo la galay qabaa'ilka Ciise, Isaaq iyo Gadabuursi si uu u soo galo dalka. Sannadkii xigayna Ingiriisku, wuxuu heshiis kaa la mid ah la saxiixday Madax-dhaqamedkii Warsangeli oo fadhigoodu ahaa Sanaag. Ingiriisku wuxuu si rasmi ah u soo galay waddanka Soomaaliya 1884tii, bishii February. Nin la oran jiray A.Hunter, oo ka wakiil ahaa Dowladdii Ingiriiska ayaa heshiisyo la saxiixday qabaa'ilaka Soomaaliyeed kaas oo yimid magaalada Berbera. Hunter wuxuu qorsheeyey in Ingiriisku ku yeesho qunsuliyado magaalooyinka Berbera, Bullaxaar iyo Seylac oo dhammaantood ku yaal Badda Cas.

19kii Desember 1943dii, Ingiriisku wuxuu Ethiopia ku wareejiyey qayb ka mid ah dhulkii Soomaaliyeed ee horay Ingiriisku usiiyey. Heshiiskaasi oo dhaqan galay Sannadkii 1944tii, Ingiriisku wuxuu tixraacayey, heshiiskii uu la galay Ethiopia Sannadkii 1897dii, wuxuuna dhaafsaday dhulka Soomaaliyeed dano uu u wakiishay Ethiopia iney uga fuliso webiga Nile iyo konfurta Sudan oo markaas Faransisku kula tartamayey. Faransiska iyo Ingiriiska oo qaybta ugu weyn ka qaatay gumeysigii Qaaradda Afrika, waxay tartan ugaleen kala qoqobida dadyowga ku dhaqan Afrika. Haddaba waxaa jirtay iney isku qabsadeen Faransiiska iyo Ingiriisku meel la yiraahdo Fashoda oo ku taal koonfurta Suudaan. Arrintaasina waxay dhacday Sannadkii 1899dii, kadib markii koox

faransiis ahi ay sahan ku tagtay Fashoda oo ku taal webiga Nile, Ingiriisku wuxuu Ethiopia ka doonayey iney ka kaalmeyso arrinta ku saabsan Fashoda iyo inaan Faransiisku ku soo durkin webiga Nile, haddii ay siyaad sameysana ay Ethiopia abaal marin u qaadandoonto dhulka Soomaaliyed. Heshiiskaasna waxaa u saxiixay Ingiriiska Rannel Rod oo wakiil u ahaa Boqortooyadii Ingiriiska. Dowladdii Xabashidana, waxaa wakiil u ahaa Ras Maconen oo madax ka ahaa Harar.

Kadib markii  Shirkadii Singlayr ay ka heshay Saliid (Oil) GALLADI oo ka mid ahayd British Soomaaliland, Ingiriisku wuxuu damcay inuu wadahadal la galo Ethoipia, si aney dhulka Hawd oo Gallaadi ka mid tahay Ethiopia u qaadan. Ingiriisku wuxuu u soo bandhiga Ethiopia iney qaadato Xeebta Saylac illa iyo Harar. Arrintaas Ethiopia wey ku gacan seyrtay, waxayna weydiisatey Ingiriiska, inuu dhulka Hawd uga bedesho dhul ballaciisu le'eg yahay 100 myl oo ay ku jiraan Seylac iyo meelo kale oo ka mid ah Soomaali Galbeed. Ingiriisku codsigaas wuu diidey, wuxuuna aakhirkii ogolaaday in Ethiopia ay qaadato dhulkii uu hore u siiyey. Bishii Nofembar 1954tii, ayey ahayd markii ay Ethiopia gacanta ku dhigtay qaybtii ugu danbeysey dhulkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku siiyey.

5tii bishii Jannaayo 1955tii, dadka Soomaaliyeed markii ay maqleen heshiiskan aad bay uga xumaadeen. Waxaana dhacay

mudaharaadyo badan oo looga soo horjeedo arrintaas Ingiriisku ku kacay oo kasoo horjeeda heshiisyadii uu la galay madaxda qabaa'ilka Soomaaliyeed. Isla sanadkaas, waqooyiga waxaa ka sameysmay urur uu madax ka ahaa Maykal Maryano (Michael Mariano) oo la oran jirey NUFRRH (National United Front For Retaining Reserve Area and Haud).

Ururkaas (NUF), oo shaqadiisu ahayd sidii loo soo celin lahaa dhulka Ingiriisku bixiyey, ayaa ka helay shacabka taageero aaney helin xisbiyadii kale ee waqooyiga ka jirey. Bishii Maarso 1955tii, wafti ka kooban Michael Mariano, Abokor Xaaji Faarax iyo Cabdi Daahir ayaa u kicitimay Muqdisho si ay taageero ugu helaan halganka ay ugu jiraan hanashada dhulka Ethiopia la siiyey.

Bishii Febrraayo iyo maajo Sannadkii 1955tii, laba wafdi ayaa tagey dalka Ingiriiska si ay ugu gudbiyaan cabashooyinkooda ay ku doonayaan in loo soo celiyo dhulkii Ethoipia la siiyey. Madaxdii ay la kulmeen, waxay hordhigeen heshiisyadii ay qabaa'ilka Soomaaliyeed la galeen Dowladdii Ingiriiska, kuwaas oo dhigayey inaan Ingiriisku siin karin dhulka Soomaaliyeed cid kale. Arrintaas waxaa looga dooday Baarlamaanka Ingiriiska, waxaana dhacday in Dowladdu ku gacanseyrtay dadkii ka tirsanaa Baarlamaanka oo u doodayey in dhulka Soomaliyeed aan la siin Ethoipia. Waxaa kaloo jirtey iney jaraa'idka ka soo baxa dalka Ingiriiska ay aad wax uga qoreen dhacdadan, ayagoo ku canbaareynaya dowladda tilaabada

ay qaaday. Markii ay ka samreen inuu Ingiriisku wax la qabto codsigooda, wafdigii Soomaaliyeed waxay isku dayeen iney arrintan hor geeyaan golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobey, si ay ugu gudbiso Maxkamada Caalamiga ah. Waxay filayeen iney taageero ka helaan dalka Masar oo ay islahaayeen waxay idinku taageerin arrintaan si loo soo hor dhigo Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey, dabadeedna loogu gudbiyo Maxkamad Caalami ah. Wafdigii Soomaliyeed wax taagero ah kama helin Dowladdii Masar oo ay ku tashanayeen, halkaas ayuuna dadaalkoodii ku soo afjarmay.

**Waxqabadkii Gummaytayaasha:**

Ingiriisku wax qorshe horumarineed ah kama sameyn intuu haystay dhulka Soomaaliyeed. Maxaa yeelay, danaha uu ka lahaa ayaa waxay ahayeen in Faransiiska iyo dalalka kale ee reer Yurub aaney ku soo xadgudbin dhulka wadamada Badda Cas kulaalaya sida Suudaan iyo in uu ka dhigto "dukaankii hilibka Ciidamadiisa jooga Cadan".

Gumeyste yaashii, Faransiiska iyo Talyaaniguba waxay uga tageen dhulkii Soomaaliyeed ee ay kala gumeysan jireen wax la taaban karo, waxaa tusaale loo soo qaadan karaa dhismaha dekeda Jibuuti iyo wadada xadiidka ah ee isku xirta Jibuuti iyo Ethiopia oo uu Faransiisku sameeyay. Talyaaniga oo asna ka sameeyay koonfurta dalka wadooyin dhowr ah oo laami ah, beero iyo warshado yaryar.

Dowladdii Faransiiska oo ayaduna rabtay iney qaybteeda ka qaadato boobkii dhulka Soomaaliyeed, waxay soo gashay magaalada Obokh iyo Tadjoura taariikhdu markii ay ahayd 1862dii, ayadoo la tartameysey Ingiriiska oo haystey Cadan. Faransiisku wuxuu bilaabay inuu dhiso Magaalada Jibuuti 1888dii, halkaas oo ay deganaayeen dad Soomali ah. Markii dambe Faransiisku, wuxuu xarun ka dhigtay Jibuuti si uu u helo maraakiibtiisu meel ay ugu  sii nastaan marka ay ku sii jeedaan mustacmaradihiisa ku yaal Indo &china iyo in aan yurubta kale uga dheereyn qabsashada geeska Afrika.

Talyaanigu waxuu si rasmi ah u qabsaday xeebaha koonfureed ee Soomaliya markii taariikhdu ahayd Desember, 1888dii. Sannadkii 1889kii, Boqor Cismaan iyo Yuusuf Cali Keenadiid, waxay heshiis la saxiixdeen Isticmaarkii Talyaaniga oo ay aqbaleen inuu dusha ka ilaaliyo.

Markaa kadib, Talyaanigu wuxuu ogaysiiyey saxiibbayaashiis heshiiskii Berlin kaas oo lagu qaybsanayey Qaarada Afrika, in asagu hadda wixii ka danbeeya uu isticmaarsado Koofurta Soomaaliya. Talyaanigu wuxuu qabsaday xeebaha Benaadir 1892dii, kuwaas oo hoos imaan jirey maamulkii Sanjibaar Suldaankii Sanjibaar wuxuu ogolaaday inuu Talyaaniga ka kireysto isticmaalka dekedaha Muqdisho, Merka iyo Baraawe lacag dhan 160,000 oo Rupees Sannadkiiba muddo 25 sano ah.

1925kii, Ingiriisku, wuxuu ku wareejiyey Talyaaniga, Gobolka Kismaayo oo horay uga mid ahaan jirey mustacmarada Ingiriiska.

Madaxii qunsuliyada talyaaniga, Vinceso Falonardi (fensoy Felonaade), oo Dowladdii Talyaaniga uga wakiilka ahaa heshiisyada aan kor ku xusnay, wuxuu markii dambe furtay shirkad ka shaqaysata koofurta Soomaaliya. Xaafiiskii ugu horreyeyna wuxuu ka aasaasay Cadale oo Talyaanigu u bixiyey Itala. Shirkadaasi muddo markii ay shaqeneysey ayeey kacday waxaana la wareegay shirkad kale oo la oran jirey Shirkada ganacsiga Talyaaniga ee Benaadir, taas oo xarumo ku yeelatay magaalooyinka Cadale, Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Luuq. Talyaanigu wuxuu magaalada Jowhar ka sameeyey mashaariic beerood. Waxaa kaloo uu sameeyey tareen isku xira Muqdisho, Afgooye iyo Jowhar si uu wixii uga soo go'a beeraha u iib geeyo Jowhar.

Muddii u dhexeysey 1935-1940, kadib markii faashistihii Talyaanigu ka adkaaday Xabashida ummad Soomaaliyeed waxaa soo maray wakhti ay hoos yimaadeen isticmaarkii Talyaaniga. Talyaanigu wuxuu ka lahaa dano waaweyn dhulka uu haystey, asagoo ku talo galay inuu dejiyo dad Talyaani ah dhulka beeraha ku wanaagsan ee koofurta Soomaaliya. Kumanaan Talyaani beeraley, ganacsato iyo farsamo yaqaano isugu jira ayaa ka shaqayn jirey waddanka. Taasina waxay kor uqaaday dhaqaalihii

dalka qaybta ama deegaanada uu Talyaanigu haystay. Inkastoo uu xukunkiisu aad u xumaa, shaqooyinka Talyaanigu abuuray Benaadir iyo nawaaxigeeda, waxaa shaqaalo ahaan ka faa'iideystay dad badan oo Soomaaliyeed.

Bilowgii dagaalkii labaad ee aduunka, Talyaanigu wuxuu ka qabsaday Ingiriiska qaybihii uu kahaystay dalka Soomaaliya. Laakiin arrintaasi ma sii soconoo Bishii Maarso 1941dii, Talyaaniga waxaa ka adkaaday Ingiriiska oo ka saaray Geeska Afrika oo ay ku jirto Ethiopia. Sannadkii 1942dii, ayaa Boqorkii Haile Selassie oo masaafuris ugu maqnaa Londan, Ingiriisku dib ugu soo celiyay xukunkii Ethiopia.

Mustacmarka Afraad oo qayb ka qaatay gumeysigii dhulka Soomaaliyeed wuxuu ahaa Boqortooyadii Xabashida oo uu hoggaminayey Menelik 2aad. Menelik oo heshiisyo beecmushtari la sameystay Dowladdii Talyaaniga oo markaas qabsatay meelo ka mid ah Geeska Afrika, wuxuu fursad u helay in uu soo degsado hub iyo rasaas inta uu doono. Markii dambena Menelik hubkii, wuxuu ku qabaday dhul ballaaran oo ay leeyihiin dadyowga Soomaalida, Oromada iyo Cafarta. Intii u dhexeysey 1887-1897dii, Menelik wuxuu ku guuleystey inuu qabsado imaaradii Harar iyo qayb ka mid ahayd dhulka loo yaqaan Soomaali Galbeed (Ogaden).

Xabashidu waxay kaga duwaneyd mustacmaradii reer yurub, ayada oo aan lahayn waxsoosaar iyo dhaqaale ay ku maamusho

howlaheeda mustacmarnimo. Haddaba si ay u quudiso askarteeda, waxaa dhaqan u ahayd iney dhacdo xoolaha Soomaalida iyo Oromada. Sababaha uu Menelik u qabsaday dhulka Oromada iyo Soomaaliya, waxaa ka mid ahaa inuu Askartiisa gaajeysan u helo wax ay cunaan. Intii u dhexeysay sannadihii 1890kii, illa iyo 1897kii, waxaa lagu qiyaasay 100,000 oo lo' ah 200,000 oo geel ah iyo 600,000 oo ari ah, xoolaha laga dhacay dadkii xoola dhaqatada ahaa ee Soomaaliyeed, Ciidamada xabashida oo aan Isticmaali jirin hilibka iyo caanaha geela midnaba, geela ay dhacaan waxay uga bedelan jireen dadkii laga soo dhacay markii ay ka dabayimaadaan xoolahooda lo' iyo ari. Halkii neef oo geel ah waxay ku bedelan jireen 3 lo' ah ama 10 ari ah.

10kii bishii Nofember 1947dii, Wasiir Ku-xigeenkii Arimaha Dibeda ee Ethiopia Weld-Forester, wuxuu warqad u qoray Bevin oo ka tirsanaa madaxda Dowladdii Ingiriiska, asagoo leh *"waxaan wax badan sugeyney in na loo soo celiyo dekadahayagii qadiimiga ahaa si markale calanka yagu uga babado badaha addunka. Illaa iyo intii shisheeyuhu qabsaday dhulkayaga Eritrea Italian Somaliland, waxaan sugeyney in loo soo celiyo dalkoodii hooyo ee Ethiopia. Inkastoo la wada ogsoon yahay in labadaas gobol ay ka tirsanaan jireen Ethiopia hadana waxay in badan ku jireen gacan shisheeye"*.

Warqadaan oo laga helay maktabadaha Ingiriiska, waxay markhaati ka tahay in Ethiopia waligeed ku taameysey iney la wareegto dhammaan dalka Soomaliya.

La soco cadadka 11aad --

Mahadsanid.

# Dadaalkii

Hey’adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed (H.C.B.S) oo sawirro lagu muujiyey,

(waana qeyb yar oo dadaalkaas ka mid ah)

## Dadaalkii Hey'adda Cilmibaarista  Badaha Soomaaliyeed  (H.C.B.S)



ADM. Faarax oo Barlamaanka ka hor jeedinaya Ahmiyadda ay Dalka u leedahay Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed (2014).

## Hey’adda oo ku billaabeysa howsheeda tababar gudaheeda ah (2014)




ADM. Faarax oo sharaxaya casharada joogtada ah ee todobaadlaha ah



Kaadarka HCBS oo ka faa’ideysanaya casharada joogtada ee todobaadlaha ah.




Ag.Waaxda Culuunta Badda Eng Cabaas oo sharaxaya cashar ka mid ah casharada joogtada ah.



Kaadarka HCBS oo ka qeybgalaaya aqoonisweydaarsiga billaha ah

# Aqoon isweydaarsi guud ee arrimaha Badda (2014)



Admiral Faarax iyo allaha u naxariisto Xil. Xeyd iyo MD Sandheere oo ka qeybgalaya aqoonisweydaarsiga guud



Qaar ka mid ah Xildhibaanada barlamaanka oo ka qeybgalaya aqoonisweydaarsiga




Capt. Mooge oo ka hadlaya aqoonisweydaarsiga guud.




Sawir guud oo ah ka qeyb galayaasha aqoonisweydaarsiga ee lagu qabtay xarunta HCBS.

**Baarista iyo dib u habeynta Sharciyadii Badda ee Dalkeenna (2015)**





Sharcigii Badda Soomaaliye L.1 ee 26 Janaayo 1989 oo makiinad ku qoran, oo ADM Faarax soo badbaadiyey




Sharcigii Badda Soomaaliye L.1 ee 26 Janaayo 1989 oo HCBS computer KU QORTAY AYADOO WAAFAJISAY UNCLOS.

**Kutubihii ugu horreeyey oo H.C.B.S ay qorto, si looga faa'iideysto Cilmibaarista Badda (2015)**









SOMALI MARINE RESOURCE RESEARCH CENTER
(SMRRC)

Somali Marine Study

Prepared By:
Eng. Abass Nor Mahdi
Researcher in the Center

Mogadishu – Somalia
2 0 1 4



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

HAY'ADDA CILMI BAARISTA BADAHA
SOOMAALIYEED (HCBS)

XOG URUURINTA WAX SOO SAARKA KHAYRAADKA
NOOL EE BADDA

ISBEDELKA JAWIGA BADAHA IYO WSS
ISKAASHATOOYINKA KALLUUMAYSIGA EE
GOBOLKA BANAADIR

W/D:

WAAXDA CULUUMTA BADDA EE HCBS

Mogadishu-Somalia

July-2015

# Dowladaha Badweynta Hindiya iyo sida ay uga Faa'iideystaan badahooda.

AG. WAAXDA Bii'ada:
Mustafe Xasan Nuur

# Wasakheynta Badda Caasimada Muqdisho



Xeebta Caasimadda oo dhibaata weyn ka jirta ka dib markii qashin fara badan lagu shubay



In ka badan 30 Bulaacad oo ka yimaada magaalada aya wasaq kala duwan ku shuba badda



Bulaacad ka mid ah kuwa badda caasimadda oo qashin nuuc walba lehna ku shubeysa



Caagag iyo qashin kale oo xeebta lagu soo daadiyey



Waa bulaacad kale oo wasaqda ay ku shubeysa laga arki karo sawirka



Neef dhintay oo badda lagu soo tuuray

# Baaris lagu sameeyey heerka Wasakhda Xeebta Caasimadda



Ceynad Carro ah oo laga qaadayo xeebta Caasimadda si loogu sameeyo cilmibaaris



Ceynad Biya ah oo sidoo kale laga qaadayo biyaha badda si loo baarro

Cilmibaarayaasha oo howshooda ku guda jira







Xasan Max'ed Xasan oo ku dhex jira Lapka ay howsha ku fulinaayeen



Cabdiraxmaan Diiriye oo baaraya ceynadi laga soo qaaday xeebta Caasimadda

# Natiijada Baarista Biyaha Xeebta Caasimadda

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 2 RESULTS | SITE 3 RESULTS | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 6.13 | 6.16 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | | | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.67 | 5.29 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | 1.7 | 14.8 | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 9.8 | 22.0 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | 7805 | 7640 | 6630 |
| COD | 160 | 64 | 240 | 50 |
| Cd | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.02 | <0.02 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37°C; cfu/mL | 6700 | 260 | 7700 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22°C; cfu/mL | 7500 | 350 | 8700 | 25 – 250 |
| Total Coliform count; | 110 | 12 | 368 | NIL |

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|
| pH | 8.20 | 8.19 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | No | No | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 4.16 | 6.87 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 8.58 | 6.43 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| COD | 412 | 47.10 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | 164.50 | 20.50 | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | <0.001 | <0.001 | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.01 | <0.01 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37°C; cfu/mL | 230 | 78 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22°C; cfu/mL | 310 | 120 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 30 | 3 | 245 | 67 | NIL |

Natiijada ka soo baxday Cilmibaaristii lagu sameeyey xeebta Muqdsiho

(F.G= Heerka Wasakheyntu aad ayuu u sareeyaa waana Halis)

| Parameter mg/L | SITE 1 RESULTS | SITE 1 RESULTS2 | SITE 2 RESULTS | SITE 2 RESULTS2 | SITE 3 RESULTS | SITE 3 RESULTS2 | SITE 4 RESULTS2 | EPA /WHO STANDARD |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| pH | 6.16 | 8.20 | 6.13 | 8.19 | 6.16 | 8.16 | 8.07 | 6.5 - 8.5 |
| Oil &grease | | No | | No | | 4.43 | 23.18 | 5-10 |
| Dissolved Oxygen (DO) | 5.13 | 4.16 | 4.67 | 6.87 | 5.29 | 6.29 | 6.31 | 6 – 14 |
| Turbidity (NTU) ; | 2.3 | | 1.7 | | 14.8 | | | 2 |
| Total Suspended Solids (TSS) | 10.3 | 8.58 | 9.8 | 6.43 | 22.0 | 6.43 | 23.85 | 30 |
| Total Hardness as(CaCO3) | 7230 | | 7805 | | 7640 | | | 6630 |
| COD | 160 | 412 | 64 | 47.10 | 240 | 29.44 | 14.72 | 50 |
| BOD | | 164.50 | | 20.50 | | 12.00 | 6.50 | 50 |
| Hg | | <0.001 | | <0.001 | | <0.001 | <0.001 | 0.001 |
| Pb | | <0.01 | | <0.01 | | <0.01 | <0.01 | 0.01 |
| Cd | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.05 |
| Cr | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.02 | <0.01 | <0.01 | 0.1 |
| Total Plate Count @ 37°C; cfu/mL | 6700 | 230 | 260 | 78 | 7700 | 6400 | 240 | 25 – 250 |
| Total Plate Count @ 22°C; cfu/mL | 7500 | 310 | 350 | 120 | 8700 | 7100 | 390 | 25 – 250 |
| Total Coliform | 110 | 30 | 12 | 3 | 368 | 245 | 67 | NIL |

Natiijadi oo faahfaahsan




Min Kawaanka Gowraca xoolaha Deg. C/Casiis/ Kaaraan ilaa Dekedda Cusub

## BANDHIGGII BAARISTA BIYAHA CAASIMADDA OO LAGU QABTAY HOOLKA WASAARADA D. & G. BADDA




Xasan Max'ed oo soo bandhigaya Natiijada ka soo baxday barista (hoolka Was. Dek. & Gaadiidka badda)




Qaar ka mid ah aqoonyahanka ku dhaqan Muqdsiho oo ka soo qeyb galay bandhigga Natiijadii ka soo baxday Cilmibaaristi lagu sameeyey xeebta Caasimadda




Wasiirka Dek. & Gaadiidka Badda Mudane Allaha u naxariista Nuur Faarax Xersi oo ka soo qeyb galay soo bandhigidda Natiijada

**Biyaha Badda Caasimada oo khatar gelin kara Magaalada. Sababtu waa Darbiyadii Badda oo la burburiyey, taasoo keeni karta in magaalada biyo qarqiyaan haddii biyaha baddu xoogaa yar kacaan ama uu yimaado Sunaami.**



Baddii oo soo gashay Xeebta




Biyihii badda oo ku soo fiday degaan xeebeedka

# Cilmibaaris ku saabsan


## Noocyada ugu fiiican (Qaar) Kalluunka iyo Sicirkooda ee Suuqyada Muqdisho








XAAF NA

[PRICE So.Sh./ Kg.]
DAMBIRIGA
140000
120000
100000
80000
60000
40000
20000
0
Jun
Jul
Aug
Sep
Oct
Nov
Dec
[Month]
DAMBIRIGA





[PRICE
So.Sh./ Kg.]
ARAGOSTA
250000
200000
150000
100000
50000
0
ARGOSTADA
Jun
Jul
Aug
Sep
Oct
Nov
Dec
[Month]


**Haamanka Wasakhd Ku Jirto Ee Baddeeena Lagu Aasay oo xeebta daadsan H.C.B.S waxay ka soo tirisay 24 Haamood (Counteners)**



Wafdigii HCBS uu hoggaaminayey ADM. Faarax iyo Gud/ha Deg. Wadajir oo dul taagan halkii ay ku soo caarisay HAANTA SUNTA lagu tuhmayo 30KM K/Moq.



Muuqaalka Haanta oo Jabalada ku hoos jirta



Waa haan weyn oo badda ka soo caaridey

# Arrimaha Badmaridda (Navigation)

**Arrimaha Badmarinta Xeebaha Caasimadda, waxaa H.C.B.S ka heshay 14Burbur Maraakiib hore inta u dhexeysa Tuulada Jasiira ee Koonfurta Muqdisho (10km) iyo Marsada Ceel-Macaan Waqooyiga Muqdisho-30km. Taasoo ka dhigeysa xeebtaan (40km) mid aan la mari Karin, Doomaha yaryar mooyee. Sidoo kale xeebaha Dalka waxaa ku yiil Manaarado iyo Fannaarado (Light-house) oo ahaayeen 34 oo hagi jiray maraakiibta mareysa Badaheenna, manta wax shaqeeya kuma jiraan oo dayactir xooggan ayey u baahan yihiin**

.



Waa Markab ku soo caariyay Dekedda Macmalka ah ee Ceel Macaan_Sanadkii 2002da, sababta kaliftay soo caarintiisa waxay aheed sida aan wararka ku helnay matoorka Markabka oo shaqeyn waayay. Wuxuuna rar ganacsi ah ku dejiyay (rogay) isla dekedda dabiiciga ah ee Ceel macaan.



Waa Markab aad u baaxad ballaaran. Wuxuu dhuxul ka soo qaaday Dekedaha Kismaayo ama Baraawe wuxuuna rarkaas u waday Waddamada Khaliijka isagoo marayo badweynta hindiya, ayaa waxaa qabsaday dab ka kacay dhuxusha saaran. Kadib markii ay isqabsadeen Ololka iyo Qiiqa dhuxusha ayuu maciin baday in uu Xeebta ula soo cararo wuxuuna ugu dambeyntii ku soo caariyay Xeebta, Tuulada Waragente ee Waqooyiga Muqdishu, sanadka markuu ahaa: 2002dii.



Waa Markab weyn ee rar ganacsi ku soo rogay Dekedda dabiiciga ah ee Ceel Macaan. Waxaa magaciisa la oran Jiray M/V ABHA, wuxuuna ku soo cariyay agagaarka Dekedda macmalka ah ee John Carlo, sanadkii 2003dii, waxaa laheed Dowladda Sacuudiga wuxuuna ka diwaan gashanaa dawladda Abuu Dabei.



Waa Doon aad u baaxad ballaaran kana sammeysan birta adag ee loo yaqaano (iron ore), waane doomankii marsada Ceel macaan wax ka daabuli jiray ee halkaasi ku burburay daqbayaaqadii 2006 dii, waxaane ilaa iyo hadda ow ka muuqdo burburkooda isla Dekedda Dabiiciga ah ee Ceel Macaan.

# Akadeemiyada Culuumta Badda ee Khaliif Macow

Akadeemiyada Culuumta Badda ee Khaliif Macow oo ay asaastay H.C.B.S.2015Kii, kana kooban saddex Kulliyadood oo Dufcooyinkii koowaad ee Kulliyadaha Culuumta Badda iyo Qaanuunka Badda Bishaan December 2019ka.

## Xafladda furitaanka:




**Wasiirka Kalluumeysiga MD Ceymoy iyo Guddoomiyaha Hey'adda C.B.S ADM Faarax Qare ayaa xariga ka jaray Akademiyadda**




Guddoomiyaha HCSB ADM. GAAS. PROF. FAARAX AXMED CUMAR OO KA HADLAYA FURITAANKA AKADEEMIYADDA.



Waxa ka mid ahaa dadkii ka soo qeyb galay xafladda aqoonyahanka Soomaaliyeed iyo Saraakiisha Ciidanka Badda.




Madaxa Akadeemiyadda Cabdinuur Cabdiqaadir Max'ed oo ka hadlaya muhiimada ay u leedahay Akadeemiyada Bulshada Soomaaliyeed




Qaar ka mid ah wasiirada xukuumada oo ka soo qeyb galay xafladda furitaanka Akadeemiyadda.




Ardayda **Kulliyadda Qaanuunka** oo cashar qaadanaya



Ardayda oo cashar ku saabsan dabaasha ku qaadanaya Xeebta Liido

# Shirarkii ay ka qeybgashey H.C.B.S.




MOMBASA 27-29/04/2015

Midig: 1) Md Xuseen Cali Axmad lataliyaha Wasaarada Kalluumeysiga

2) Wasiirka Kalluumeysiga & Kheyraadka Badda Maxamed Cumar Ceeymooy

3) ADM. Faarax Axmed Cumar Guddoomiyaha HCBS.

4) Aqoonyahan Soomaali ah oo deggan Kenya.



Eng. Cabaas HCSB midig koowaad iyo wasiir ku xig wasarada howlaha guud bidix koowaad oo ka qeyb galaya tababarka Isbedelka Cimilada: Addis Ababa – Etoobiya.



Genral Axmed Sh. Lataliyaha HCBS, Ag. Waaxda Qaanuunka Badda Cabdiraxiim Warsame iyo Ag. Waaxda Qorsheynta Saciid Xasan (dhexbartanka safka hore) oo ka qeyb galaya shir looga hadlayay Nabadgelyada Badaha oo ka dhacay Tananariv – Madagasgar 22-44/09/2015



Ag.Waaxda Bii'ada badda Mustaf Xasan Nuur iyo Xasan Max'ed (dhexbartanka safka) oo ka tirsan isla waaxda oo ka qeybgalaya tababar ku saabsanaa la qabsiga Isbadalaka Cimilada oo lagu qabtay Nairobi-Kenya.



Ag.Waaxda Bii'ada badda Mustafa Xasan Nuur oo ka gudoomaya shahaado Madaxa UNDP ee Soomaaliya.

# Wacyigelinta Shacabka



Admiral Faarax oo Raadiyaha Qaranka ka jeedinaaya wacyigelinta arimaha badda



Admiral Faarax oo TV Qaranka ka jeedinaaya wacyigelinta arimaha badda





Md Cabdinuur oo ka hadlaya arrimaha badda


# Majallada Juula Jawaay


**Waxay soo baxdaa laba jeer sanadkii, waxaana lagu faafiyaa natiijada Cilmibaarista H.C.B.S, Wacyigelinta iyo Guud ahaan howlaha Hey'addu qabato.**

**Cadadkaan waa lambarka 10aad**



## Ka qeybgalka Arrimaha Guud ee Dalka.

Safarkeenni Doolow ee 2jeer 16-18/2015 iyo 1.1-4.1/2018). Guddigii tegay labadaa jeed halkaas waxaa ka mid ahaa ADM.Faarax Qare, Gud. H.C.B.S.

EEG. Sawirkaan: waa qofka 1aad (Bidix) oo fadhiya ee aqrinaya Dastuurka KMG.



Guddiyadii oo ku shiraya geedaha Mukaga hoostooda oo ku dhinac yaalla Wabiga 18/11/2015- Dooloow



ADM. Faarax, G/S Cabdi Xasan (X.D.S) iyo Taliyaha Saldhigga Booliska ee Doolow oo taagan Erridda Bari ee kaabadda Wabiga Jubba, Doolow 18/11/2015




ADM.Faarax Qarre wuxuu ka mid ahaa wafdigii dowladda ee goobjoog ka ahaa Maxkamadda ICJ markey eegeysay dacwaddii Badda ee ka dhaxeysay Soomaaliya iyo Kenya.

Safka hore waxaad ka arkeysaa Dr. Axmed Cali Daahir Xeer-ilaaliyihii Qaranka, Dr. Max'ed Cumar Saalixi lataliyaha Madaxweynaha iyo Dr. Mudan Yusuf Garaad Wasiirkii hore ee Arrimaha Dibadda ee DFS.

## Booqashooyin

1. Waxaa soo booqday H.C.B.S R/Wasaare MD Xasan Cali Kheyre. Wuxuuna siiyey Tusaalooyin.
2. Waxaa soo booqday H.C.B.S ku-Xig. R/W MD Mahdi Maxamed Guuleed (Khadar), oo kormeer ku sameeyey una sameeyey ballan qaad taageero ***(Qalab Cilmibaaris).***
3. Waxaa dhowr kal Booqday Wasiirka Dek. Iyo G.Badda **Xil.Drs, Maryan Aweys** iyo Wasiir Ku-Xig, Xil. MD Cismaan Daalo, oo siiyey Hey'adda talo, tusaale iyo toosin intaba.



ADM Faarax oo warbixin siinaya Wasiirada & wasiir ku xigeenka Wasaarada Dekedaha ayadoo ay wada joogaan Cilmibaarayaasha iyo kaaliyayaashooda. Miiska dushiisa waxaa buuxiyey Kutubaha iyo warbixinada Cilmibaarayaasha HCBS

4. Sidoo kale Was. Ku-Xig. Wasaaradda Waxbarashada iyoTacliinta sare **Xil. Faysal** oo si gaar ah u soo booqday dhowr jeer Akadeemiyada Culuumta Badda. Una ballan qaaday gacansiin. Wasaaraddu waxay siisay Aqoonsi Akadeemiyada.

5. Waxaa kormeer inoogu yimaada si joogto ah Guddiga Qaraka ee Shaqaalaha Rayidka oo talo iyo Tusaale na siiya, nana kormeera. waxaanna kala kulannaa Amaan.



Xubnaha Guddiga Qaranka ee shaqaalaha rayidka iyo Guddoomiyaha Hey'adda

# Abaalmarinno

**Waxaa caada u ah H.C.B.S inay abaalmariso Cilmibaarayaasha iyo shaqaalaha muujiyey Dadaal dheeraad ah.**



Guddoomiyaha HCBS oo muujinaaya Shahaada sharafta la guduunsiinaayo qaar ka mid ah Cilmibaarayaasha Hey’adda.




Ag. Waaxda Culuunta Badda Ing. Cabaas oo shahaada sharaf la gudoonsiinaayo.



Ag. Waaxda Qaanuunka Cabdinuur Cabduqaadir Maxamed oo shahaada sharaf ka gudoomaya wasiir ku xigeenka wasaarada haweenka iyo xuquuqda aadanaha Mrw. Xil. Muumino Sh. Cumar iyo Guddoomiye ADM. Faarax.




Xasan Dooyow oo ka tirsan waaxda culuunta badda oo shahaada sharaf la gudoonsiinaayo akhlaaq wanag awgeed.



Qaar ka mid ah aqoonyahankii ka soo qeybgalay xafladda abaalmarinta.



Xildhibaano iyo Wasiiro ka soo qeybgalay xaflada




Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed (H.C.B.S) waxay ku guuleysatay Shahaado Sharafta Hey'addaha Dowladda ee sida wanaagsan u gutay xilkooda ee 2018.

**Dalka, Dadka, Diintiisa & Dowladdiisa**

# ALLA NOO DHOWRO

# وكل عام وانتم بخير

# 2020KA